Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
*Xafiiska Madaxweynaha*

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
*Office of the President*

**SHARCI LR.13**
**OGGOLAANSHO ANSIXINTA SHARCIGA**
**MAAMULKA DAKHLIGA**

**Taariikh: 27/10/2019**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafkiisa (F) ee Dastuurks KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Ref:437/10/B-10/19 taariikh 26/10/2019 kuna saabsan Ansixinta Sharciga Maamulka Dakhliga oo ay soo ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo Ansixinta Sharcigaan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Maamulka Dakhliga.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 27/10/2019**

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J. F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

**Ref:** 437/10/B-10/19 :الرقم

**Mogadishu,** October 26, 2019: التاريخ

**Ku: Madaxweyanaha JFS,**
**Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada Federaalka,**
**Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare,**
**Og: Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta iyo La-Xisaabtanka Hay'adaha Dowladda**
**Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda**
**Og: Hantidhawrka Qaranka**
**Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka**
**Og: Waaxda Shuruucda**

**Ujeedo: Ansixinta Sharciga Maamulka Dakhliga**

M.ne Madaxweyne

Si waafaqasan qodobka 82aad faqaradiisa 3aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya waxaan halkaan kuugu soo gudbinayaa Sharciga Maamulka Dakhliga_oo ay ansixiyeen labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Hindise-sharciyeedku wuxuu si dhamaystiran u soo maray dhammaan habaraacyada uu farayo Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo Xeer-hoosaayada labada Aqal.

Waxaa kale oo la socda sharciga lifaaqyo cadaynaya marxaladihii kala duwanaa ee uu soo maray.

M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan qodobka 90ad Xarafka (f) ee Dstuurka JFS kaa codsanaynaa in aad sharcigaan ku meel mariso xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah una noqdo sharci, si waafaqsan qodobka 84aad iyo 85aad ee Dastuurka Dalka.

Waxaad iga guddoontaa salaan qiimo badan.

**M.ne Cabdiwali Ibrahim Sh. Mudey**
**Ku Simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna**
**Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka**

GOLAHA SHACABKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
THE HOUSE OF PEOPLE OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
مجلس الشعب لجمهورية الصومال الفيدرالية
OFFICE OF THE SPEAKER
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA
مكتب الرئيس

## Hindise Sharciyeedka Maamulka Dakhliga

| Ku Simaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Cabdiwali Ibraahim Sheekh Muudey | Taariikh: Oct 26, 2019 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: Oct 26, 2019 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka BJFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiixa: M.ne Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux | Taariikh: Oct 26, 2019 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/339/B-10/19 Taariikh: 24/10/2019 :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare BFS =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Maaliyadda J.F.S. =Muqdisho=
Og:- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Maamulka Dakhliga)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-10/KF6/02/2019** kuna taariikheysan **24$^{ka}$ Oktoobar 2019** kuna ansixiyay Goluhu **Sharciga Maamulka Dakhliga:**

- Waxaa codeeyay: **31 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **31 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad u gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen.Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## QARAAR GOLE

## ANSIXINTA SHARCIGA MAAMULKA DAKHLIGA

Muqdisho,

24ka Oktoobar 2019

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

Tix: GAS/B-10/KF6/02/2019 **Taariikh**: 24 Oct. 2019

Kalfadhiga 6[aad]

Kulankiisa 4[aad]

**GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga Maamulka Dakhliga oo ay nuqulkiisii koowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **22/10/2019**; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82[aad]** iyo **Qod.83[aad]** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.49[aad]** iyo **Qod.50[aad]** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61[aad] (1) (3)** ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in Sharciga Maamulka Dakhliga loo ansixiyo sida uu ku soo ansixiyay Golaha Shacabka.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga Maamulka Dakhliga.

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiisa 6[aad], kulankiisa 4[aad], oo ay soo xaadireen **32 Senatar** (Soddon iyo Labo Senatar).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

**Qod.1aad**

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod wada ogol ah ku ansixiyay **Sharciga Maamulka Dakhliga** isaga oo aanan waxba ka beddelin.

**Qod.2aad**

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta
iyo La-Xisaabtanka Haay'adaha Dowladda

جمهورية الصومال الفدرالية
مجلس الشعب
لجنة الشؤون الميزانية، المالية، التخطيط،
ومحاسبة هيئات الدولة

**House of the People of the Federal Republic of Somalia**
**Committee on Budget, Finance, Planning and Financial**
**Oversight of Public Institutions**

---

Ref: GMGSH/0048/19 Date: October 9, 2019

Ku: Gudoomiyaha Golaha Shacaba
------------------------------

Og: Xubnaha Guddiga
------------------------------

**Ujeeddo: Soo Gudbin Sharciga Maamulka Dakhliga**

Mudane Gudoomiye,

Guddiga Maaliyadda, Miisaaniyadda iyo Qorshaynta oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo ee ku cad qodobka 69aad farqadiisa 1aad xarafkiisa (b) ee Dastuurka KMG iyo qodobka 2aad faqradiisa 1aad, Qodobka 46aad faqradiisa 2aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka.

Mudane Gudoomiye, waxuu guddiga halkaan kuugu soo gudbinayaa aqrinta labaad ee sharciga maamulka dakhliga. Fadlan ajendaha ku dar.

Mahadsanid

Xil. Maxamuud Cabdullahi Siraaji

--------------------------------------------

Gudoomiyaha Guddiga

JAMHUURIYADDA FED.SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 341
TR: 13-10-19
SAXHX:

**KULANKA LABAAD EE WADA TASHIGA HINDISE SHARCIYEEDKA MAAMULKA DAKHLIGA DALKA JFS**

---

**Sabti, 28-sep-2019 Garoowe**

# Talooyinka Ka Soo Baxay Kulanka Wada Tashiga Hindise-sharciyeedka Maamulka Dakhliga

**Hordhac:-**

Kulanka labaad ee wada tashiga Hindise Sharciyeedka Maamulka Dakhliga Dalka JFS oo ka qabsoomay Caasimadda Dawladda Puntland ee Garoowe **26-28/sep/2019**, waxa ka soo qayb-galay Guddiga Maaliyadda ee Golaha Shacabka BJFS, Guddiga Maaliyadda iyo Xisaabaadka Golaha Wakiillada Puntland, Wasaaradaha Maaliyadda Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka Gobolka Banaadir. kulankan oo ay marti-gelisey Wasaaradda Maaliyadda Puntland, waxaa lagu falanqeeyey Hindise Sharciyeedka Maamulka Dakhliga, waxana si wada jir ah la isula qaatay qodobada hoos ku xusan.

1. Maadaama Hindise Sharciyeedkan meel-marintiisu ay muhiimad gaar ah u leedahay dalka, in lagu biiriyo wixii talooyin ah loona gudbiyo guddiga Maaliyadda BJFS.
2. Waxa Hindise Sharciyeedka gundhig looga dhigay lana waafajiyey mabaadi'da Dastuuriga ah ee Federaalka **qodobbada 48-aad, 50-aad iyo 51-aad.**
3. Arimaha farsamada, luqada, qaab-dhismeedka sharci iyo siiqada nuxurka qaanuuneed waxa loo daayey Golaha Shacabka BJFS, iyo gudiga Maaliyadda Federalka maadaama aan guddigu hadda waqti ku filan u hayn.
4. Ujeeddada xeerka waxa loo qoray" **Ujeeddada Xeerkani waa in lagu Maamulo Dakhliga Dalka JFS".**
5. In qodobka 107-aad ee ka hadlaya erey-bixinta( fasiraad), loo soo raro qodobada ugu horeeya si fahamka xeerku u sahlanaado.
6. Qodobbada 4-aad iyo 104-aad waxa lagu daray " **Isagoo la tashanaya Wasiirada Wasaaradaha Maaliyadda Dawladaha Xubnaha ka ah DFS".**
7. Qodobka **104-aad** farqadiisa **1-aad** waxa laga saaray " **Xuduudaha gudaha dalka".**

8. **Qodobka 104-aad** waxan ku soo darnay farqad 11-aad oo u qoran" **Soo saaridda shuruucda ku xusan qodobkan waa in ay si wada jir ah uga tashadaan dawlada Federaal iyo Dawladaha xubnaha ka ah DFS.**
9. **Qodobka 105-aad** ee hindise sharciyeedkan waxa loo raacayaa lana waafajiyey **qodobka 125-aad** ee dastuurka JFS.
10. Qodobka **106-aad** waxa laga saaray" **Ogow"**
11. Waxa lagu daray Hindise Sharciyeedka qodob cusub oo loo habeeyey sidan hoos ku xusan;

**Awoodda Sharci Fulineed**

**Iyadoo la tix-gelinaayo mabaadi'da Federaaliga ah ee ku xusan qodobbada 48-aad, 50-aad iyo 51-aad ee dastuurka KMG JFS ,Wasaaradaha Maaliyadda ee dawladaha xubnaha ka ah dawladda Federaalku waxay masuul ka yihiin una xil-saaran yihiin;**

i. **Maamulka dakhli iyo canshuureed ee heerkooda xukuumadeed.**
ii. **Ka qayb-qaadashada iyo ka talo-bixinta xeer-nidaamiye kasta uu soo saarayo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda heer Federaal kuna saabsan dakhliga iyo canshuuraha dalka.**
iii. **Ka qayb-qaadashada wax-ka-bedelka quseeya xeerarka dakhliga dalka.**

**Gaba-gabo**

Guddiga gaarka ah ee dawladaha xubnaha ka ah dawladda FS oo loo xil-saaray ka talo-bixinta hindise sharciyeedka maamulka dakhliga dalka, waxay soo jeedinayaan in Golaha Shacabka ee BJFS ay tix-gelin siiyaan talooyinkan la isku raacay, si mug lehna u saxaan arrimaha farsamo ee kuxusan **qodobka 3-aad** ee warbixintan, ka dibna ay meel-mariyaan maadaama ay jirto baahi guud oo dalku waqtigan u qabo gudbinta xeerkan.

**Allaa Mahad Leh**

**-----Dhammaad----**

M.S JSS BRA



SWSS

***JAMHUURIYADDA FADERAALKA SOOMAALIYA***

# ***HINDISA SHARCIYEEDKA MAAMULKA DAKHLIGA 2019***

Table of Contents

**MADAXA Iaad: UJEEDO IYO ERAY BIXIN** ........ **6**
Qodobka 1aad: Ujeedooyinka Sharciga ........ 6
Qodobka 2aad: Fasiraad ........ 6

**MADAXA II: AQOONSASHADA IYO FASIRAADDA SHURUUCDA DAKHLIGA** ........ **10**
**Qaybta I: Shuruucda Dakhliga** ........ **10**
Qodobka 3aad: Shuruucda Dakhliga ee uu Nidaaminayo Sharcigan ........ 10
Qodobka 4aad: Xiriirrada ka dhexeeya Shuruucda Dakhliga ........ 10
Qodobka 5aad: Heshiisyada Caalamiga ah ........ 10
Qodobka 6aad: Xeer-nidaamiyeyaasha ........ 11
**Qaybta III: Fasiraadda Shuruucda Dakhliga** ........ **12**
Qodobka 7aad: Ficiladda Ka-fogaanshaha Bixinta Canshuuraha ........ 12
Qodobka 8aad: Wareegtooyinka Rasmiga ah ee Waajibka ah ........ 13
Qodobka 9aad: Soo Saarista Wareegtooyinka Rasmiga ah ........ 13
Qodobka 10aad: Wax-ka-beddelka iyo Burinta Wareegtooyinka Rasmiga ah ........ 14
Qodobka 11aad: Qodobo Gaar ah oo la Waajibiyay ........ 14
Qodobka 12aad: Diidmada Codsi la xiriira Go'aan Gaar ah ........ 15
Qodobka 13aad: Soo-saarista Go'aamo Gaar ah ........ 16
Qodobka 14aad: Laalid Go'aamo Gaar ah ........ 16

**MADAXA III: DANEEYEYAASHA** ........ **17**
**Qaybta I: Wasaaradda Maaliyadda** ........ **17**
Qodobka 15aad: Maamulidda Shuruucda Dakhliga ........ 17
Qodobka 16aad: Hawl-u-igmashada Saraakiisha Dakhliga ........ 17
Qodobka 17aad: Aqoonsiga Saraakiisha Dakhliga ........ 17
Qodobka 18aad: Gacan ka-helidda Khubarro ........ 18
Qodobka 19aad: Gacan laga helo Saraakiisha Hay'adaha Dowladda ........ 18
Qodobka 20aad: Ilaalinta Sirta ........ 18
Qodobka 21aad: Aqbalidda Rahan (Securities) ........ 19
**Qaybta II: Canshuur-bixiyeyaasha** ........ **20**
Qodobka 22aad: Canshuurta iyo Canshuur-bixiyeyaasha ........ 20
Qodobka 23aad: Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha Loo Baahan Yahay ........ 21
Qodobka 24aad: Codsashada iyo U-sameynta Lambarrada Aqoonsiga Canshuurta ........ 21
Qodobka 25aad: Shahaadadda Canshuur-bixinta ee La iska Rabo (SHCB) ........ 22
Qodobka 26aad: Soo Codsashada iyo Siinta Shahaaddada Canshuur-bixinta ........ 22
Qodobka 27aad: Ka-noqosho, beddelidda ama Wax-ka-beddelidda *LAC ama *SHC . 23
Qodobka 28aad: Xuquuq-u-lahaanshaha Macluumaad iyo Matalaad ........ 24
**Qaybta III: La-taliyeyaasha Canshuuraha** ........ **24**
Qodobka 29aad: Mamnuucidda Matalaadda iyo Talo-siinta Canshuurta ........ 24
Qodobka 30aad: Ansaxinta iyo Diiwaangelinta La-taliyeyaasha Canshuuraha (Tax Consultant) ........ 24

**MADAXA IV: WAR-IS-DHAAFSIGA RASMIGA AH** ........ **25**
Qodobka 31aad: Afka Rasmiga ah ........ 25
Qodobka 32aad: Lacagta Rasmiga ah ........ 25

**Marka loo haysto sabab macquul ah waajibinta waa la laali karaa** ........ **26**
Qodobka 33aad: Foomamka iyo Ogeysiisyada ........ 26
Qodobka 34aad: Dukumentiyada La-ansaxiyey iyo Kuwa Cilladeysan ........ 26
Qodobka 35aad: Dukumentiyada Waraaqaha ah ee La Gaarsiiyo Wasaaradda ........ 27
Qodobka 36aad: Gaarsiinta Dukumentiyada Waraaqda ah ........ 27
Qodobka 37aad: Hannaanka Dukumentiga Elektaroonigga ah ........ 28

**MADAXA V: HAYNTA IYO BIXINTA MACLUUMAADKA** ........ **29**

**Qaybta I: Ilaalinta Dukumentiyada** ........ **29**
Qodobka 38aad: Ilaalinta Dukumentiyada ........ 29
**Qaybta II: Macluumaadka Sida Joogtada ah Loo Bixiyo** ........ **30**
Qodobka 39aad: Canshuur-Celinta ........ 30
Qodobka 40aad: Gacan-siinta Diyaarinta Canshuur-celinta ........ 31
Qodobka 41aad: Kordhinta Waqtiga La Geynayo Canshuur-celinta ........ 32
Qodobka 42aad: Qofka aan Canshuur-Celinta Ku Xareyn Waqtigii Laga Rabey ........ 32
Qodobka 43aad: Canshuur-celin iyo Macluumaad Kale oo Khaldan ........ 33
**Qaybta III: Macluumaad-bixinta Khasabka ah** ........ **33**
Qodobka 44aad: Helidda Macluumaad iyo dhismooyinka (Hantida) ........ 33
Qodobka 45aad: Xuquuqaha iyo Waajibaayada Milkiilaha ........ 35
Qodobka 46aad: Ogeysiiska Lagu Dalbanayo Macluumaad ........ 35
Qodobka 47aad: Hantidhowr ........ 36

**MADAXA VI: CANSHUURTA AASAASIGA AH EE WAAJIBTEY** ........ **37**
Qodobka 48aad : Qiimeynta iyo Is-qiimeynta ........ 37
Qodobka 49aad: Qiimeyn Hordhac ah iyo Rahan ........ 38
Qodobka 50aad: Qiimeyn Wax-ka-beddel Yar Lagu Sameeyey ........ 38
Qodobka 51aad: Wargelinta Qiimeyn ........ 39

**MADAXA VII: XALLINTA KHILAAFAADKA** ........ **39**
Qodobka 52aad: Go'aamada Canshuurta ........ 39
Qodobka 53aad: Ka-soo-hor-imaatin Go'aan Canshuureed ........ 40
Qodobka 54aad: Go'aan Diidmo ........ 41
Qodobka 55aad: Rafcaan ka-dhan ah Go'aan Diidmo ........ 42
Qodobka 56aad: Rahan iyo Natiijooyinka ka Dhasha Rafcaan ........ 42

**MADAXA VIII: BIXINTA IYO SOO-CELINTA CANSHUURTA** ........ **43**
**Qaybta I: Canshuur-bixinta Joogtada ah** ........ **43**
Qodobka 57aad: Waqtiyada La Bixinayo Canshuuraha ........ 43
Qodobka 58aad: Kordhinta Waqtiga Lagu Bixinayo Canshuur ........ 44
Qodobka 59aad: Qaabka Loo Bixinayo Canshuurta ........ 44
Qodobka 60aad: Amar Canshuur-bixin ........ 45
Qodobka 61aad: Xisaabaha Canshuurta ee Elektaroonigga ah ........ 45
**Qaybta II: Ka-soo-qaadista Canshuur-bixiyaha Canshuur ku Baaqatey** ........ **45**
Qodob 62aad: Ku-dacweynta Canshuur Aan La Bixin ........ 45
Qodobka 63aad: U-rahmashada iyo Xaddiga Ku-dalicidda Hantida Lagu Dalacayo Rahanta ........ 46
Qodobka 64aad: Gacan-ku-dhigidda Hantida La-rahmey ........ 46
Qodobka 65aad: Iibinta Hanti Rahman ........ 48
Qodobka 66aad: Fasaaxadda Hanti Rahaman ........ 49
Qodobka 67aad: Xanibidda Qof ........ 50
Qodobka 68aad: Xannibidda Hanti ........ 50
**Qaybta III: Ka-soo-celinta Cid Saddexaad** ........ **51**
Qodobka 69aad: Maareeyeyaasha Hay'adaha (*Entities*) ........ 51
Qodobka 70aad: Sii-maamuleyaal ........ 52
Qodobka 71aad: Cid Saddexaad oo Qaameysan ........ 53
Qodobka 72aad : U-hoggaansamidda Wargelinta ........ 55
Qodobka 73aad: Wakiillada Dadka aan Degganeyn Dalka ........ 56

**MADAXA IX: CANSHUUR-DHIMID IYO CANSHUUR-CELIS** ........ **57**
Qodobka 74aad: Xadadka Canshuur yareynta ........ 57
Qodobka 75aad: Ka-warbixinta Canshuur-Dhimista ........ 58
Qodobka 76aad: Canshuur-ka-cafin ........ 59
Qodobka 77aad: Codsi Soo-celin Canshuur La Bixiyey ........ 60

Qodobka 78aad: Go'aanka Laga Gaaro Codsiga ........ 60
Qodobka 79aad: Bixinta Canshuur-celinta ........ 61

**MADAXA X: GANAAXYADA IYO DEMBIYADA MADANIGA** ........ **62**
**Qaybta I: Ganaaxyada Madaniga ah** ........ **62**
Qodobka 80aad: Ganaaxa Madaniga ah ee Bixin La'aanta Canshuurta ........ 62
Qodobka 81aad: Ganaaxa Madaniga ah ee Hoos-u-dhig Canshuurta Dakhliga ee ay tahay in la Bixiyo ........ 62
Qodobka 82aad: Ganaaxa Madaniga ah ee ka dhaleneysa Ilaalin La'aanta Dukumentiyada ........ 63
Qodobka 83aad: Ciqaabta/ganaaxa Madaniga ah ee Xareynta-la'aanta Canshuur-Celinta ........ 63
Qodobka 84aad: Ciqaabta/ganaaxa Madiniga ah ee Bayaan Been ama Marin-habaabin ah oo loo gudbiyo Sarkaal Dakhli ........ 64
Qodobka 85aad: Ciqaabta/ganaaxa Madaniga ah ee Bayaan Been ama Marin-habaabin ah oo la siiyo Cid Saddexaad ........ 65
Qodobka 86aad: Ganaaxa Ku-gacansiinta iyo Ku-dhiirrigelinta ........ 66
**Qaybta II: Qiimeynta Ganaaxa Madaniga ah** ........ **67**
Qodobka 87aad: Qiimeynta Ganaaxa Madaniga ah ........ 67
Qodobka 88aad: Ganaaxyada Madaniga ah Waa Kuwo Shakhsi ah ........ 67
**Qaybta III: Fal-dembiyeedyo** ........ **68**
Qodobka 89aad: Wacyiga ku aaddan Fal-dembiyeed ........ 68
Qodobka 90aad: Fal-dembiyeed ka Dhashey U-hoggaansamid La'aanta Sharci Dakhli 68
Qodobka 91aad: Fal-dembiyeedka Bixin La'aanta Canshuurta ........ 68
Qodobka 92aad: Fal-dembiyeedka Bixinta Caddaymo Been ah ama Marin-habaabin ... 69
Qodobka 93aad: Fal-dembiyeedka Is-hortaagidda Maamul Canshuureed ........ 69
Qodobka 94aad: Fal-dembiyeedyada ay ku kacaan Shakhsiyaadka Idman iyo Kuwa Aan Idmandyn ........ 71
Qodobka 95aad: Maareeyeyaasha Hay'adda (*Entities*) ........ 72
Qodobka 96aad: Fal-dembiyeedka, Ku-ganacsiinta iyo ku-dhiirrigelinta ........ 72
Qodobka 97aad: Baarista, gudbinta iyo isugeynta fal-dembiyeedyada ........ 73

**MADAXA XI: HABRAACYADA/DACWADAHA** ........ **75**
Qodobka 98aad: Habraacyo/Dacwado Badan ........ 75
Qodobka 99aad: Awoodda Baarista iyo Soo-qabashada ........ 75
Qodobka 100aad: Goobta (Madasha) ........ 77
Qodobka 101aad: Sarkaal Dakhli waa uu Hor Imaan Kara Maxkamad ........ 77
Qodobka 102aad: Dukumentiyada Caddeyn ahaan Loo Aqbali Karo ........ 77
Qodobka 103aad: Mas'uuliyadda Caddeynta ........ 78
Qodobka 104aad: Go'aamada Canshuuraha iyo Fulintoodu Saameyn Laguma Yeelan Karo ........ 79
Qodobka 105aad: Ka-dhaafidda Canshuuraha Mucaamalaadka ........ 79

**MADAXA XII: Shuruucda Dakhliga** ........ **80**
Qodobka 106aad Shuruucda Dakhliga waxa lagu soo saarayaa Heer Federaal ........ 80
Qodobka 107aad: Ururinta iyo Bixinta Dakhliga ........ 80

**MADAXA XII: NIDAAMKA LACAGTA IYO FULINTA SHARCI** ........ **80**
Qodobka 108aad: Nidaamka Qaddar-lacageedka (Currency Unit System) ........ 80
*Qodob 109: Awoodaha Sharci Fulineed* ........ 81

**MADAXA XIII: KALAGUUR** ........ **81**
Qodobka 110aad: Wax-ka-beddellada Is-Waafajinta ah ........ 81
Qodobka 111aad: Kala-guurka ........ 82
Qodobka 112aad: Dhaqangalka ........ 82

JADWALKA KOOWAAD .......... 83
MUCAAMALAADKA LOOGU BAAHAN YAHAY *LAC IYO *SHC .......... 83
Qaybta I .......... 83
*LAC ayaa loogu baahan yahay .......... 83
Qaybta II .......... 83
*SHC ayaa Loogu Baahan Yahay .......... 83
JADWALKA LABAAD .......... 85
CANSHUUR-CELINTA IYO QIIMEYNTA .......... 85
Qiimeynta .......... 85
Is-qiimeyn .......... 87

# MADAXA Iaad: UJEEDO IYO ERAY BIXIN

## Qodobka 1aad: Ujeedooyinka Sharciga

Iyada oo laga ambaqaadayo Qodobbada 50(f) 51,122 iyo 125(1) ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, *ujeeddada Sharcigani waa in lagu Maamulo Dakhliga Dalka JFS.*

Iyada oo la tixgelinayo baahida loo qabo inay jiraan tiro xeerar iyo shuruuc is waafaqsan ah oo heer Federal iyo heer Dawlad goboleedba leh oo lagu maamulo dakhliga dalka;

Iyada oo lagu xisaabtamayo faa'iidooyinka ku jira in la iska ilaaliyo soo-noqnoqosho iyo in la dhiirrigeliyo is-waafaqsanaanta iyada oo qodob sharci keliya loo sameynayo arrimo ay horey marar badan uga hadli jireen shuruucda kala duwan ee dakhliga;

Iyada oo lagu xisaabtamayo faa'iidooyinka ku jira in la is-waafajiyo oo lana mideeyo maamulka shuruucda dakhliga ee kala duwan;

Baarlamaanka Federaalka Soomaliya waxaa uu soo saarey sharcigan oo ka dhaqan gelaayo guud ahaan Jamhuuriyadda:

## Qodobka 2aad: Fasiraad

1) Sharcigan:

"Qiimeyn wax-ka-beddel lagu sameeyey" waxa loola jeedaa qiimeyn wax-ka-beddel loogu sameeyey si waafaqsan Qodobka 50aad.

*"Arrimaha ama Ficillo" waxaa loola jeedaa tallaabo-qaad, heshiis, qaab waxqabad, mucaamalaad, qorshe-qaabeed, ballanqaad, mucaamalaad, is-faham ama ballanqaad hawlqabad. Ficil waxaa ay noqon kartaa mid si qeexan loo sheego ama mid u qaadasho ah. Muhiim ma aha in qabanqaabadu ay tahay mid lagu fulin karo dacwad sharciyeed. Arrimaha ama Ficillo waxaa ay noqon karaan mid dhinac keliya la xiriira ama waxa ay noqon kartaa mid khuseysa dad mid ka badan. Si gaar ah loo aqoonsan karo oo ka mid ah arrimaha ama ficilada ayaa sidoo kale ah Arrin/Ficil.

"Qiimeyn" waxaa uu macnaheedu yahay go'aaminta qaddarka Canshuurta cid laga qaadayo oo lagu go'aamiyey sharci dakhli. Qiimeyn ayuu sameyn kartaa Wasaaraddu iyada oo ah *is-qiimeyn. Waxaana ka mid ah arrimaha lagu aqoonsadey Jadwalka Labaad.

"Wasaaradda " waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda .

"Wasiirka waxa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda

"Waaxda" waxaa loola jeedaa Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda.

*"Kharashka ku-dalicidda rahan iyo iibinta" marka ay la xiriirto hanti loogu dallacay sida uu dhigayo Qodobka 63aad waxaa loola jeedaa kharashaadka ay Wasaaraddu ama wakiil loo igmadey uu ku galo ama ku geli doono arrimahan soo socda:

a) sida ay qeexayaan Qodobbada 63aad iyo 66aad marka la abuurayo ama la sii deynayo rahan; iyo
b) sida ay qeexayaan Qodobbada 64aad iyo 65aad marka ay tahay gacan-ku-dhigista, haynta ama iibinta hanti rahan ah.

*"Qaddar-lacageed ay khuseyso" macnaheedu waa sida loogu sheegey Qodobka 106aad.

"Dukumenti" waxaa ka mid ah xisaab, qiimeyn, buug, shahaaddo, sheegasho, shaac-ka-qaadis, qoraal, wargelin, amar, diiwaan, bayaan faa'iido, hagid ama caddayn oo qoraal ah. Dukumenti waxaa uu noqon karaa elektaroonik ama qaab kasta oo kale.

*"Hay'ad/*Entity*" waxaa loola jeedaa shirkad, shuraako, *amaano ama hay'ad ama wakaalad dowladeed. Waxa ka mid ah hay'ad kasta oo kale oo shakhsi ama Canshuur-bixiye uu u aqoonsadey sharci dakhli kale. Qofku ma noqon karo hay'ad.

"Xareyn" marka ay la xiriirto dukumenti waxaa ka mid ah bandhigidda ama geynta dukumenti. Dukumenti waxaa loo xareyn karaa qaab elektaroonik ah.

*"Mas'uul" marka uu la xiriiro *hay'ad (*entity*) waxaa uu macnaheedu yahay in qofka uu mas'uul u yahay hay'adda ama qof ka-qaybgala ama ka-qaybgeli kara go'aamada maareynta ee heerkoodu sarreeyo isaga oo ka wakiil ah *hay'adda. Maareeye waxaa ka mid ah agaasime, maareeye sare ama sarkaal fulin. Ka-qaybgalku waxaa uu noqon karaa keli ahaan ama mid ay ku weheliyaan shakhsiyaad kale. Kuwan soo socda ayaa ka mid ah maareeyeyaasha:

a) xubin ka mid ah shuraako iyo qof *amaano-haye ka ah *amaano;

c) qof uu maareeye *hay'ad u aqoonsan yahay sharci kale oo dakhli; iyo

d) qof ay amarradiisa iyo tilmaan-bixintiisa ay *hay'ad ama shakhsi lagu tilmaamey qaybaha kale ee dukumentigan looga baahan yahay ama looga bartey in ay ku shaqeeyaan.

*"Lahaansho Xubinnimo " ee *hay'ad waxaa uu macnaheedu yahay xuquuq u lahaanshaha ka-qaybgalka dakhli ama raasamaal *hay'ad. Xuquuqdu waxaa ay noqon mid is-beddesha *(contingent)*. Lahaansho xubinnimo waxaa ka mid ah lahaanshaha shariik uu wax ku leeyahay shuraako, lahaanshaha ka-faa'iideyste *amaano iyo saamiyada sharikad.

"Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Dowladda Federaalka ah ee mas'uulka ka ah dakhliga.

*"Go'aan Ka-hor-imaansho" waxaa uu leeyahay macnaha lagu siiyey Qodobka 54aad.

*"Qiimeynta asalka ah" waxaa loola jeedaa qiimeyn aan ahayn qiimeyn wax-ka-beddel yar lagu sameeyey.

"Shakhsi" waxaa loola jeedaa qof ama *hay'ad. Waxaa ka mid ah qof dhintey iyo *hay'ad baaba'day oo aan waqtiga la joogo jirin.

*"Milkiile" hanti waxaa ka mid ah-

a) marka ay la xiriirto dhismayaal ama goob, waa milkiilaha, maareeyaha ama qof kasta oo kale oo ku jira dhismaha ama goobta; iyo

b) marka ay la xiriirto hanti kasta, oo uu ka mid yahay dukumenti, qof gacanta lagaga soo dhigey, laga soo qaadey ama laga heley, oo uu ka mid yahay qofka haya sumado iyada oo meel fog laga joogo lagu geli karo dukumenti, diiwaan ama hanti.

*"Dadweynuhu wada heli karaan " marka ay yihiin wareegto, xukun, hagid ama ogeysiis kale oo uu soo saarey Wasaaradda Maaliyadda waxaa loola jeedaa ka dhigista wareegtada, xukunka, hagidda ama ogeysiiska mid ay dadweynuhu heli karaan. Halka laga helayo waxaa ay noqon kartaa xafiisyada Wasaaradda ama goobaha kale ama qaabka kale ee uu Wasaaradda Maaliyadda uu go'aamiyo, taas oo ay ka mid tahay qaabab elektaroonik ah.

*"Xannibid" waxaa ka mid ah xirid, qufulid, calaamadin, daboolid, joojin, qaadasho ama sugid amaan.

"Sharci dakhli " waxaa uu leeyahay macnaha lagu siiyey Qodobka 3aad.

"Sarkaal dakhli " waxaa loola jeedaa sarkaal ka tirsan Waaxda Dakhliga sida loogu qeexay Sharciga Dakhliga Qaran ee Soomaaliya.

*"Rahan" loo dhigo waajib ku yimid sharci dakhli waxaa loo macneeyey iyada oo la tixgelinayo Qodobka 21aad waxaana ka mid ah Rahmashada loo sameeyey si waafaqsan Qodobka 63aad.

*"Is-qiimeyn" waxaa uu macnaheedu yahay *qiimeyn asal ah oo waafaqsan sharci dakhli oo uu sameeyey qof xareynaya *Canshuur-celin ee aan ahayn qiimeyn uu sameeyey Wasaaradda Maaliyadda. Waxaa ka mid ah arrimaha lagu aqoonsadey Jadwalka Labaad.

"Soomaaliya" waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

"Canshuur" iyo "Canshuur-bixiye" waxaa ay leeyihiin macnaha lagu siiyey Qodobka 22aad.

*"Arrimaha Canshuurta " marka laga hadlayo qof waxaa ka mid ah dhammaan qaababka kala duwan ee shuruucda dakhligu ay u saameyn karaan qofka iyo wax-qabadyada, hantida iyo xaaladaha shakhsiga ah ee qofka.

*"Go'aan Canshuureed " waxaa uu leeyahay macnaha lagu siiyey Qodobka 52aad.

*"Canshuur-dhimid" waxaa ay leedahay macnaha lagu siiyey Qodobka 74aad.

*"Canshuur-celin" waxaa ka mid ah arrimaha lagu cayimey Jadwalka Labaad.

*"SHC" "*tax clearance certificate*" shahaaddo Canshuur-bixin loo soo saarey si waafaqsan Qodobka 26aad.

*"TIN" "*taxpayer identification number*" Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha ee loo soo saarey si waafaqsan Qodobka 24aad.

*"Amaano" waxaa uu macnaheedu yahay *Ficil uu *amaano-haye hayo hanti, laakiin kuma jiraan shuraako iyo sharikad.

*"Amaano-haye" waxaa loola jeedaa shakhsi ama sharikad (*body corporate*) hanti ku haysa qaab amaano ah si ay uga faa'iideystaan shakhsiyaad la aqoonsan karo ama loogu adeegsado ujeeddo uu oggol yahay sharciga. Hantida waxaa hayn karta cid keliya waxaa la hayn kara shkhsiyaad ama sharikado kale. Amaano-haye waxaa lagu magacaabi karaa ama lagu sameyn karaa tallaabo-qaadyo shakhsi ah, dardaaran, amar ama baaq ay sameyso maxkamad ama hawlgal kale oo sharci. Amaano-haye waxaa ka mid ah-

a) fuliyaha dardaaranka, maamulaha ama dhaxlaha/warasada hantida qof dhintey, tababare ama gacan-ku-haye;

b) xaraashe, sii-maamule, amaano-haye u ah qof musalifey ama maareeye garsoor;

c) qof maamula ama gacanta ku haya hanti si waafaqsan in uu dheefsanayo, mar dambe cid ku sii wareejinaya ama qaab kale oo xaddidan uga faa'iideysanaya;

d) qof maareynaya hantida shakhsi aan wax qabsan karin oo ay ka mid yihiin carruurta; iyo

e) qof hanti ku maareeya mu'asasad gaar ah ama *Ficil kale oo la mid ah.

*"Baabuur/gaadiid" waxaa ka mid ah diyaarad ama markab/doon.

2) Si ay u fududaato aqoonsashadooda, ereyada lagu qeexey faqradda 1aad ee ay ka horreeyso xiddigta sidaas ayaa loogu calaamadiyey guud ahaan sharcigan dhexdiisa. Ereyada la qeexey ee uu isticmaalkoodu badan yahay looma calaamadin sidaas oo kale.

## MADAXA II: AQOONSASHADA IYO FASIRAADDA SHURUUCDA DAKHLIGA

### Qaybta I: Shuruucda Dakhliga

### Qodobka 3aad: Shuruucda Dakhliga ee uu Nidaaminayo Sharcigan

1) Shuruucda lagu taxay Qaybta Iaad ee Jadwalka Sharciga Dakhliga Qaran ayaa loo maamulayaa sida uu dhigayo sharcigan.

2) "Sharciga dakhliga" waxaa loola jeedaa-

   a) shuruucda lagu xusey faqradda 1);

   b) heshiis kasta oo caalami ah oo lagu xusey Qodobka 5aad; iyo

   c) xeer-nidaamiye kasta oo la sameeyey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 6aad ama laga hoos sameeyey sharciga lagu xusey faqradda 1aad).

### Qodobka 4aad: Xiriirrada ka dhexeeya Shuruucda Dakhliga

1) Sharcigan waa in lala akhriyaa mid kasta oo ka mid ah shuruucda kale ee dakhliga.

2) Erey kasta oo aan lagu qeexin sharcigan gudihiisa waxaa uu macnihiisu waafaqsan yahay macnaha ereygaas loogu adeegsadey shuruucda kale ee dakhliga.

3) Si waafaqsan xaddidaadaha ku jira sharcigan, awoodaha Guud ee lagu cayimey sharcigan waxaa loo adeegsan karaa si waafaqsan sharci kasta oo dakhli taas oo waafaqsan awoodaha gaarka ah ee lagu siiyey shuruucda kale ee dakhliga ee u habboon.

4) Marka uu ku hawlgalayo sida uu dhigayo qodob ka mid ah sharcigan, sarkaal dakhli waxaa uu sidoo kale u tallaabo-qaadi karaa si waafaqsan ahdaafta sharci dakhli oo mid ka badan.

5) Haddii sarkaal dakhli uu helo macluumaad inta uu ku guda jiro habsami u-gudashada waajibaadyada uu saarey sharci dakhli, markaa Wasaaradda Maaliyadda waxa ay macluumaadkaas u adeegsan kartaa sharci kasta oo dakhli oo kale.

### Qodobka 5aad: Heshiisyada Caalamiga ah

1) Marka ay iska hor yimaadaan xeerarka ku jira heshiis caalami ah iyo qodobbada sharciga dakhliga, markaa xeerarka heshiiska ayaa la raacayaa. Haseyeeshee, sharciyada caalamiga ah waa in aan loo fasiran si aan la jaanqaadi karin faqradda 3aad (*treaty shopping*) ama Qodobka 7aad (Ficiloyin Canshuur ka fogaansho).

2) Iyada oo la daba socdo heshiis caalami ah ayaa hay'adda awoodda u leh ee Soomaaliya waxaa ay xubin qayb ka ah heshiis ay ka heli kartaa codsi ah in Soomaaliya looga qaado Canshuur ay cidda heshiiskaas qaybta ka ah ay ku leedahay qof. Wasaaradda Maaliyadda waxaa ay qofkaa ka dalban kartaa in uu bixiyo xaddiga lacagta lagu leeyahay. Dalbashadu waa in ay ahaato qoraal waxaana qofka waajib ku ah in uu xaddiga lacagta uu ku bixiyo taariikhda laga dalbadey in uu bixiyo, lacagta (Maaliyadaha) la heley waa in la siiyaa cidda heshiiska qaybta ka ah.

3) Heshiis caalami ah ayaa Soomaaliya ku waajibin kara in ay Canshuur dhaaf u sameyso ama ay Canshuurta ka yareyso. Canshuur-dhaafka ama Canshuur-yareynta noocaas ah looma sameyn karo *hay'ad (*entity*):

a) marka heshiiska laga eego, cid deggan dalka kale ee heshiis lala gelayo; iyo

b) 50% ama ka badan aasaasi ahaan ay leeyihiin shakhsiyaad, marka laga fiiriyo heshiiska dhiniciisa, aan degganeyn Soomaaliya ama dalka kale ee heshiiska lala gelayo.

Lahaanshaha aasaasiga ah ee *hay'ad (*entity*) waxaa uu macnaheedu yahay *xubnaha qaybta ka ah *hay'adda (*entity*). Lahaanshaha waxaa uu noqon karaa mid toos ah ama mid dadban iyada oo loo marayo *lahaansho xubinnimo ay leeyihiin *hay'ado u dhexeeya (interposed Entity). *Hay'adaha u dhexeeya waa in la raadiyaa ilaa dhammaan *xubnaha *hay'adda laga aqoonsanayo in ay si toos ah ama si dadban u haystaan shakhsiyaad ama *hay'ado uusan qofna ku lahayn * lahaansho xubinnimo.

4) Heshiis caalami ah waa mucaahaddo ama heshiis kale oo ay wada gaareen Soomaaliya iyo dowlad ama dowlado ajnebi ah kaas oo sharci ahaan dhaqangaley. Heshiisku waa in ay ku jiraan-

a) in meesha laga saaro labo-jeer Canshuuris (*double taxation*) iyo ka-hortegidda Canshuur ka fogaanshaha iyo Canshuur la dhuumashada; ama

b) gacan iskasiinta maamulidda ama dhaqangelinta shuruucda Canshuuraha taas oo ay ka mid tahay is-dhaafsiga macluumaadka, sameynta hantidhowr Canshuureed, gacan iska siinta soo-celinta Canshuuraha lala baxsadey iyo gaarsiinta dukumentiyada (*service of documents*).

**Qodobka 6aad: Xeer-nidaamiyeyaasha**

1) Wasiirku waxaa uu soo saarayaa *isaga oo la tashanaya Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka* xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-galiyo sharciyada dakhliga sida ku xusan Qodobka 3(1)-

a) arrimaha sharciga dakhliga oggolaaday in loo sameeyo xeer-nidaamiye;

b) marka ay ansaxiyaan Golaha Wasiirrada, wax-ka-beddelidda qodob ku jira Jadwal sharciga dakhliga ama qaddar lacageed oo uu dejiyey sharciga dakhliga;

c) si qaab ka wanaagsan loogu dhaqangeliyo oo looguna fasiro mabaa'diida, ahdaafta iyo qodobbada sharciga dakhliga;

d) qof ama shakhsiyaad ku waajibinayo in ay bixiyaan macluumaad la go'aamiyo, haddii ay tahay in ay mar keliya ama waqtiyo joogto ah ay bixinayaan ama haddii ay la xiriirto *arrimaha canshuurta (*tax affairs*) ee qofka bixinaya ama haddii ay la xiriirta *arrimaha canshuurta (*tax affairs*) ee qof kaleba; iyo

e) marka qaabab gaar ah oo lacag-bixin ama canshuur ka qaadis loo sameynayo qof ama shakhsiyaad ama qaybo gaar ah.

2) Xeer-nidaamiyayaashu waxa ay khuseyn karaan hal sharci dakhli ama shuruuc dakhli oo badan waxaana xeer-nidaamiyeyaal badan loo sameyn karaa isla hal sharci dakhli.

3) Xeer-nidaamiyeyaasha waa in lagu soo saaraa Faafinta Rasmiga ah. Waxa ayna dhaqang galayaan laga bilaabo taariikhda la faafiyo.

4) U hoggaansamid la'aanta xeer-nidaamiyeyaasha waa u-hoggaan-samid la'aanta sharcigan waxaana u-hoggaansamid la'aantaas lagu qaadaya sida ku xusan Madaxyada VII, IX iyo X ee sharcigan.

## Qaybta III: Fasiraadda Shuruucda Dakhliga

### Qodobka 7aad: Ficiladda Ka-fogaanshaha Bixinta Canshuuraha

1) Waaxda canshuuraha waxa ay u yeereeysaa qof walba oo ay Wasaaradda u aragto in uu ku kacay ficillo ka faa'ideysi ah oo uu kaga fogaanayo bixinta canshuuraha .

2) Marka laga soo tago wax kasta oo ku jira sharciyada dakhliga, u yeerista waxa ay micno sameeyneeysaa marka qofka lagu leeyahay canshuurta loo hagaajiyo sida uu Wasaaradda u aragto in ay ku habboon tahay in lagu saxo canshuurta ku baaqatey.

3) U yeerista waa in uu ahaadaa qoraal cayimaya canshuurta ku baaqatey, ficiladda iyo sixidda ay sameeysey Wasaaradda. U yeeriddu waxa lagu lifaaqayaa qiimeynta lagu sameeyey.

4) La-taliye canshuureed ama qareen si toos ah ama si dadban u dhiirrigeliya ama uga qaybqaata *Ficil looga dan leeyahay in canshuur cid loogu baajiyo waa in uu *ficiladaa u soo sheegaa Wasaaradda. Xeer-nidaamiyeyaal ayaa cayimi kara qaabka loo soo sheegayo oo fududeyn doona diiwaanglinta *Ficilada.

5) Qodobkan dhexdiisa:

"Ficilada ka-fogaanshaha canshuurta "waxaa uu macnaheedu yahay-

a) *Ficil hadafkeeda ugu weyn ama mid ka mid ahdaafta ugu weyn ay tahay in qof ka helo faa'iido canshuureed ; ama

b) *Ficilkaa faa'iidada ugu weyn ee laga rajeynayo in laga helo ay tahay in *ficiladaasi ay faa'iido canshuureed u tahay qof un.

Shuruuddaasi waa, *Ficil waxa ay noqoneysaa Ficil canshuur ka-fogaansho keliya haddii ay la xiriirto ku-takrifal ama ku-xadgudub lagu xadgudbayo qodob ka mid ah sharciga dakhliga.

"Faa'iido canshuureed " waxa uu macnaheedu yahay-

(a) ka-fogaanshaha, yareynta ama dib-u-dhigista canshuur cid lagu leeyahay;

(b) kordhinta lacag canshuur oo ay tahay in loo soo celiyo; ama

(c) ka-hortag ama carqaladeyn canshuur-qaadis.

**Qodobka 8aad: Wareegtooyinka Rasmiga ah ee Waajibka ah**

1) Wasaaradda Maaliyadda waxa ay soo saari kartaa wareegtooyin rasmi ah oo fasiraysa sharciga dakhliga. Ujeeddada laga leeyahay awooddan waa in la xaqiijiyo in mar walba si iskumid ah loo maamulo shuruucda dakhliga iyo in la jiheeyo shakhsiyaadka ay saamaynayso shuruucdaas, kuwaas oo ay ka mid yihiin saraakiisha dakhliga.

2) Wareegtooyinka rasmiga ah ee khuseeya hal sharci dakhli ama shuruuc dakhli oo badan waxaana ay Wasaaradda soo saari kartaa wareegtooyin rasmi ah oo la xiriira isla shuruucda dakhliga.

3) Wareegtada rasmiga ah waxaa ay waajib ku noqoneeysaa Wasaaradda, laga bilaabo waqtiga la soo saaro ilaa inta laga burinayo. Wareegtada rasmiga ah ma qabaneyso shakhsiyaadka kale ee uu saameeyey sharci kale oo dakhli.

4) Arrimaha iyo nuxurka wareegtada rasmiga ah ku qoran lagama hor imaan karo, laakiin qofkii dood ka qaba waxa uu ka caban karaa go'aanka canshuurta ee Wasaaraddu ee ku saleeysan Wareegtada Rasmiga.

**Qodobka 9aad: Soo Saarista Wareegtooyinka Rasmiga ah**

1) Wasaaradda Maaliyadda waxa ay wareegto rasmi ah ku soo saaraysaa iyada oo ogeysiiska wareegtada ku baahinaysa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

2) Wareegtada rasmiga ah waa in ay ku qoran tahay in ay tahay wareegto rasmi ah waana in ay lahaataa cinwaan ka kooban lambar iyo mowduuc kuwaas oo lagu garan karo.

3) Wareegto rasmi ah waxaa ay dhaqangeleysaa taariikhda lagu cayimo ogeysiiska waxaana haddii aan taariikh loo cayimin ay dhaqangeleysaa laga bilaabo taariikhda lagu baahiyo Faafinta rasmiga ah.

4) Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay wareegtooyinka rasmiga ah ka dhigtaa kuwo si guud dadweynuhu u heli karaan.

**Qodobka 10aad: Wax-ka-beddelka iyo Burinta Wareegtooyinka Rasmiga ah**

1) Wasaaradda waxa ay wax-ka-beddel ku sameyn kartaa ama burin kartaa wareegto rasmi ah iyada oo ogeysiis wax-ka-beddel ama burin ku baahinaysa faafinta Rasmiga ah. Wareegto rasmi ah waxaa wax looga beddeli karaa ama loo burin karaa gebi ahaan ama qayb ahaanba.

2) Wareegtada rasmiga ah waa ay bureysaa hadii sharci ka hor imaanaayo wareegtada uu soo baxo.

3) Wax kabedelka ama burinta qeyb kamid ah wareegtada rasmiga ah waxa lagu sii maamulayaa *howlihii bilowdey ka hor inta aan wax laga beddelin ama la burin wareegtada.

**Qodobka 11aad: Qodobo Gaar ah oo la Waajibiyay**

1) Qof ayaa dalab qoraal ah u gudbisan kara Wasaaradda si go'aan gaar ah looga gaaro sida sharciga dakhligu loogu maamulayo arrimo la soo jeediyay ama haddaba jira oo la xiriira qof ama shakhsiyaad ama koox gaar ah oo bulshada ka mid ah.

2) Sida ku xusan Qodobka 12aad, ka dib marka ay codsi hesho, Wasaaraddu waxaa ay, soo saari kartaa go'aan gaar ah oo tilmaamaya halka ay Wasaaraddu ka taagan tahay sida uu sharciga dakhliga uu u saameynayo *arrimaha.

3) Go'aan gaar ah ayaa lagu saleyn karaa *arrimo badan waxaana uu khuseyn karaa sida loo fulinayo shuruuc dakhli oo badan.

4) Sida ku xusan farqadda (5), go'aanka gaar ah ayaa ku waajibaya Wasaaradda wixii ka khuseeya *arrimaha, iyadoo loo tixgelinaayo codsaduha ama shaqsiyaadka lagu xusay..

5) Go'aan gaar ah waxaa uu dadka ku waajibayaa (binding) keliya-

a) haddii codsigu uu -

i) si buuxda oo run ah uu shaaca ugaga qaado Wasaaradda dhinac kasta oo ka mid ah arrimaha (arrangements) uu go'aanku uu khuseeyo; iyo

ii) *arrimaha waxa laga hormarinaya dhammaan macluumaad kasta oo lagu faahfaahiyey codsiga;

b) haddii cinwaanku yahay "go'aan gaar ah"; iyo

c) laga bilaabo waqtiga la soo saarayo ilaa inta laga burinayo, keliya muddada lagu cayimey go'aanka.

6) Arrimaha iyo nuxurka go'aanka gaarka ah lagama hor imaan karo, laakiin qofkii dood ka qaba waxa uu ka caban karaa go'aanka canshuurta ee Wasaaraddu ee ku saleeysan go'aanka gaarka ah.

7) Marka uu ansaxiyo Guddiga Dakhliga ee Wasaaradda waxa ay Wasaaradda dejin kartaa ujuurooyin laga bixiyo codsiga iyo soo-saridda go'aan gaar ah. Ujuurooyinku dhaqangal ma noqonayaan ilaa lagu soo saaro Faafinta rasmiga ah.

8) Cid gaar ah waxaa ka mid ah-

a) xubnaha *hay'ad (*entity*); iyo

c) shakhsiyaad kala duwan oo Wasaaradda Maaliyadda ay u aragto in ay isku xaalad ku sugan yihiin marka laga eego codsi la xiriira qodobada gaarka ah ee sharci dakhli.

**Qodobka 12aad:** Diidmada Codsi la xiriira Go'aan Gaar ah

1) Wasaaradda waxa ay diidi kartaa codsi la xiriira go'aan gaar ah haddii -

a) *arrimo *go'aan canshuureed horay looga gaaray;

b) Wasaaraddu ay -

i) Ku biloowday baaritaan canshuureed oo daboolayo arrimaha (arrangement) codsadaha; ama

ii) Codsadaha qoraal ku ogeysiisay ka hor codsiga in lagu talojiro in ay bilaabi doonaan baaritaan noocaas ah;

c) Wasaaraddu ay u aragto in wareegto rasmi ah oo jirto ay si habboon uga hadleyso arrimahan;

d) Codsigu uu yahay mid aan munaasab aheyn (frivolous or vexatious).

e) *arrimaha aan la fulin isla markaana loo hayo daliillo caqli-gal ah oo lagu aamini karo in aan la fulin doonnin;

f) codsaduhu uusan Wasaaradda u soo gudbin macluumaad ku filan in uu go'aan soo saaro; ama

g) Wasaaraddu ay u aragto in uusan codsigani macquul ahayn in wax laga qabto marka la eego imkaaniyaadka loo baahan yahay in loo hoggaansamo iyo wax kasta oo Wasaaradda ay u aragto in ay muhiim tahay.

2) Wasaaraddu waxa ay jaangoyn kartaa qiyaas lacageed oo wixii intaa ka yar aan laga soo saareynin go'aan gaar ah.

3) Wasaaraddu waa in ay codsadaha qoraal ku wargelisaa diidmada la diidey in go'aan gaar ah la soo saaro.

**Qodobka 13aad: Soo-saarista Go'aamo Gaar ah**

1) Wasaaraddu waxaa ay go'aamo gaar ah soo saaraysa iyada oo go'aan qoraal ah siinysa codsadaha. Haddii go'aanku uu khuseeyo cid ama koox kale oo gaar ah (specified class), Wasaaraddu waa in ay sidoo kale go'aanka ka dhigtaa mid *si guud dadweynuhu u wada heli karaan. Hadii kale, go'aan gaar ah oo shaqsi quseeyo waa in uu noqdaa mid qarsoodi ah.

2) Go'aanka gaarka ah waa in uu -

a) muujiyaa arrimaha go'aanka laga gaarayo, isaga oo cadeynaya shuruucda dakhliga, muddada iyo *arrimaha uu go'aanku khuseeyo iyo sidoo kale odoroska saameyn kara go'aanka; iyo

b) Cadeeyaa codsadaha iyo lambarkiisa Aqoonsiga Canshuur Bixiyaha (LAC*)

Haddii go'aanka laga dhigayo mid *si guud dadweynuhu u wada heli karaan go'aanka waa in aan lagu muujin shakhsi ama Lambarka Aqoonsiga Canshuur Bixiyaha (*LAC.)

**Qodobka 14aad: Laalid Go'aamo Gaar ah**

1) Marka ay hesho sababo macquul ah, waxaa ay Wasaaraddu laali kartaa go'aan gaar ah. Laaliddu waxa ay noqon kartaa mid gebi ahaan ah ama mid qayb ahaan ah. Laaliddu waa in lagu sameeyaa ogeysiis qoraal ah oo la gaarsiiyo codsadaha. Haddii go'aanku khuseeyo dad gaar ah oo kale waa in ogeysiiskaa laga dhigaa mid *si guud ay dadweynuhu u wada heli karaan.

2) Wasaaraddu waxa ay laaleeysaa go'aan gaar ah haddii uu ka-horimanayo go'aan maxkamadeed ama wareegto rasmi ah.

3) Go'aan kasta oo gaar ah waxaa la laalaayaa marka uu ka hor yimaado ama uu la jaanqaadi waayo sharci la soo saarey.

4) Laalista go'aan gaar ah wuxu dhaqangal yahay-

a) Haddii laalistu ay ku timid in uusan la jaanqaadi karin sharci, waxaa uu dhaqangalkiisu ka bilaabanayaa taariikhda sharciga uusan la jaanqaadi karin uu dhaqangalka noqdey; ama

b) haddii kale taariikhda lagu cayimey ogeysiiska laalidda.

5) Qaybta la laalay ee go'aanka gaar ah waxaa lagu dabaqayaa *arrimaha la bilaabey laalidda ka hor .Laguma dabaqi karo *arrimaha bilaabantay laalidda ka dib.

## MADAXA III: DANEEYEYAASHA

### Qaybta I: Wasaaradda Maaliyadda

### Qodobka 15aad: Maamulidda Shuruucda Dakhliga

Wasaaradda ayaa ka mas'uul ah maamulidda iyo dhaqangelinta shuruucda dakhliga si waafaqsan qodobbada Sharciga Dakhliga Qaranka. Mas'uuliyaddaa fulinteeda waxa loo marayaa Wasaaradda iyo saraakiisha dakhliga ee Wasaaradda.

### Qodobka 16aad: Hawl-u-igmashada Saraakiisha Dakhliga

1) Wasaaradda waxaa ay hawlaha la xiriira shuruucda dakhliga u igmanaysaa saraakiisha dakhliga sida ku xusan Qodobka 12(5) ee Sharciga Dakhliga Qaranka. Wasiikra hawlahaas uma igman karo qof kale, xataa haddii qofka uu yahay khabiir ama sarkaal dowladeed oo gacan-siinaya sida ku xusan Qodobka 18aad ama 19aad.

2) Xaaladaha qaar, sarkaal dakhli wuxu adeegsan kara awood gaar ah oo uu sharciga dakhligu jidaynayo haddii sarkaalka uu heer darajo gaar ah uu joogo ama si gaar ah loogu oggolaadey in uu adeegsan karo awoodahaas.

3) Keliya Wasaaradda ama Sarkaalka dakhliga oo loo magacaabey ahdaaf la xiriirta canshuurta laga hadlayo ayaa adeegsan kara awoodahan soo socda:

a) in uu cafiyo ciqaabaha ganaaxa ah oo uu dhigayo Qodobka 76aad;

b) in uu celiyo lacag canshuur ah sida uu dhigayo Qodobka 79; iyo

c) in uu dembiyada heshiis uga galo sida uu dhigayo Qodobka 97.

### Qodobka 17aad: Aqoonsiga Saraakiisha Dakhliga

1) Wasaaraddu waa in ay kaar aqoonsi u sameysaa sarkaal dakhli oo kasta. Kaarka aqoonsiga waa in uu lahaadaa calaamadda Wasaaradda, kuna dheggan yahay sawirka sarkaalka dakhliga waana in uu ku cad-yahay darajada sarkaalka dakhliga.

2) Qofka la macaamilaya sarkaal dakhli waxaa uu codsan karaa in sarkaalka uu sheego magaciisa iyo darajadiisa. Qofka fool-ka-fool ula tacaamulaya sarkaal dakhli waxaa uu codsan karaa in sarkaalka uu tusiyo kaarka aqoonsiga.

**Qodobka 18aad: Gacan ka-helidda Khubarro**

1) Wasaaraddu waxaa ay hawl-gelin kartaa khubaro gacan ka siiya saraakiisha dakhliga hawlahooda. La-shaqeyntu waxaa ay ku saleysnaan kartaa shuruudaha ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon yihiin. Gacansiinta uu bixiyo khabiir waa in uu kormeeraa sarkaal dakhli oo loo igmadey hawshaas.

2) Qofku waxaa uu xaq u leeyahay in uu diido in uu si toos ah ula macaamilo khabiir, laakiin waa in uusan carqaladeyn khabiir gacan siinaya sarkaal dakhli.

3) Qofku waxaa uu xaq u leeyahay in uu cabasho u soo gudbiyo Wasaaradda taas oo uu ku sheegayo in la-tacaamulka khabiir gaar ah ay la halmaasho dano iska hor-imaanaya. Wasaaraddu waa in ay go'aan ka gaartaa cabasho kasta waxaana go'aanka Wasaaradda ee la xiriira in la-tacaamulka uu sii soconayo iyo in kale uu noqonayaa kama-dambeys.

**Qodobka 19aad: Gacan laga helo Saraakiisha Hay'adaha Dowladda**

Wasaaraddu waxaa ay codsan kartaa in saraakiisha hay'adaha dowladda ay gacansiiyaan ama ay ilaaliyaan Waaxda canshuuraha iyo saraakiisheeda dakhliga marka ay gudanayaan hawlahooda. Iyada oo ku xisaabtameysa awoodda ay leedahay iyo kheyraadka ay haysato, Hay'ad dowladeed oo gacansiin laga soo codsado waa in ay intii karaankeeda ah isku-daydaa in ay gacan siiso. Gacansiinta uu bixiyo sarkaal dowladeed waa in uu kormeeraa sarkaal dakhli oo hawshaas loo igmadey.

**Qodobka 20aad: Ilaalinta Sirta**

1) Sarkaal dakhli oo kasta iyo xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha Wasaaradda waa in ay ula macaamilaan ayna u ilaaliyaan sir ahaan dhammaan macluumaadka iyo dukumentiyada gacantooda soo gala oo la xiriira *arrimaha canshuurta ee qof kale. Arrintaasi waajib ayaa ay ku ahaaneysaa sarkaalka dakhliga ama xubinta ka tirsan shaqaalaha marka ay ka joogsato hawsha ay u hayaan Wasaaraadda. Waajibku waxaa uu sidoo kale saaran yahay qof kasta oo gacan siinaya Wasaaradda.

2) Sarkaal dakhli oo ka tirsan Wasaaradda waxaa uu macluumaad ama dukumentiyo la xiriira *arrimaha canshuuraha ee canshuur-bixiye shaaca uga qaadi karaa-

a) Canshuur-bixiyaha;

b) qof kale, waa marka uu canshuur-bixiyaha oggolaansho qoraal ah ka helo;

c) sarkaal dakhli, xubin ka tirsan shaqaalaha ama qof gacan siinaya Wasaaradda oo si gaar ah ama si guud uu ugu oggolaadey Wasaaraddu in uu heli karo macluumaad iyada oo hadafka laga leeyahayna uu la xiriiro sharci dakhli;

d) Maxkamad, laakiin keliya ilaa xadka uu ogolyahay sharci dakhli;

d) Wasiirka, laakiin keliya ilaa xadka uu ogolyahay sharci dakhli

e) qof Dowladda Federaalka kala shaqeeya dakhliga ama waaxda istaatistikada, laakiin keliya ilaa xadka uu ogolyahay sharci dakhli

f) Hantidhowrka Guud ama qof kasta oo uu u oggolaadey Hantidhowrka Guud, laakiin keliya ilaa xadka uu ogolyahay sharci dakhli; ama

g) hay'adda awoodda u leh ee dowlad dal kale taas oo Soomaaliya kala dhexeeyo heshiis caalami ah sida uu dhigayo Qodobka 5aad, laakiin ilaa xadka uu oggol yahay heshiiska.

Marba haddii qof helaya macluumaadka ama dukumentiyada uu ilaaliyo sirnimadooda, marka laga reebo inta yar ee lagama-maarmaanka u ah in la xaqiijiyo sababaha shaac-ka-qaadista la oggol yahay. Haddana tani laguma saleynayo shaac-ka-qaadista lagu sheegey faqradda a) ama b).

**Qodobka 21aad: Aqbalidda Rahan (Securities)**

1) Wasaaraddu waxaa ay aqbali kartaa rahan laga dhigayo waajib ka dhashey sharci dakhli iyada oo lagu saleynayo shuruudaha ay cayinto Wasaaradda. Rahanka waxaa laga dhigi karaa shuruud gaar ah oo ka dhalatay sharci dakhli ama shuruudo badan ama shuruudo joogto ah oo ka dhashey sharci dakhli ama shuruuc dakhli oo badan.

2) Rahanka laga dhigayo waajib ka dhashey sharci dakhli waxaa ay yeelan kartaa qaababkan soo socda:

a) damaanad ama kafaalad (guarantee);

b) ku dallacid, rahaamad, amaahda hantida maguurtada (mortgage) ama dakhli kale oo ka imaanaya hanti; ama

c) mid intaaba isugu dhafan.

3) Wasaaradda loogama baahno in ay aqbasho nooc rahan gaar ah. Marka ay aqbasho rahanka, waxaa ay dalban kartaa ama dooni kartaa rahan kale oo dheeraad ah.

4) Rahanka wuxu dhaqan gal sii ahaanayaa hadii uu milkiilaha la daaho, muddadii loo kordhiyo ama si ku-meelgaar ah ugu guuleysan waayo arinkii rahanka looga dhigay

Rahan wuxu dhaqan gal sii ahaan karaa xataa haddii uu daaho ama muddadiisii la kordhiyo ama si ku-meelgaar ah loogu fashilmo fulintiisa, Wasaaraddu waxa ay amraysaa in la fuliyo rahankaa.

## Qaybta II: Canshuur-bixiyeyaasha

### Qodobka 22aad: Canshuurta iyo Canshuur-bixiyeyaasha

1) Canshuur waxaa uu macnaheedu yahay dakhliga uruuraya sida ku xusan Qaybta Iaad ee Jadwalka Sharciga Dakhliga Qaranka ee lagu aasaasayo Hay'adda Uruurinta Dakhliga. Dakhliyada Uruuraya oo ka dhalanaya shuruucda lagu xusey Qaybta II ee Jadwalka ma ahan canshuur marka loo egayo sharcigan. Micnaha "Dakhli" waa sida lagu qeexay sharciga Dakhliga Qaranka ee lagu aasaasayo Hay'adda Uruurinta Dakhliga. Arimahan soo socda ayaa sidoo kale loo ictibaarayaa canshuur:

a) Ciqaab madani ah ee lagu soo rogo qiimeyn sida ay dhigeyso Qaybta IX ee sharcigan ama sharci dakhli kale oo kasta;

b) qaddar lacageed oo ay waajib tahay in la siiyo Waaxda canshuur- ururinta sida uu dhigayo Qodobka 5(2) (cid lagu leeyahay dayn canshuur caalami ah) ama 63(5) (kudalacidda kharashka iyo iibka);

c) qaddar lacageed oo ay tahay in la siiyo Wasaaradda iyada oo ah canshuur lagu leeyahay cid saddexaad-

i) Canshuur la hayo (*withholding tax*), oo ay ka mid tahay bixinta qaddar lacag ay ahayd in cidda lacagta qaadaneysa laga gooyo;

ii) oo ah wakiil sida uu tilmaamayo Qodobka 8aad ee Sharciga Furdooyinka; ama

iii) sida ku xusan Qodobbada 69(1) (maareeye), 70(3) ama (5) (Qaataha/receiver), 71(2) (cid saddexaad oo qaameysan) ama 73(2) ama (5) (wakiil qof aan dalka degganeyn); iyo

d) qaddar lacageed oo cid si khalad ah loogu celiyey waxaa lagula soo noqon karaa Qodobka 79(5).

2) Canshuur-bixiye waa qof laga doonayo in uu canshuur bixiyo. Canshuurta lagu xusey faqradda 1(c)-

a) waa mas'uuliyad shakhsi ah oo saaran qofka ay waajibka ku tahay in uu bixiyo (iyo canshuur kasta lagu leeyahay cid saddexaad); iyo

b) haddii ay dhacdo in aan la bixin, Qaybaha VII (bixinta iyo dib u soo celinta canshuurta) iyo IX (ganaaxyada iyo dembiyada) ayaa lagu maamulayaa si la mid ah sida loogu maamulo qofka bixin waaya canshuuraha kale.

### Qodobka 23aad: Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha Loo Baahan Yahay

1) Si loo aqoonsado, loo xaqiijiyo oo loona dhiirrigeliyo canshuur-bixinta waa in Wasaaradda ay joogteeysaa nidaamka Lambarrada Aqoonsiga Canshuur-bixiyeyaasha (LAC*) {*taxpayer identification numbers* (TINs)}.

2) Qofku waa in uu ku tuso lambarkiisa *LAC (haddii uu mid leeyahay) marka uu sheeganayo, cadeeynayo, ogeysiinayo, canshuur-celinayo, kashfi (bank statement) ama dukumenti kale oo loo adeegsado ujeedooyinka sharci dakhli.

3) Hay'ad kasta oo lagu xusey Qaybta Iaad ee Jadwalka Koowaad waa in ay *LAC ka dalbataa, qof kasta oo codsanaya arrimaha ama ku hawlan wax-is-dhaafsiyada lagu xusey Qaybtaas.

### Qodobka 24aad: Codsashada iyo U-sameynta Lambarrada Aqoonsiga Canshuurta

1) Qof kasta oo bilaabaya in uu sameeyo ganacsi waa in uu Wasaaradda ka codsadaa lambar *LAC. Waa in codsiga lagu sameeyo 15 maalmood gudahood ka hor inta aan hawlaha laga bilaabin Soomaaliya ama bilaabidda hawlaha ay ka iman karaan Canshuur waajibtay. Wasaaraddu waxa ay dad kale ku waajibin kartaa in ay lambarrada *LAC ay ku soo codsadaan muddada ay Wasaaraddu u go'aamisay. Sidoo kale, qof kasta wuu soo codsan karaa lambar *LAC, laakiin qofka hadda leh lambar *LAC waa in uusan soo codsan lambar kale oo *LAC ah.

2) Codsiga *LAC waa in lagu soo gudbiyaa foomka loogu talagalay iyada oo ay la socdaan dukumentiyada kale ee caddeynaya aqoonsiga codsadaha waana in loo soo xareeyaa qaabka loogu talagalay. Qofka soo codsada ee aan loo sameyn lambar *LAC waa in uu si qoraal ah ugu wargeliyaa Wasaaradda is-beddel kasta oo uu ku sameeyey macluumaadka ku yaalla codsiga.

3) Haddii Wasaaraddu u diido codsi lagu codsanayo *LAC, markaa Wasaaraddu waa in uu codsadaha qoraal ku ogeysiisaa sababaha loogu diidey. Qoraalka ogeysiiska ah waa in lagu gaarsiiyaa codsadaha muddo 14 maalmood gudahooda markii la qaatey go'aanka.

4) Lambarka *LAC waxaa la bixiyaa marka Wasaaraddu uu qofka ay khuseyso ay siiso shahaaddada *LAC. *LAC walba waxaa uu u gaar yahay shakhsi gaar ah. Qof kasta waxaa uu yeelan karaa hal *LAC keliya waana in qofkaasu u isticmaalaa ujeeddooyinkii waaafaqsan shuruucda dakhliga. *LAC uu qof leeyahay looma wareejin karo mana isticmaali karo qof kale.

5) Wasaaraddu waa inaysan *LAC siinin qof illaa ay Wasaaraddu ku qancdo saxnaanta aqoonsiga qofka iyo in qofkaasi uusan hadda lahayn *LAC.

6) Waa in aan qofna u marag-furin qof kale, xataa haddii uu yahay sarkaal dakhli, in qofkaasi uu leeyahay ama aan loo sameyn *LAC gaar ah iyada oo aaney taasi dhab ahayn.

**Qodobka 25aad: Shahaadadda Canshuur-bixinta ee La iska Rabo (SHCB)**

1) Si loo muujiyo in ay yar tahay halis dhinaca Canshuur-bixinta ah iyo si loo dhiirrigeliyo Canshuur-bixinta Wasaaraddu waxay soo saari kartaa shahaadooyin Canshuur-bixin/*tax clearance certificates* (SHC).

2) Hay'ad kasta oo lagu xusey joog-u-taxa koowaad (first column) ee Qaybta II ee Jadwalka Koowaad waa in ay ka dalabtaa *SHC oo tarjumaysa waqtiga la joogo qof kasta oo codsanaya arrimaha ama ku-hawlan wax-is-dhaafsiyada *(transacations) ku taxan Qaybtaas.

3) Marka Wasaaraddu qoraal kaga soo codsato, hay'adaha lagu xusey joog-u-taxa kowaad ee Qaybta II ee Jadwalka Koowaad waa in ay qoraal ahaan ku siiyaan bayaan cayimaya-

- a) qiimaha macaamilka ganacsi ee lala sameeyey hay'adaha oo laguna xusey joog-u-taxa labaad ee isla Qaybtaas muddaduna ku cayiman tahay codsiga Wasaaradda; iyo
- b) magacyada, cinwaannada, lambarrada *LAC ee shakhsiyaadka macaamilka ganacsi lala sameeyey.

**Qodobka 26aad: Soo Codsashada iyo Siinta Shahaaddada Canshuur-bixinta**

1) Qof kasta waxa uu Wasaaradda ka codsan karaa *SHC. Codsiga waa in uu ku qornaadaa foomka loogu talagalay waana in loo buuxiyaa sidii loogu talagalay. Codsaduhu waa in uu leeyahay *LAC waana in uu ku caddeeyaa codsigiisa.

2) Wasaaraddu waa in ay muddo 14 maalmood gudahooda uga jawaabtaa codsiga, SHC, iyaga oo siinaya *SHC ama qofka qoraal ugu sheegaya sababaha loogu diidey.

3) Wasaaraddu waa in ay siisaa *SHC haddii marka go'aan laga gaarayo codsiga aan codsadaha lagu lahayn Canshuur, Canshuur-celin ama wax kale oo uu ku waajibinayo sharci dakhli mid uu ahaadaba. Haddii aaney arrintu sidaas ahayn, Wasaaraddu waxaa ay soo saari kartaa *SHC oo shuruud ku xiran tahay ama waa ay diidi kartaa codsiga.

4) *SHC waa in ay tixraacdaa ugu yaraan 3dii sano ee la soo dhaafey waana inay xustaa -

a) magaca Canshuur-bixiyaha iyo lambarka *LAC ee Canshuur-bixiyaha;

b) Canshuurta ku waajibtey muddooyinkaas iyo Canshuurta weli ku harsan (haddii ay jirto);

c) marka ay Canshuur ku harsan tahay, *heshiiska lagu bixinayo Canshuurta ee ay ku qanacday Wasaaraddu.;

d) haddii si un loo xaddidey hadafka *SHC loo adeegsan karo; iyo

e) goorta ay *SHC dhacayso.

5) Waa in aan qofna u marag-furin qof kale, xataa haddii uu yahay sarkaal dakhli, in qofkaasi loo sameeyey shahaaddo *SHC iyada oo aaney taasi dhab ahayn.

**Qodobka 27aad: Ka-noqosho, beddelidda ama Wax-ka-beddelidda *LAC ama *SHC**

1) Sababo macquul awgood, Wasaaraddu waxa ay la noqon kartaa *LAC ama *SHC. Wasaaraddu waa in ay la noqotaa *LAC haddii-

a) qofka lagu tilmaamey shahaaddada *LAC uu been-abuur yahay;

b) qofka lagu tilmaamey shahaaddada *LAC uusan si sax ah uga tarjumeynin aqoonsiga saxda ah ee qofka shahaaddada loo soo saarey; ama

c) qofka shahaaddada *LAC loo soo saarey uu leeyahay *LAC kale oo qan waqtigiisu dhicin.

Ka noqoshadu waa in ay ahaataa qoraal waana in la gaarsiiyaa qofka *LAC ama *SHC loo sameeyey ama, haddii qofka uu been abuur-yahaynna, laga dhigo *mid si guud dadweynuhu u heli karaan.

2) Wasaaraddu waxaa ay beddeli kartaa *LAC ama *SHC kala noqon kartaa iyada oo soo saaraysa *LAC cusub si waafaqsan Qodobka 24aad ama *SHC cusub si waafaqsan Qodobka 26aad.

3) Haddii faahfaahinta ku cayiman shahaaddada *LAC ay is-beddesho, qofka haysta *LACda waa in uu Wasaaraddu qoraal ugu soo gudbiyaa faahfaahinta wixii iska beddelay. Wargelintana waa in Wasaaradda lagu gaarsiiya muddo 14 maalmood gudahooda.

4) Sababo macquul ah awgood, Wasaaraddu waxa ay qofka siin kartaa shahaaddo *LAC oo wax laga beddeley iyada oo aan lagala noqon *LAC.

## Qodobka 28aad: Xuquuq-u-lahaanshaha Macluumaad iyo Matalaad

1) Canshuur-bixiye kasta waxaa uu xaq u leeyahay in uu Wasaaradda ka codsado uuna ka helo macluumaad ku saabsan waajibaadyada lagu leeyahay sida ay dhigayaan shuruucda dakhliga. In Wasaaradda ay ku guuleysan waayso in ay u hoggaansanto codsiga saameyn kuma yeelaneyso waajibaadyada canshuur-bixiyaha sida ay dhigayaan shuruucda dakhliga, kuwaas oo ay ka mid yihiin waajibka ah bixinta canshuurta.

2) Canshuur-bixiye kasta waxaa uu xaq u leeyahay in cid ay ku matasho mucaamalaadka uu canshuur-bixiyuhu la leeyahay Wasaaradda iyo saraakiisheeda dakhliga, waana in *hay'ad (*entity*) walba ay matalaad heshaa. Wasaaradda waxa ay qoondeyn kartaa foom ay canshuur-bixiyeyaashu isticmaalaan marka ay magacaabayaan wakiil. Wasaaradda iyo saraakiisheeda dakhligu waajib kuma aha in ay war gaarsiiyaan canshuur-bixiye iyaga oo u sii maraya wakiilka canshuur-bixiyaha haddii canshuur-bixiyuhu uu ku soo sheego foomka loogu talogaley marka uu magacaabayo wakiilka ma ahee.

## Qaybta III: La-taliyeyaasha Canshuuraha

## Qodobka 29aad: Mamnuucidda Matalaadda iyo Talo-siinta Canshuurta

1) Iyada oo ku xiran sida ay dhigeyso faqradda 3aad, qof ma dalban karo mana heli karo ujuuro lagu bixiyo ama la xiriirta -

a) matalaad uu canshuur-bixiyeyaal ku matalo *arrimahooda canshuuraha;
b) bixinta talo aasaasi ahaan la xiriirta fasiraadda ama raadka uu leeyahay sharci dakhli; ama
c) diyaarinta *canshuur-celin, ka-hor-imaansho, rafcaan kasta ama dukumenti kasta oo kale oo la halmaala sharci dakhli.

2) Iyada oo ku xiran sida ay dhigeyso faqradda 3aad, qofna looma oggola in uu-

a) sheegto in uu yahay la-taliye dhinaca canshuuraha ah;
b) tilmaamo in lacag ujuuro ah qofka bixiya uu gacan ka siinayo arrimaha lagu xusey faqradda 1aad.

3) Faqradaha 1 iyo 2 laguma saleynayo la-taliye canshuureed oo loo ansaxiyey si waafaqsan Qodobka 30aad. Faqradaha 1 iyo 2(b) laguma saleynayo qareen marka uu gudanayo hawshiisa sharciga oo la xiriirta sharci dakhli. Qareenka waa in uu yahay mid oggolaansho (licence) shaqadiisa la xiriirta ka haysta Guddiga Qiimeynta Qareenada.

## Qodobka 30aad: Ansaxinta iyo Diiwaangelinta La-taliyeyaasha Canshuuraha (Tax Consultant)

1) Qofka waxaa uu noqon karaa la-taliye canshuur marka Wasaaraddu ay qofkaas siiso shahaaddo ayna u qoondeyso lambar diiwaangelin. Wasaaraddu waa in ay

sameysaa ayna haysaa diiwaan ay ku qoran yihiin la-taliyeyaasha canshuuraha ee la ansaxiyey.

2) Qofka ah la-taliye canshuur oo la ansaxiyey waa in uu lambarkiisa diiwaangelinta mar walba ku xusaa xiriirrada uu la sameynayo Hay'adda.

3) Xeer-nidaamiyeyaal waa in ay xeeriyaan ansaxinta iyo liis-ka-saarista la-taliyeyaasha canshuuraha iyo sida ay hawlahooda u gudanayaan.

## MADAXA IV: WAR-IS-DHAAFSIGA RASMIGA AH

### Qodobka 31aad: Afka Rasmiga ah

1) Af-Soomaaliga ayaa ah afka rasmiga ah ee shuruucda dakhliga waxaana ay Wasaaraddu diidi kartaa in ay aqoonsato qoraal kasta ama dukumenti kasta oo aan ku qorneyn afka rasmiga ah.

2) Wasaaraddu waxa ay canshuur-bixiyaha ku waajibin kartaa in uu qoraal ama dukumenti ku soo tarjumo Af-Soomaali. Qoraalka ama dukumentiga waa in ay muhiim u ahaadaan sida sharciga dakhliga loogu maamulayo canshuur-bixiyaha. Dalabka Wasaaradda waa in uu ahaadaa qoraal waana in la gaarsiiyaa canshuur-bixiyaha.

3) Marka uu u hoggaansamo faqradda 2aad, canshuur-bixiyuhu waa in uu adeegsadaa turjumaan ay ansaxisey Wasaaradda, uuna bixiyo kharashka turjumaadda. Canshuur-bixiyaha soo gudbin waaya tarjumaad la ansaxiyey waxaa uu jebiyey qodobkaan. Marka taas laga soo tago, Wasaaradda waxa ay turjumaad u diri kartaa qoraalka ama dokumnetiga waxaana uu canshuur-bixiyuhu ku khasban yahay in uu bixiyo kharashka ku baxay turjumidda.

### Qodobka 32aad: Lacagta Rasmiga ah

1) Shilin Soomaaliga ayaa ah lacagta rasmiga ah ee shuruucda dakhliga. Haddii uusan sharci dakhli uu beddelkeeda oggolaado ma ahee, dhammaan qadarka lacagta uu ku xisaabtamayo sharci dakhli waa in ay ku saleysnaataa ama loo beddelaa Shilin Soomaali waana in dhammaan canshuurta lagu bixiyaa Shilin Soomaali.

2) Lacagta qalaad ee loo bedelayo Shilin Soomaali waa in lagu beddelaa heerka sarifka bankiyada dhexdooda ee Bankiga Dhexe ee taariikhda qaddarta lacagta la tixgelinayo sida uu dhigayo sharciga dakhliga ee khuseeya.

3) Wasaaradda waxa ay qof ama koox ku waajibin kartaa inay qaddar lacag ah ugu soo xisaabtamaan lacag qalaad ahaan marka laga fekerayo sharci dakhli oo gaar ah. Waajibintu-

a) waa in ay ahaataa qoraal waxaana ay yeelan kartaa qaab wareegto oo kale ah;

b) waxa ay u habboonaan kartaa hal muddo ama muddooyin hal ka badan iyo hal sharci dakhli ama sharciyo dakhli oo mid ka badan;

c) waxa ay ku xirnaan kartaa shuruud ama shuruudo ay Wasaaradda go'aamiso; iyo

d) waa mid la fulinayo in kasta oo ay jirto sida ay dhigeyso faqradda 1aad).

Marka loo haysto sabab macquul ah waajibinta waa la laali karaa.

4) Taariikhda qaddar lacageed lagu xisaabtamo sida uu dhigayo sharci dakhli waa taariikhda lacagtaasi ay waajibeyso, ama la heley, laga soo saarey wax kale, kharash ahaan loo galey, la bixiyey ama si kale loogu xisaabtamey sida uu dhigayo sharciga dakhliga.

5) In kasta oo ay jirto sida ay dhigeyso faqradda 1), xeer-nidaamiyeyaasha waxaa ay oggolaan karaan in si ku-meelgaar ah loo isticmaalo cadad Shilin Soomaaliga ah ee u dhigma Doolarka Mareykanka.

**Qodobka 33aad: Foomamka iyo Ogeysiisyada**

1) Qaabka dukumentiyada uu waajibinayo sharci dakhli waxaa qeexaya xeer-nidaamiyeyaal. Haddii kale, Wasaaradda ayaa u dejin karta qaabka ay noqonayaan dukumentiyada.

2) Qof kasta waa in uu isticmaalaa foomka logu talagalay marka uu dukumentiyada ku diiwan gelinaayo Wasaaradda ama marka uu foomka si kale uu u waajibiyo sharci dakhli.

3) Wasaaradda waa in ay foomamka loogu talagalay arrimahan uu ka dhigo kuwo dadweynuhu ay wada heli karaan, taas oo ay ka mid tahay in laga helo xafiisyada Wasaaradda iyo goobaha kale ama qaababka kale ee ay go'aamiso Wasaaradda sida wargeeysyadda ama barta internetka.

**Qodobka 34aad: Dukumentiyada La-ansaxiyey iyo Kuwa Cilladeysan**

1) Dukumenti ay Wasaaraddu u soo saartey si waafaqsan sharci dakhli waxaa ay dhab-ahaantiisu sugan tahay haddii magaca ama jagada ama sarkaalka dakhliga ee loo oggolaadey uu-

a) haddii uu yahay dukumenti waraaq ah, ku saxiixan yahay, daabacan yahay, shaabadeysan yahay ama uu ku qoran yahay dukumentiga; ama

b) haddii uu yahay dukumenti elektaroonig ah, dukumentiga loo isticmaalay isaga oo ah saxiixa elektoroonik ah.

2) Dukumenti lagu soo saarey sharci dakhli ma ahan mid aan sax ahayn ama cilladeysan haddii -

a) uu waafaqsan yahay sharciga dakhliga maaddo ahaan iyo raad ahaanba; iyo

b) shakhsiga uu ku socdo dukumentiga ama uu cadeeynayo in lagu xuso dukumentiga iyada oo la hubiyay.

3) Haddii dukumentiga Wasaaradda uu leeyahay cillad, Wasaaradda waxa ay sixi kartaa cilladdaas iyada oo wax-ka-beddel ku sameynasa dukumentiga. Go'aankan lama raacayo haddii cilladdu ay la xiriirto dood ku saabsan fasiraadda sharci dakhli ama xaqiiqo la xiriirta shakhsi gaar ah. Marka ay taas jirto, Wasaaraddu waxaa ay dood ka keeni kartaa cilladda, laakiin wax kama beddeli karto dukumentiga iyada oo aan oggolaansho ka helin dhammaan dhinacyada ay khuseyso.

4) Iyada oo la ilaalinayo faqradda 3, Wasaaradda waxa ay wax ka beddeli kartaa wareegto rasmi ah ama go'aan gaar ah si waafaqsan Qodobka 10aad iyo 14aad, hadba sida ay baahidu tahay.

## Qodobka 35aad: Dukumentiyada Waraaqaha ah ee La Gaarsiiyo Wasaaradda

1) Dukumenti waraaq ah waxaa la gaarsiiyey Wasaaradda sida uu dhigayo sharci dakhli marka dukumentiga la geeyo xafiis ay leedahay Wasaaradda. Dukumenti waraaq ah waxaa sidoo kale lagu diri karaa boosto laakiin gaarsiintu ma dhacayso ilaa dukumentiga uu ka helo xafiis ay Wasaaraddu leedahay.

2) Marka uu qof gaarsiiyo dukumenti Wasaaradda, Wasaaraddu waa in ay islamarkiiba qirtaa gaarsiinta iyada oo shaabadeyneysa dukumentiga.

## Qodobka 36aad: Gaarsiinta Dukumentiyada Waraaqda ah

1) Wasaaradda waxa ay dukumenti waraaq ah ay qof gaarsiisey sida uu dhigayo sharci dakhli marka uu-

a) dukumentiga gacanta ka saaro qofka ama, marka ay hay'ad (**entity)* tahay, uu gacanta ka geliyo **masuulka wasaaradda** *(*entity*);

b) dukumentiga geeyo ama boosta ugu diro halka uu caadi ahaan deggan yahay ama deganaa markii ugu dambeysey, gacansigiisa, xafiiskiisa, sanduuqiisa boostada ama cinwaanka kale ee qofka, oo uu ka mid yahay cinwaanka ku qoran shahaaddada *LAC ee qofka;

c) dukumentiga lagu diro boosto la diiwaangeliyey ama adeegga loo yaqaan boostaale *(courier)* ee la diiwaangeliyey, waase in boostada ama adeegga uu ogeysiiyaa qofka in dukumentiga uu u diyaar yahay in uu ka qaato goob cayiman, ama

d) in dukumentiga loogu geeyo ama boosto loogu diro markab uu qofku leeyahay ama dhowaantan lahaa.

2) Qofku wuxuu Wasaaradda ka dalban karaa in dukumentiyada ku saabsan sharciyada dakhliga soo gaarsiiyo isaga oo u diraya cinwaan elektaroonik ah. Marka uu dalabka sameynayo, qofku waa in uu adeegsadaa qaab ka mid ah foomka ay Wasaaraddu u qoondeeysey arrintaas. Dalbashadu waa in ay waafaqsantahay ujeedooyinka dhammaan shuruucda dakhliga iyo gaarsiinta dhammaan dukumentiyada. Gaarsiinta Wasaaradda waxaa ay dhacdaa marka Wasaaradda ay hesho ogeysiis in dukumenti loogu soo direy cinwaanka elektaroonigga ah ee qofka.

3) Dukumenti waraaq ah waxaa Wasaaraddu ay shaqsi ama koox gaarsiisey marka la raaco hababkan soo socda:

a) haddii lagu gaarsiinayo gacan-ka-saaris qof ama loo dhigayo goob, marka gacanta laga saaro ama loo dhigo goobta;

b) haddii ay tahay gaarsiin boosto diiwaangashan ama adeeg boostaale (*cuourier)* diiwaangashan, marka dukumentiga loo geeyo ama la ogeysiiyo qofka in dukumentigu uu diyaar u yahay in uu soo qaato;

c) haddii uu yahay adeeg kale oo boostada loogu direy cinwaan ku yaalla Soomaaliya gudaheeda, 10 maalmood ka dib maalinta boostada lagu direy; iyo

d) haddii uu yahay adeeg kale oo boostada loogu direy cinwaan ku yaalla Soomaaliya dibaddeeda, waqtiga dukumentiga caadi ahaan ay boostada caadiga ah ku gaarto.

## Qodobka 37aad: Hannaanka Dukumentiga Elektaroonigga ah

1) Wasaaraddu waxa ay dhisi kartaa kana shaqeysiin kartaa hannaan -

a) dukumentiyada elektaroonika ah loogu fayl-gareeyo Wasaaradda,

b) Adeegga dukumentiyada elektaroonigga ee ay bixiso Wasaaradda.

2) Sidaa darteed, waa in Wasaaraddu soo saartaa xeerar lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah oo la xiriira -

a) diiwaangelinta shakhsiyaadka looga baahan yahay in ay ka-qaybqaataan hannaanka, taas oo ay ka mid tahay soo-saarista iyo laalista sumadaha xaqiijinta (*authentication codes*);

b) noocyada dukumentiyada lagu soo gudbin karo hannaanka, oo ay ka mid tahay qaabka (*format*) dukumentiga iyo habka loo soo gudbinayo iyo soo-saarista iyo laalista lambarrada diiwaangelinta dukumentiga;

c) xallinta caqabadaha, oo ay ka mid yihiin saxidda khaladaadka, wax-ka-beddelka dukumentiyada iyo habraac marka uu istaago ama khalkhal galo hannaanka;

d) in la ilaaliyo sirta, haddii ay yihiin shakhsiyaadka naf-ahaantooda u isticmaalaya hannaanka ama kuwa hannaanka isticmaalaya iyaga oo ka wakiil ah shakhiyaad kale; iyo

e) wax kasta oo kale oo gacan ka geeysanaya in hannaanka si wanaagsan loo maamulo.

3) Dukumenti elektaroonik ah waxa qof uu gudbiyey marka lambar diiwaangelin uu helo isaga oo isticmaalaya summadda xaqiijinta (*Authentication Code*) ee qofkaas leeyahay. Xeerkan ma khuseeyo marka qofku Wasaaradda ku qanciyo in qofka uusan soo dirin dukumentiga iyo in dokuemntiga aan la soo dirin iyada oggolaansho laga haysto qofkaa.

4) Wasaaraddu waxaa ay dukumenti gaarsiisey qof marka lambar diiwaangelin dukumenti loo sameeyo iyo marka dukumentiga la furi karo iyada oo la adeegsanayo sumad xaqiijin (*authentication code*).

5) Wasaaraddu waxaa ay oggolaan kartaa in dukumenti la daabacay uu noqdo nuqul dukumenti elektaroonik ah oo loo fayl-gareeyey sida ay dhigeyso faqradda 3aad ama loo dhiibey sida ay dhigeyso faqradda 4aad. Maxkamaduhu waxaa ay nuqulka u aqbali karaan in caddeyn sax ah (*prima facie evidence)* ka tahay nooca iyo waxa ku qoran dukumentiga.

## MADAXA V: HAYNTA IYO BIXINTA MACLUUMAADKA

### Qaybta I: Ilaalinta Dukumentiyada

### Qodobka 38aad: Ilaalinta Dukumentiyada

1) Qof kasta waa in uu dukumentiga ka dhigaa mid laga heli karo Soomaaliya (haddii ay waraaqo yihiin ama haddii ay elektaroonik yihiinba):

a) lagama-maarmaan u ah in la sharxo macluumaad ay tahay in lagu bixiyo dukumenti kasta oo uu qof gaarsiiyo Wasaaradda si waafaqsan sharci dakhli;

b) lagama-maarmaanka u ah in awood loo yeesho in si sax ah loo go'aamiyo canshuurta ay tahay in uu bixiyo qofka ee uu dhigayo sharci dakhli; iyo

c) Si loo xaqiijiyo ahdaaf uu dhigayo sharci dakhli oo uu xoojinaayo sharci kale oo dakhli, xeer-nidaamiyeyaal ama ay ansaxisey Wasaaraddu.

2) Dukumentiyada lagu xusey faqradda 1aad waa in la hayaa ilaa laga gaaro taariikhda dambe ee si guud ay faqradda 3aad u sheegtey in dukumentiyada la haynayo ama taariikhahan soo socda:

a) marka uu qofku kahor imaado ama uu rafcaan qaadanayo, dhammaan dukumentiyada arrimaha lagu muransan yahay waa in la keeydiyaa ilaa arrinkaas go'aan kama-dambeys ah laga qaadanayo lagana fulinayo go'aankaas;

b) marka uu qof codsi u gudbinayo Wasaaradda, dhammaan dukumentiyada la xiriira codsiga waa in la hayaa ilaa codsiga go'aan kama-dambeys ah laga gaarayo;

c) marka uu qofku doonayo in loo soo celiyo canshuur uu horey u bixiyey, dhammaan dukumentiyada la xirira xisaabinta lacag-celinta waa in la keeydiyaa ilaa laga sameeyo lacag-celinta; iyo

d) marka uu qof heley ogeysiis loogu sheegayo baaris ay sameysay Wasaaradda, dhammaan dukumentiyada la xiriira baarista waa in la hayaa ilaa Wasaaradda ay qofka qoraal ku ogeysiineyso in baarista la soo gabagabeeyey.

3) Taariikhda guud ee la haynayo dukumentiyadu waa 4 sano oo ka bilowda -

a) marka ay la xiriirto canshuurta dakhliga (*income tax*), dhammaadka sanadka ugu dambeeya ee la qiimeynayo canshuurta ee dukumentiyadu ay la xiriiraan; iyo

b) marka ay la xiriirto canshuuraha kale, taariikhdii u dambeysey ee canshuur-bixiyuhu ku waajibtey in uu dukumentiga u geeyo Wasaaradda ama uu bixiyo canshuurta dukumentiyadu la xiriiraan, labadooda midda dambeysa.

4) Wasaaraddu waxa ay qof ka dhaafi kartaa ama ka yareeyn kartaa waajibka ah in uu hayo dukumentiyo gaar ah. Ka dhaafidaas ama waqti yareeyntaas waa inta ku cad ogaysiiska Wasaaradda.

5) Wasaaraddu waxa ay qof ku waajibin kartaa in uu keeydiyo dukumentiyo gaar ah iyo in uu keeydiyo muddo cayiman. Dukumentiyadu waxaa ay la xiriiri karaan *arrimaha canshuurta ee qofkaa iyo qof kale ama arrin kasta oo kale oo la xiriira maamulidda sharci dakhli. Muddada waa ay ka dheeraan kartaa muddada lagu xusey faqradda 2aad. Waajibintu waa in ay ahaataa qoraal loona geeyaa qofka. Waajibintu waa in aay tilmaamtaa dukumeentiyadda iyo waqtiga la keeydinayo.

## Qaybta II: Macluumaadka Sida Joogtada ah Loo Bixiyo

### Qodobka 39aad: Canshuur-Celinta

1) Sida uu dhigayo Qodobkan, *canshuur-celinta waa in loo sameeyaa qaabka iyo waqtiga uu u cayimo sharciga dakhliga ee waajibinaya *canshuur-celinta.

2) *Canshuur-celinta waa in uu qofka u saxiixaa shakhsi ahaan. *Canshuur-celinta *Hay'ad (*entity*) waa in uu saxiixaa mas'uulka sida saxda loogu igmadey.

3) *Canshuur-celinta waa in lagu xusaa in ay dhammeystiran tahay oo ayna sax tahay.

4) Marka ay xaalad xasaasi ah ay jirto, Wasaaradda waxa ay qofku waajibin kartaa in uu soo sameeyo *canshuur-celin. Wasaaradda waxaa ay sidaas sameyn kartaa iyada oo aan u fiirin marka qofka uu sameynayo *canshuur-celinta soo socota.Waajbintu waa in ay qoraal ahaataa waana in loo geeyaa qofka ay quseeyso. Ogeysiiska canshuur celinta waa in ay ku cadaato muddada *canshuur-celinta la sameeynayo iyo taariikhda ay waajib tahay in canshuur-celinta la soo xareeyo. Xaaladahan soo socda ayaa ah kuwo xasaasi ah:

a) marka Wasaaradda ay aaminsan tahay iyada haysato sababo macquul ah in qofka uu musalifey;

b) marka Wasaaradda ay aaminsan tahay iyada haysato sababo macquul ah in qofka -

i) uu Soomaaliya uga tegi rabo si abadi ah;

ii) ama uu joojin doono hawlaha uga socda Soomaaliya; ama

iii) uu galey dembi uu dhigayo sharci dakhli; iyo

c) Marka Wasaaradda ay u aragto in ay muhiim tahay, taas oo ay ka mid tahay marka qofku uu xifdin waayo dukumeentiyadda looga baahanyahay sida xusan Qodobka 38aad.

## Qodobka 40aad: Gacan-siinta Diyaarinta Canshuur-celinta

1) Sida ku xusan Qodobkan, qofka cid kale u diyaarinaya *canshuur celin waa in uu-

a. Saxiixaa canshuur-celinta, isaga oo sheegaya lambarka diiwaangelinta la-taliyaha canshuurta ee diyaariyeycanshuur-celinta;

b. Cayimaa ilaa inta uu diyaariyuhu baarey dukumentiyada qofka ay ku waajibtey in uu canshuur-celinta sameeyo iyo nooca dukumentiyada uu baarey, iyo

c. Cadeeyo in ilaa inta uu ogyahay diyaariyaha in canshuur-celinta loo diyaariyey si waafaqsan qodobbada sharciga dakhliga.

2) Qofku waxaa uu noqonayaa qof cid kale u diyaariya *canshuur celin haddii qofka, gunno lagu siinayo daraaddood u -

a. Xareeyo *canshuur-celin isaga oo ka wakiil ah qof kale; ama

b. diyaariyo ama gacan ka siiyo diyaaryinta *canshuur-celin ama lifaaq lagu lifaaqayo *canshuur-celinta qof kale.

Qofku ma noqonayo qof cid kale u diyaarinaya canshuur-celin haddii uu u shaqeynayo qofka waajibka ku tahay in uu geeyo *canshuur-celinta.

3) Qof cid kale u diyaarinaya *canshuur-celin waxaa uu diidi karaa in uu xaqiijiyo saxnaanta canshuur-celinta. Haddii ay sidaan dhacdo, diyaariyuhu waa in uu-

a) qofka ay waajibka ku tahay in uu canshuur-celinta sameeyo siiya bayaan qoraal ah oo uu ku sheegayo sababaha uu u diidey, iyo

b) marka uu saxiixayo canshuur-celinta waa in uu korkeeda ku cadeeyaa in saxiixani uu ku xiran yahay bayaanka lagu sheegay faqrad-hoosaadka a).

## Qodobka 41aad: Kordhinta Waqtiga La Geynayo Canshuur-celinta

1) Qofka ay waajib ku tahay in uu xareeyo *canshuur-celin sida uu dhigayo sharci dakhli waxaa ay Wasaaradda ka codsan kartaa in loo kordhiyo waqtigii ay ahayd in ugu dambeyn la xareeyo canshuur-celinta. Codsigu waa in uu qoraal ahaadaa waana in la sameeyaa ka hor maalinta ugu dambeysa ee ay ahayd in la geeyo canshuur-celinta.

2) Haddii ay jirto sabab macquul ah laguna sheego codsiga ku xusan faqradda 1aad, Wasaaradda waxaa ay u kordhin kartaa waqtiga. Waqti-kordhinta waa in ay ku xirnaataa shuruudaha ay Wasaaradda u aragto in ay ku habboon yihiin, oo ay ku jirto in la bixiyo *rahan. Haddii la siiyo waqti-kordhin iyo haddii kaleba, Wasaaradda waa in ay qofka qoraal ku ogeysiiyaa go'aanka Wasaaradda uu ka qaatey codsiga.

3) Qofku wuxuu soo codsan karaa waqti-kordhin soo noqnoqotay oo ku aaddan maalinta ay tahay in la xareeyo *canshuur-celin , waxaana Wasaaradda ay siin kartaa waqti-kordhin dhowr jeer. Haseyeeshee, wadarta waqti-kordhinta loo siiyey canshuur-celin waa in aaney ka badan 60 maalmood oo ka bilaabata maalintii ay asal ahaan ahayd in la xareeyo.

4) Siinta waqti-kordhinta maalinta ay ahayd in la xareeyo sida uu dhigayo Qodobkan ma beddeleyso maalinta ay ahayd in la bixiyo canshuurta ee ku cayiman sharciga dakhliga ee canshuur-celinta la geynayo loo cuskanayo.

## Qodobka 42aad: Qofka aan Canshuur-Celinta Ku Xareyn Waqtigii Laga Rabey

1) Marka qof uu *canshuur-celin soo xareyn waayo waqtigii uu waajibiyey sharciga dakhliga, Wasaaradda waxa ay u direeysaa qofka ogeeysiis qiimeeyn sida uu dhigayo Qodobka 48aad. Marka ay macluumaad u soo ururinayso hadafkaan qiimeenynta ah, Wasaaradda waxaa ay fari kartaa in qof kale uu diyaariyo uuna soo gudbiyo faahfaahinta ay ahayd in lagu soo daro canshuur-celinta. Xeerka ku jira Qodobka 46aad ayaa lagu saleynayaa waxa ay waajibisey Wasaaradda.

2) *Canshuur-celinta la soo xareeyo ka dib waqtigii laga rabey saameyn kuma yelaneyso *go'aanka canshuureed ee Wasaaradda, marka lagu daro qiimeynta loo sameeyey sida uu dhigayo Qodobka 48aad. Haseyeeshee, Wasaaradda waa in ay tixgelisaa macluumaadka ku jira *canshuur-celin la soo xareeyey goor dambe marka uu qiimeyn sameynayo, taas oo ay ka mid tahay marka uu go'aansanayo in wax-ka-beddel yar (*adjustment*) lagu sameynayo iyo in kale.

**Qodobka 43aad: Canshuur-celin iyo Macluumaad Kale oo Khaldan**

1) Qofku xaq uma laha in uu wax-ka-beddelo ama saxo *canshuur-celin marba haddii loo xareeyo Wasaaradda.

2) Marka qof uu ogaado in macluumaad loo xareeyey Wasaaradda uu khaldan yahay, qofka waa in uu islamarkiiba soo xareeyaa macluumaad kale oo dheeri ah kaas oo ah sixitaan. Waajibkan kuma xaddidna oo keliya macluumaadka loo soo xareeyey *canshuur-celin ahaan. Marka uu sixitaanka la xiriiro *canshuur-celin, Wasaaradda waxaa uu sixitaanka u arki karaa in uu yahay wax-ka-beddel lagu sameeyey *canshuur-celinta. Marka ay sidaa dhacdo, Wasaaradda waa in ay wax-ka-beddelka oo qoraal ah ku soo wargelisaa qofka.

3) Haddii Wasaaradda ay u aragto in macluumaad ku jira *canshuur-celin la soo xareeyey sida uu dhigayo sharci dakhli uu khalad yahay, markaa Wasaaradda waa in ay kaga falcelisaa qiimeyn ay ku sameeyso qofka. Qiimeyntu waxaa ay noqon kartaa midda uu tilmaamaya Qodobka 48aad ama, haddii canshuur-celintu ay ahayd mid ka dhalatey *is-qiimeyn, waa in uu kaga falceliyaa qiimeyn wax-ka-beddel yar ah sida uu dhigayo Qodobka 50aad. Marka uu soo ogaanayo macluumaad la qiimeynayo, Wasaaradda waa in ay tixgelisaa sixitaan kasta oo loo heley si waafaqsan faqradda 2aad.

4) Macluumaadku waxaa uu khalad yahay marka uu si baaxad weyn uu u dhantaalan yahay ama uu yahay marin-habaabina.

**Qaybta III: Macluumaad-bixinta Khasabka ah**

**Qodobka 44aad: Helidda Macluumaad iyo dhismooyinka (Hantida)**

1) Si loo xaqiijiyo ahdaafta sharciyada dakhliga, Wasaaradda waa in awood loo siiyaa in ay si buuxda oo xor ah u gasho dhisme, goob, ama u hesho macluumaad ama hanti kale. Gelidda iyo helidda waa in loo oggoladaa waqti kasta iyo maalin kasta xataa haddii aan ogeysiis horey loo sii bixin. Haseyeeshee, Wasaaradda ma geli karto guri la deggan yahay waqtiga u dhexeeya 7da (1 saac) fiidnimo ilaa 7da (1 saac) subaxnimo iyada oo aan oggolaansho ka helin cidda deggan ama haysan amar maxkamadeed oo lagu helo sida uu dhigayo Qodobka 99aad (awoodda baaritaanka iyo soo-qabashada).

2) Sarkaal dakhli oo doonaya in uu adeegsado awoodda lagu xusey faqradda 1aad waa in si gaar ah oo qoraal ah ay Wasaaradda ugu oggolaataa. Oggolaanshaha waa in si cad loogu aqoonsadaa sarkaalka.

3) Marka uu adeegsanayo awoodda lagu siiyey faqradda 1aad, sarkaalka dakhliga ee awoodda la siiyey waxaa uu -

a) wax kala soo bixi karaa ama nuqul ka sameysan karaa dukumenti, taas oo ay ka mid tahay nuqul elektaroonik ah;

b) gacanta ku soo dhigi karaa dukumenti uu sarkaalku aaminsan yahay in uu muhiim u noqon karo go'aaminta canshuurta lagu leeyahay qof sida uu dhigayo sharci dakhli;

c) gacanta ku soo dhigi karaa dukumenti uu sarkaalku aaminsan yahay in ay ku jirto caddeyn muujineysa in dembi laga galey sharci dakhli;

d) gacanta ku soo dhigi karaa hanti, oo uu ka mid yahay kombuyutar, uu sarkaalku aaminsan yahay in uu ku jiro ama ku keydsan yahay dukumenti ah nooca lagu xusey faqrad-hoosaadyada b) ama c) haddii dukumentiga aan si kale lagu dhiibin ama lagu heli karin;

e) naamuunado ka qaadi karaa alaabo; iyo

e) dhisme ama goob kasta dhigan karaa, ku xiri karaa ama ku keydin karaa *baabuur ama qalab kale oo uu adeegsanayo sarkaalka.

4) Dukumentiyada, hantida iyo naamuunadaha gacanta loogu soo dhigo sida ay dhigeyso faqradda 3aad waa in uu saxiixaa sarkaalka dakhliga ee loo oggolaadey. Waxaa loola tacaamuli karaa sidan soo socota:

a) dukumenti gacanta lagu soo dhigey waxaa la haysan karaa 3 bilood;

b) hanti gacanta lagu soo dhigey waxaa la haysan karaa muddada lagama maarmaanka ah si looga helo dukumentiga, laakiin waa in aaney ka badnaan 1 bil;

c) dukumenti laga heley hanti gacanta lagu soo dhigey waxaa la haysan karaa 3 bilood oo kale; iyo

d) naamuunadaha waxaa loo hayn karaa loogana takhalusi karaa qaabka ay farto Wasaaradda.

Sabab macquul ah marka ay jirto, Wasaaradda waxaa ay kordhin kartaa muddooyinka lagu xusey faqradda a), b) iyo c). Muddo kordhinta waa in aaney ka badnaan 12 bilood oo laga bilaabo taariikhda dukumentiga ama hantida markii ugu horreysey gacanta lagu soo dhigey.

5) Sarkaal dakhli oo loo oggolaadey in uu adeegsado awoodda ku xusan faqradda 1aad waxaa gacan siin kara ama la socon kara shaqaale u shaqeeya Wasaaradda, khabiir loo magacaabey sida uu dhigayo Qodobka 18aad ama sarkaal u shaqeeya dowladda oo gacan ku siinaya sida uu dhigayo Qodobka 19aad. Qofka gacanta siinaya ama la socda sarkaalka dakhliga ee loo oggolaadey waa in uu oggolaansho u haystaa uuna ku kormeeraa sarkaal dakhli ee loo oggolaadey.

6) Qodobkan waa mid la fulinayo in kasta oo ay jiraan shuruuc kale oo la xiriira sirnimada, xasaanadda ama danaha dadweynaha ee la xiriira soo-saaridda ama helidda dukumentiyo, kuwaas oo uu ka mid yahay sharci kasta oo la xiriira sirta bankiyada.

**Qodobka 45aad: Xuquuqaha iyo Waajibaayada Milkiilaha**

1) *Milkiilaha dhisme, goob, dukumenti ama hanti uu sarkaal dakhli doonayo in uu galo ama helo sida uu dhigayo Qodobka 44(1) waxaa milkiilahu uu sarkaalka ka dalban karaa in uu sarkaalku tuso oggolaanshaha lagu xusey Qodobka 44(2). Haddii codsigaas loo jeediyo oo uu sarkaankuna tusi waayo oggolaanshaha, markaa *milkiiluhu waxaa uu -

a) sarkaalka u diidi karaa galidda ama helidda;

b) ka dalban karaa sarkaalka in uu ka tago dhismaha ama goobta; ama

c) ka dalban karaa in uu salkaarka soo celiyo dukumentiyada ama hantida uu sarkaalku heley waqtigaas.

2) *Milkiilaha dhismayaasha, goob, dukumenti ama hanti uu sarkaal dakhli doonayo in uu galo ama helo sida uu dhigayo Qodobka 44(1) waa in uu intii macquul ah u fududeeyaa oo gacanna ka geystaa sidii si taabogal ah loogu fulin lahaa awoodda loo oggolaadey. Haddii uu gacan siin waayo sarkaalka dakhliga waxaa ay caddeyn u tahay carqaladeeyn canshuur-qaadista sida uu dhigayo Qodobka 99aad (awoodda baaritaanka iyo soo-qabashada).

3) Milkiilaha dukumenti ama hanti lagu hayo sida uu dhigayo Qodobka 44(4) waa uu fiirin karaa waxaana uu ka sameysan karaa nuqullo ama dukumentiyo ayuu kala soo bixi karaa. Fiirinta iyo nuqul ka sameysashada waxaa kharashkeeda bixinaya qofka, saacadaha caadiga ah ee xafiiska Wasaaraddu shaqeynayo iyada oo loo kormeerayo sida ay Wasaaradda uu go'aamiso.

4) Haddii dukumenti, hanti ama naamuunad ay luntey, dhibaato soo gaartey ama la tuuro iyada oo la adeegsanayo awoodaha uu bixinayo Qodobka 44aad, Wasaaradda waa in ay milkiilaha ka siiyaa mag dhaw.

**Qodobka 46aad: Ogeysiiska Lagu Dalbanayo Macluumaad**

1) Wasaaradda waxa ay iyada oo ogeysiis qoraal ah siinaysa qof ku waajibin kartaa in uu keeno macluumaad kasta oo si hubaalnimadeedu macquul tahay loogu sharxay ogeysiiska. Tani waxaa ay la mid noqon kartaa in qofka lagu waajibiyo inuu sameeyo dukumenti, taas oo ay ka mid tahay diyaarinta iyo fayl-gareynta faahfaahinta ay tahay in lagu daro *canshuur-celinta qof kale. Qofka hela ogeysiis waa in uu u hoggaansamaa waqtiga lagu cayimey ogeysiiska.

2) Wasaaradda waxaa ay iyada oo ogeysiis qoraal ugu sheegaysa qof ka dalban kartaa in uu hor yimaado, sidii isaga oo la dhaariyey, baarisna loogu sameeyo ama wax looga xaqiijiyo. Baaristu waxaa ay dhacaysaa waqti iyo goob lagu cayimey qoraalka

ogeysiiska ah. Baarista waxa sameeynayaa sarkaal dakhli oo si gaar ah uu qoraal ugu oggolaatay Wasaaradda. Oggolaanshaha waa in si cad loogu aqoonsadaa sarkaalka. Ogeysiiska ayaa laga yaabaa in uu qofku ku waajibiyo in uu goobta baarista keeno dukumenti uu hayo. Waa in dukumentiga qoraalka ah ogeysiiska loogu tilmaamaa si la hubo. Qofka baarista lagu sameynayo waxaa uu xaq u leeyahay in uu qabsado oo uu matalo sharci-yaqaan ama cid kale ay matasho inta ay socoto baarista.

3) Ogeysiiska loo bixiyey si waafqsan faqradaha 1aad ama 2aad waa in gacanta loogu geeyaa qofka uu ku socdo ama in ogeysiiska la geeyaa goobtii ugu dambeysey ama uu caadi ahaan ganacsiga uu ku leeyahay ama uu deggan yahay. Ogeysiiska waxaa loo geyn karaa isla waqtiga uu sarkaal dakhli doonayo in uu galo dhisme, goob ama helo dukumenti ama hanti sida uu dhigayo Qodobka 44aad (helidda macluumaad).

4) Waa in qof kasta uu u hoggaansamaa ogeysiiska lagu sheegey faqrada 1aad ama 2aad haddii qofka lagu leeyahay canshuur ama haddii kaleba, iyo haddii ogeysiiska, maclumaadka ama baaristu ay la xiriirto *arrimaha canshuurta ee qofka ama qofkale.

5) Qodobkan waa mid la fulinayo in kasta oo ay jiraan shuruuc kale oo la xiriira sirnimada, xasaanadda ama danaha dadweynaha ee la xiriira soo-saaridda ama helidda dukumentiyo, kuwaas oo uu ka mid yahay sharci kasta oo la xiriira sirta bankiyada.

**Qodobka 47aad: Hantidhowr**

1) Wasaaradda waxa ay dhammaan awoodaha ay leedahay u adeegsan kartaa in hantidhowr lagu sameeyo *arrimaha canshuurta ee qof. Awoodaha waxaa ka mid ah kuwa ku jira Qodobka 44aad (helidda macluumaad) iyo 46aad (ogeysiis lagu dalbanayo macluumaad).

2) Wasaaradda waxa ay qof u soo xulan kartaa in hantidhowr lagu sameeyo iyada oo ku xisaabtamaysa -

a) taariikhda qofka uu u leeyahay u-hoggaansamidda iyo u-hoggansamid la'aanta shuruucda dakhliga;

b) qaddarka lacagta ay tahay in uu qofku u bixiyo canshuur-ahaan;

c) nooca ganacsiga ama hawlaha kale ee uu ku jiro qofka;

d) shuruudo diyaarintoodu qayb ka ahayd qorshaha maareynta u-hoggaansamidda canshuuraha, oo ay ku jiri karto in si nasiib ah canshuur-celinta la soo sameeyey loogu soo xulo in hantidhowr lagu sameeyo; ama

e) arrimo kale oo ay Wasaaradda u aragto in ay habboon yihiin hubinta in la soo ururiyo canshuuraha maqan.

3) Hantidhowr lagu sameeyey qof kama joojineyso in qofkaa mustaqbalka mar kale lagu sameeyo hantidhowr. Wasaaradda waa in ay hubisaa in ay jiraan sababo macquul ah oo mar labaad loo sameeyo hantidhowr, gaar ahaan iyada oo tixgelinayso arrimaha lagu xusey faqradda 2aad.

4) Hantidhowrka waxaa loo sameyn karaa ahdaaf ka baxsan kuwa hal sharci dakhli (eg Qodobka 4aad).

## MADAXA VI: CANSHUURTA AASAASIGA AH EE WAAJIBTEY

### Qodobka 48aad : Qiimeynta iyo Is-qiimeynta

1) Qiimeynta canshuurta waxaa sameeya -

a) marka ay la xiriirto *is-qiimeyn, qofka xareynaya *canshuur-celin; iyo

b) mararka kale, oo ay ka mid tahay marka *is-qiimeynta qofka wax yar laga beddelayo, Wasaaradda ayaa sameeyneysa qiimeyn.

2) Marka uu qof ku guul-darreysto in uu *canshuur-celinta sameeyo waqtigii laga rabey sida uu dhigayo sharciga dakhli (taas oo ay ka mid tahay canshuur-celin ay ka dhalaneyso *is-qiimeyn), Wasaaradda waxa ay sameeyneysaa dib u qiimeyn. waxa ayna adeegsataa qiyaasidda ugu wanaagsan iyo macluumaadka macquulka ah ee la heli karo marka ay sameynayo qiimeynta (eeg Qodobka 42aad).

3) Wasaaradda waxa ay wax ka-beddel yar ku sameyn kartaa qiimeyn (ay ka mid tahay *is-qiimeyn) iyada oo sameynaysa qiimeyn wax-yar laga beddley. Ma jiro qof kale oo waxyar ka beddeli kara qiimeyn in uu yahay sarkaal dakhli oo ay Wasaaradda u oggolaatey ma ahee.

4) Ma jiro waqti xaddidan oo ay Wasaaradda ay tahay in ay qiimeyn ku sameeyo (oo ay ka mid tahay qiimeynta wax-ka-beddelka yar ah) marka ay jirto khiyaanno, bixin la'aan ku-talogal ah ama waajib-gudasho la'aan ba'an oo uu canshuur-bixiye sameeyo ama qof kale u sameeyo.

5) Iyada oo ku xiran faqradda 4aad, awoodda Wasaaradda ay u leedahay in ay *qiimeyn asal (primary assessment) ah ku sameeyso waxaa ay dhacaysaa 4 sano oo ka bilaabata taariikhda ay Wasaaradda markii ugu horreysey awood ay u lahayd in ay sameeyso qiimeynta.

6) Iyada oo ku xiran faqradda 4aad, awoodda Wasaaradda ay u leedahay in ay qiimeyn wax-ka-beddel yar ku sameeyso waxaa ay dhacaysaa 4 sano oo ka bilaabata-

a) marka wax-ka-beddel yar lagu sameeyo *is-qiimeyn, maalinta ay tahay in la xareeyo *canshuur-celin ka dhalatay qiimeyntaas ama, haddii waqtigu ka dambeeyo, taariikhda *canshuur-celinta la soo xareeyo;

b) marka *qiimeyn asal ah wax-ka-beddel yar lagu sameeyo, taariikhda Wasaaradda markii ugu horreysey ay xaq u lahayd in ay sameeyo *qiimeyn asal ah; iyo

c) marka qiimeyn wax-ka-beddel yar la sameeyay oo wax laga beddelo, taariikhda lagu xusey faqrad-hoosaadyada a) ama b) ee *qiimeyntii asalka ahayd ee wax-ka-beddel yar lagu sameeyey.

7) Qiimeyn lagu sameeyey si waafaqsan Cutubkan waxaa loola dhaqmayaa sidii in lagu sameeyey sharciga dakhliga ee faraya in qofka la qiimeeyo.

## Qodobka 49aad: Qiimeyn Hordhac ah iyo Rahan

1) Xaaladaha lagu qeexay qodobka 39(4) (xaaladdaha Xaasaasiga), Wasaaradda waxa ay qiimeyn hordhac ah ku sameyn kartaa canshuur ku waajibtey ama ugu waajibi doonta qof sida uu qeexayo sharciga dakhliga. Tani waxaa ay dhacaysaa haddii qofka ay waajib ku tahay in uu soo xareeyo *canshuur-celin iyo haddii kaleba. Qiimeyn hordhac ah waxaa ay la halmaashaa muddo ama muddooyin ama waxaa ay khuseysa dhacdooyin ama arrin ay Wasaaradda ku cayimayso ogeysiiska qiimeynta.

2) Halkii laga sameyn lahaa qiimeyn hordhac ah, Wasaaradda waxaa ay qof ka ogolaan kartaa *rahan loogu talogaley canshuurta hadda lagu leeyahay iyo tan mustaqbalka lagu lahaan doono hadba sida ay Wasaaradda ay u aragto in ay ku habboon tahay.

3) Wasaaradda waa in ay adeegsataa qiimeynta ugu wanaagsan iyo macluumaadka macquulka ah ee la heli karo marka ay sameynayso qiimeyn hordhac ah ama ay goynayso xaddiga *rahanta.

4) Hadii aanay Wasaaraddu si kale ugu wargelinin ogeysiinta qiimeynta, qofna kama qaadeeyso qiimeyn hordhac ah waajibkii saarnaa oo aha in uu soo xareeyo *canshuur-celin sida uu waajibinayo sharciga dakhliga.

5) Soo xareynta *canshuur-celinta, oo ay ka mid tahay marka ay ka dhalato *is-qiimeyn, saameyn kuma yeelaneyso qiimeyn hordhac ah.

6) Canshuur kasta oo bixinteeda ka dhalatay qiimeyn hordhac ah waxaa laga jarayaa canshuurta ay tahay in la bixiyo isla muddadaas, si looga hortago canshuur laba jeer la qaado.

## Qodobka 50aad: Qiimeyn Wax-ka-beddel Yar Lagu Sameeyey

1) Wasaaraddu waxaa ay qiimeyn ku sameyn kartaa wax-ka-beddel yar si loo hubiyo in canshuur-bixiyaha lagu leeyahay canshuur cadadeedu saxan tahay marka loo eego arimaha sababay in dib-u-qiimeeyn lagu suubiyo. Wasaaradda waa in ay adeegsataa qiyaasidda ugu wanaagsan iyo macluumaad macquulka ah ee la heli karo marka uu sameynayo qiimeynta wax-ka-beddel yar lagu sameeynayo.

2) Wasaaradda waa in aysan marnaba dib u eegis hor leh ku sameyn qiimeyn wax-ka-beddel yar horay loogu sameeyey ama wax laga dhimay iyada oo la raacayo go'aan ay gaartey maxkamad awood u leh, hadii aanan go'aankaas ama amarkaas maxkamadeed la laalin.

3) Qiimeyntu waxa ay saameynteedu ku egtahay marka wax-ka-beddelka yar lagu sameeyo.

### Qodobka 51aad: Wargelinta Qiimeyn

Marka ay Wasaaraddu sameynayso qiimeyn waafaqsan sharci dakhli, Wasaaraddu waa in ay ogeysiis qoraal ah oo sheegaya qiimeynta u gudbisaa canshuur-bixiyaha. Marka laga soo tago wax kasta oo kale oo uu farayo sharciga dakhliga ee ay khuseyso, wargelinta qiimeynta waa in aay sheegtaa-

a) magaca canshuur-bixiyaha iyo lambarka *LAC (haddii uu leeyahay) ee canshuur-bixiyaha;

b) qiimeynta Wasaaradda ee canshuurta laga rabo canshuur-bixiyaha muddada, dhacdada ama arrinta ay la xiriirto qiimeynta;

c) qaddarka canshuurta weli harsan ee ay tahay in la bixiyo ka dib marka la xisaabo waxa horey ugu maqnaa, waxa laga jaray ama lacagaha uu horey u bixiyey;

d) sida qiimeynta loo xisaabiyey;

e) sababaha ay Wasaaradu qiimeynta u sameeysay;

f) taariikhda ay waajib tahay in la bixiyo canshuurta; iyo

g) waqtiga, goobta iyo qaabka looga hor-imaan karo qiimeynta.

## MADAXA VII: XALLINTA KHILAAFAADKA

### Qodobka 52aad: Go'aamada Canshuurta

1) Go'aan canshuur waa go'aan (oo ay ka mid yihiin qiimeyn ama ka-baaqsasho) ay qaadatey Wasaaradda si waafaqsan sharci dakhli. Haseyeeshee, go'aan Canshuur kama mid aha-

a) wareegto rasmi ah ama go'aan gaar ah oo loo soo saarey si waafaqsan Qaybta II ee Madaxa I ama go'aan ama ka-baaqsasho soo saaridda, ka-hor-imaanshaha ama laalista wareegto rasmi ah ama go'aan gaar ah;

b) go'aan ama ka-baaqsasho saameyneysa qof keliya marka uuyahay sarkaal ama shaqaale dakhli ama wakiilka Wasaaradda;

c) go'aanka ama ka-baaqsashada Wasaaradda ee waafaqsan Madaxan, oo ay ka mid tahay *go'aan ka-horimaansho; ama

d) gelidda heshiis lacag loogu beddelayo halkii dacwad lagu soo oogi lahaa qof dembi ka galey sharci dakhli.

2) *Go'aan canshuureed waxaa la gaaray-

a) marka ay Wasaaraddu qiimeyn sameyneyso, oo ay wargelinta qiimeynta gaarsiiso canshuur-bixiyaha; iyo

b) marka ay jiraan *go'aamo canshuureed kale, oo ay Wasaaraddu gaarsiiso qofka wargelinta go'aanka oo qoraal ah.

3) Hadii aysan jirin Wargelinta lagu sheegey faqrad-hoosaadda 2(b), qofka uu go'aanku saameeyey waxaa uu ku doodi karaa in Wasaaradda u arko in ay gaartey *go'aan canshuureed oo aanan la aqbali Karin marka aay jiraan arimaha soo socda-

a) marka sharciga dakhligu uu cayimayo waqtiga ay Wasaaradda ay tahay in ay qaadato go'aan, goorta waqtigaas uu dhaco; ama

b) marka sharciga dakhligu uusan cayimeynin waqtigaas, 30 maalmood ka dib marka qofka ay arrintu saameysay uu Wasaaradda u soo gudbiyo codsi uu kaga codsanayo in uu go'aanka gaaro.

4) Siyaabaha soo socda ayaa caddeyn buuxda u noqon kara in *go'aan canshuureed la gaarey isla markaana tahay caddeyn sax ah *(prima facie)*:

a) marka ay la xiriirto qiimeyn, wargelinta ama dukumenti ay soo saartey Wasaaradda oo ay ku sheegayso in uu yahay nuqulka wargelinta; ama

b) marka ay la xiriirto wax kale, qoraal wargelin oo go'aan ah ama dukumenti ay soo saartey Wasaaradda oo sheegaya in uu yahay qoraal xusuusin ka ah (*memorandum)* go'aanka.

5) Cidda uu si toos ah u saameynayo *go'aan canshuureedka ayaa ka caban karta go'aankaas si waafaqsan Madaxan. Haddii waqtigii ku habboonaa looga soo caban, *go'aan canshuureedkaas wuxuu noqonayaa mid kama-dambeys ah oo dhammeystiran islamarkaana aanay dhici karin in dooddiisa la horgeeyo maxkamad ama madal kale.

6) Isla qodobkaan, xusidda go'aan-qaadashada Wasaaradda waxaa kamid ah in Wasaaraddu ay adeegsato awoodda ay u leedahay in go'aan ay qaadato, rido go'aan (xukun), amar bixiso, fikir dhiibato, bixiso ansaxin ama oggolaansho, ama wax lagu qanco.

**Qodobka 53aad: Ka-soo-hor-imaatin Go'aan Canshuureed**

1) Iyada oo la tix raacayo sharciga dakhliga, hadii qof uu ku qanci waayo *go'aan canshuureed saameynaya, waxaa uu Wasaaradda u gudbin karaa cabasho uu uga soo horjeedo go'aankaas. Cabashadaas waa in lagu xareeyaa mudo 30 maalmood

gudahooda oo ka soo bilaabaneeysa maalintii go'aanka la gaarey. Waa in cabashadu ay ahaataa qoraal waana in ay si cad u sheegtaa sababaha loo cuskadey.

2) Inta lagu guda jiro waqtiga lagu xareyn karo ka-hor-imaatinka ay tilaameyso faqradda 1aad, qofku waxaa uu Wasaaradda qoraal kaga codsan karaa in loo kordhiyo waqtigaas uu ku soo gudbinayo ka-soo-imaatinkaas. Wasaaradda waxaa ay oggolaan kartaa waqti-kordhinta haddii ay ku qanacdo in codsigu ku saleysan yahay sababo macquul ah. Si kastaba ha ahaatee, Wasaaradda waa in ay qofka u gudbisaa ogeysiis qoraal ah oo ku aaddan go'aanka ay ka qaadatey codsiga.

3) *Go'aan Canshuureed waxaa la hakinayaa laga bilaabo waqtiga qofku uu soo gudbiyo ka-soo-horimaatinkaas ku aaddan *go'aan canshuureedka ilaa waqtiga qofka wargeliyo go'aanka sida ku cad Qodobka 54aad. *Go'aan canshuureed waxaa sidoo kale la hakinayaa laga bilaabo waqtiga uu qofku uu gudbiyo codsiga ku xusan faqradda 2aad ilaa Wasaaradda ku wargelineeyso go'aanka ay kaga gaartay codsiga.

## Qodobka 54aad: Go'aan Diidmo

1) Ka-dib marka ay ka fekerto go'aan diidmo ah, Wasaaraddu waa in ay go'aansataa in ay beddelayso *go'aan-canshuureedka gebi ahaan ama qayb ahaan ama ay ka hortimaaddo go'aanka diidmada. Go'aanka laga qaato ka-soo-horjeedsiga waxaa loo yaqaannaa "go'aan diidmo" ama is-hortaag

2) Ka dib marka ay qaadato *go'aan diidmo ah, Wasaaraddu waa in sida ugu dhakhsiyaha badan ee macquulka ah ay qofka sameeyey diidmada waa in ay ku siiso ogeysiis go'aanka. Ogeysiiska waa in uu ku qornaado sababaha ay Wasaaraddu u cuskatey qaadashada go'aankeeda.

3) Haddii Wasaaraddu aysan ogeysiiska *go'aanka diidamada ku bixin 60 maalmood gudahooda ka dib markii la soo gudbiyey ka-soo-horjeesashada, qofku waxa uu dooran karaa in uu u qaato in Wasaaraddu ay ogolaatay ka-soo-horjeedsiga. Qofka doorashadiisa waa in uu ka dhigaa qoraal una geeyaa Wasaaradda.

4) *Go'aan ka-soo-horjeedid waxaa la qaataa-

a) maalinta qofka la gaarsiiyo ogeysiiska go'aanka; ama

b) haddii qofku uu doorto sida ay dhigeyso faqradda 3aad, taariikhda doorashada qofka uu gaarsiiyey Wasaaradda.

5) Ogeysiiska *go'aan diidmo waxaa uu caddeyn kama-dambayn ah u yahay in go'aankii la qaatey iyo in uu yahay caddeyn lagu qanci karo (prima facie).

6) Qofka aan ku qancin *go'aan diidmo waxaa uu rafcaan ka dhan ah go'aanka u qaadan karaa sida uu dhigayo Qodobka 55aad. Haddii aan rafcaan laga qaadan waqtigii la rabey, *go'aanka diidmo waa kama-dambeyn waana uu dhammeystiran yahay, loogamana doodi karo maxkamad ama madal kale.

**Qodobka 55aad: Rafcaan ka-dhan ah Go'aan Diidmo**

1) Dib-u-eegista *go'aamada diidmada ee ay dhigayaan shuruucda dakhliga waxaa awood u leh keliya Maxkamadda Sare ee Federaalka.

2) Qofka aan ku qancin *go'aanka diidmada waxaa uu Cabasho ( rafcaan) ka dhan ah *go'aanka diidmo u qaadan karaa Maxkamaddda Sare ee Federaalka. Iyada oo hadba ku xiran Qodobkan iyo Qodobka 56aad, rafcaanka waxaa lagu maamulayaa xeerarka caadiga ah ee habraaca Cabashada (rafcaanka) Maxkamadda Sare ee Federaalka.

3) Ogeysiiska rafcaanka waa in lagu xareeyaa Maxkamadda Sare ee Federaalka muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka bilaabma marka ogeysiiska *go'aanka diidmada la gaarsiiyo. Qofka waxaa uu Maxkamadda Sare ee Federaalka ka codsan karaa in ay u kordhiso waqtiga uu ku soo xaryenayo ogeysiiska rafcaanka. Maxkamadda Sare ee Federaalka waxaa ay u sameyn kartaa muddo kordhin haddii codsaduhu uu muujiyo sabab caqligal ah oo keeneysa daahidda.

4) Rafcaanlaha waa in uu nuqulka ogeysiiska rafcaanka ku soo gaarsiiyaa Wasaaradda 5 maalmood gudahood marka uu ogeysiiska u geeyo Maxkamadda Sare ee Federaalka.

5) Marka ay tixgeliso rafcaanka, Maxkamadda Sare ee Federaalka waxaa ay rafcaanka ka bixin kartaa amarka ay u aragto in uu ku habboon yahay.

**Qodobka 56aad: Rahan iyo Natiijooyinka ka Dhasha Rafcaan**

1) Iyada oo ku xiran sida uu dhigayo Qodobkan, rafcaanka qof ka qaata *go'aan Diidmo-

a) waa wax kama jiraan waana in aan loo dulqaadan ilaa uu qofku bixiyey dhammaan Canshuurihii lagu lahaa, oo ay ka mid yihiin Canshuurta lagu yeeshey oo ku salaysan go'aan Canshuureed; iyo

b) raad kuma laha xaqa ay Wasaaraddu u leedahay in ay qaado tallaabo la xiriirta go'aan Canshuureedka.

Go'aan Canshuureed waxaa uu macnihiisu yahay *go'aan Canshuureed oo laga soo hor-jeestey. Haddii wax-ka-beddel lagu sameeyey *go'aan Canshuureed, waa go'aanka Canshuureed ee wax laga beddeley.

2) Wasaaraddu waxa ay ka dhaafi kartaa, beddeli kartaa ama hakin kartaa waajibaadka lagu sheegey faqradda 1aad ilaa xal laga gaarayo rafcaanka ama waxaa uu qaadi karaa tallaabada kale ee Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon tahay, taas oo ay ka mid tahay waajibinta *rahan.

3) Haddii uu qof ku qanci waayo go'aan ay Wasaaraddu ka qaadatey faqradda 2aad, qofka waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Federaalka.

Maxkamadda Sare ee Federaalka waxa ay mar kale ku raaci kartaa go'aanka Wasaaradda.

4) Marka ay adeegsanayaan awoodaha lagu kala siiyey faqradaha 2 ama 3, Wasaaraddu iyo Maxkamadda Sare ee Federaalka waa in ay isu dheellitiraan -

a) baahida loo qabo in la joogteeyo habraaca ugu wanaagsan ee lagu xallin karo khilaafaadka; iyo

b) baahida loo qabo ilaalinta dakhliga Dowladda iyo wanaajinta nidaamka Canshuuraha gebi ahaanba.

## MADAXA VIII: BIXINTA IYO SOO-CELINTA CANSHUURTA

### Qaybta I: Canshuur-bixinta Joogtada ah

### Qodobka 57aad: Waqtiyada La Bixinayo Canshuuraha

1) Canshuurta waxaa la bixiyaa waqtiga lagu xusey sharciga dakhliga ee Canshuurtaa lagu soo rogey. Sida uu sharcigan qabo, Canshuurta waxaa la bixinayaa-

a) marka Canshuurta lagu bixinayo qiimeynta sida uu dhigayo Qodobka 48aad (soo-xareyn la'aanta Canshuur-celinta) ama 49aad (qiimeyn ka-hortag ah), taariikhda lagu xuso ogeysiiska qiimeynta ee lagu bixiyey sida uu dhigayo Qodobka 51aad;

b) marka Canshuurta lagu bixinayo qiimeyn wax-yar-laga beddeley sida uu dhigayo Qodobka 50aad, 30 maalmood ka dib taariikhda qofka qiimeynta lagu sameeyey ee loo geeyey ogeysiiska qiimeynta uu dhigayo Qodobka 51aad;

c) marka laga hadlayo ganaaxyo sida uu dhigayo Madaxa IX, taariikhda lagu cayimey ogeysiiska la geeyey sida uu dhigayo Qodobka 87aad;

d) marka loo eego qaddarka lacagta ay tahay in la siiyo Wasaradda sida uu dhigayo Qodobka 5(2) (dadka ay ajnebi Canshuur ku leeyihiin), 63(6) (kharashaadka rahan-ku-dallacidda iyo iibinta), 72(2) (kuwa ay cid saddexaad ay Canshuur ku leedahay), ama 73(2) ama (5) (wakiillada kuwa aan dalka degganeyn), taariikhda lagu cayimo ogeysiiska ku habboon;

e) marka loo eego Canshuurta ku waajibtey sida uu dhigayo Qodobka 69aad (maareeyeyaasha hay'adaha), taariikhda lagu cayimey ogeysiiska;

f) marka loo eego qaddarka lacagta ay tahay in la siiyo Waaxda Canshuurta sida uu dhigayo qodobka 70(3) ama (5) (kuwa helaya), 7 maalmood ka dib

iibinta qaddarka lacagta gooni looga dhigey ama aan gooni looga dhigin, sida ay u soo kala horreeyaan; ama

g) marka loo eego soo-xareynta qaddar lacag loo soo celiyey si waafaqsan Qodobka 79(5), 7 maalmood ka dib marka Wasaaraddu ay geeyso ogeysiiska waajibinaya in qaddarkaa lacagta la bixiyo.

2) Iyadaoo ku xiran Qodobbada 53(3) iyo 56aad (hakinta, laalidda ama beddelidda *go'aan Canshuureed), Canshuurta waxaa ay ahaaneysaa mid la bixiyo in kasta oo ay jiraan doodo iyo hawlo dib-u-eegis. Tani mar walba waa ay jirtaa iyada oo aan loo eegin in hawlaha/dacwadaha socda ay yihiin kuwo maamul, garsoor ama rafcaan.

### Qodobka 58aad: Kordhinta Waqtiga Lagu Bixinayo Canshuur

1) Canshuur-bixiye kasta waxaa uu Wasaaradda ka codsan karaa in ay u kordhiso waqtiga uu ku bixinayo Canshuurta uu ku waajibyey sharci dakhli. Codsigu waa in uu qoraal ahaadaa.

2) Marka codsigu uu ku salaysan yahay sabab quman, Wasaaraddu waxa ay kordhin kartaa taariikhda la bixinayo Canshuurta ama qayb ka mid ah Canshuurta. Waqti kordhinta waa in ay ku salaysan yahay shuruudaha ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon yihiin, oo ay ka mid tahay *rahan. Si kasta ha ahaatee, Wasaaraddu waa in ay codsadaha siisaa ogeysiis qoraal ah oo tilmaamaya go'aanka ay Wasaaraddu ka qaadatey codsiga.

3) Marka la bixiyo waqti-kordhin iyada oo Canshuur-bixiyaha loo oggolaanayo in uu u bixiyo qayb-qayb oo uu Canshuur-bixiyuhu ku guuldayarsto in uu xataa hal mar u bixiyo qayb-qayb, gebi ahaan Canshuurta soo hartey ayaa waajibeysa in uu islamarkiiba bixiyo.

### Qodobka 59aad: Qaabka Loo Bixinayo Canshuurta

1) Canshuur-bixiyuhu waa in uu Canshuurta ku waajibtey ku shubaa xisaabta Keydka Qaranka uu ku leeyahay bangi ka mid ah bangiyada hadafkan ay u ansaxisey Wasaaraddu. Haddii in lagu bixiyo bangi la ansaxiyey aanay suuragal u ahayn, Canshuur-bixiyuhu waa in uu Canshuurta ku bixiyaa xafiiska Wasaaradda si waafaqsan faqradda 2aad.

2) Wasaaraddu waxaa ay xafiis ka tirsan Wasaaradda u ansaxin kartaa in ay qabtaan Canshuurta la bixiyo waana in ay u xeerisaa xaddidaadaha iyo qaabka lacag-bixinta lagu aqbali karo. 24 saac gudahooda marka ay qabtaan lacagta, saraakiisha dakhliga ee xafiiska waa in ay Canshuurta ay qabteen ku shubaan xisaabta Keydka Qaranka ee bangiga loo ansixiyey sida ay dhigeyso faqradda 1aad.

3) Bangiga ama xafiiska Wasaaraddu waa in ay warqadda lacag-qabashada siiyaan cidda Canshuurta bixisey. Warqadda lacag-qabashada waa in uu aqoonsadaa Canshuur-bixiyaha taas oo ay ka mid tahay *LAC-ka Canshuur-bixiyaha (haddii uu leeyahay).

### Qodobka 60aad: Amar Canshuur-bixin

1) Marka Canshuur-bixiyuhu ay tahay in uu bixiyo canshuur mid ka badan oo laga rabo isla markaana uu bixiyo wax ka yar wadarta lacagta laga rabay, Wasaaradda ayaa go'aaminaysa qaddarka lacagta Canshuurta la bixiyey. Xulidda Canshuurta loo tixgelinayo in la bixiyey waxa gebi ahaanba ay ka go'daa Wasaaradda mana loo baahna in la sheego sababaha loo cuskadey xulistan. Xeerkan ayaa loo adeegsanayaa haddii qaddarrada lacagta Canshuurta la bixinayo ay ku fadhido hal sharci dakhli ama sharciyo dakhli oo mid ka badan.

2) Haseyeeshe, waxa laga yaabaa in ay Wasaaraddu ku khasbanaato nidaam la isugu xijiyo bixinta Canshuurta isaga oo soo saaraya wareegto rasmi ah ama baahinaya xeerar sida uu dhigayo Qodobka 61aad.

### Qodobka 61aad: Xisaabaha Canshuurta ee Elektaroonigga ah

1) Wasaaraddu waxa ay yagleeli kartaa ayna ka shaqeysiin kartaa hannaan elektaroonig ah oo la socon kara xisaabaha Canshuurta ee Canshuur-bixiyeyaasha. Hannaanka waxaa loo sameyn karaa loogana shaqeysiin karaa goonidiisa ama waxaa uu qayb ka noqon karaa hannaan dukumenti elektaroonig ah oo loo abuuro si waafaqsan Qodobka 37aad.

2) Sidaas daraaddeed, Wasaaraddu waxa ay u sameynaysaa xeerar loogu talogaley xisaabaha elektaroonigga ah ee canshuurta, kuwaas oo ay tahay in lagu faafiyo Faafinta rasmiga ah. Xeerarka waa in ay oggolaadaan -

a) in laga jaro xisaabtiisa (*debiting*) marka canshuurta bixinteeda la gaaro;

b) in canshuurta uu bixiyey lagu daro (*crediting)* xisaabtiisa;

c) in canshuurta uu bixiyey loo eego caashuurta ay ahayd in uu bixiyo; iyo

d) arrimo kale oo la nooc ah kuwa lagu sharxay Qodobka 37(2).

## Qaybta II: Ka-soo-qaadista Canshuur-bixiyaha Canshuur ku Baaqatey

### Qodob 62aad: Ku-dacweynta Canshuur Aan La Bixin

Canshuurtu waxaa ay isu rogeysaa deyn ka maqan Dowladda (Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya) maalinta canshuurta bixinteedu ay waajibto. Wasaaradda waxaa ay qof canshuur ku baaqatey ku dacweyn kartaa kagana soo qaadi kartaa maxkamad kasta oo awood u leh qaadista dacwaddaas, ayadoo la raacayo habraaca Hantida Qaranka loo difaaco.

**Qodobka 63aad: U-rahmashada iyo Xaddiga Ku-dalicidda Hantida Lagu Dalacayo Rahanta**

1) Marka uu canshuur-bixiye bixin waayo canshuur waqtigii uu bixin lahaa, Wasaaradda waxaa ay u rahman kartaa hantida uu leeyahay canshuur-bixiyaha. Hantida waxaa loo rahmayaa Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya. Waxaa la rahmi karaa hantida uu leeyahay canshuur-bixiyaha iyada oo aan loo eegin in hantidaasi ay gacan ugu jirto qof kale iyo in kale.

2) Wasaaradda waxaa ay rahmaysaa hanti iyada oo canshuur-bixiyaha siinaysa ogeysiis qoraal ah. Ogeysiiska waxaa lagu cayimaa-

a) magaca canshuur-bixiyaha iyo lambarkiisa *LAC (haddii uu leeyahay);

b) hantida la rahmey ilaa iyo xadka ay gaarsiin tahay rahmidda;

c) Canshuurta ama canshuuraha ay rahmidda la xiriirto; iyo

d) faahfaahinta awoodda ay Wasaaradda u leedahay gacan-ku-dhigista iyo iibinta hantida sida ay dhigayaan Qodobbada 64aad iyo 65aad, sida u soo kala horreeyaan.

3) Marka ay hantidu la xiriirta dhul ama dhismayaal, rahmiddu waxaa ay ka bilaabaneysaa marka Wasaaradda ay codsi lagu diiwaangelinayo rahmidda ay ku xareeyso Waaxda Dhulka. Waaxda Dhulka waa in ay rahmidda ku diiwaangelisaa warqadda lahaanshaha hantida dhulka ama dhismayaasha ah.

4) Marka hantidu aaney ahayn dhul ama dhismayaal, rahmiddu waxaa ay bilaabaneysaa marka ogeysiis rahmidda la gaarsiiyo canshuur-bixiyaha.

5) Hantida canshuur-bixiyaha waxaa la rahmayaa ilaa inta ay gaarsiisan tahay canshuurta uusan bixin, ganaaxa ku ururey ee la xiriira canshuurtaas sida uu dhigayo Qodobka 80aad iyo *kharashka ku baxa rahmidda iyo iibinta.

6) Wasaaradda marka ay doontoo ayey canshuur-bixiye u gudbin kartaa ogeysiis qoraal ah oo-

a) cayimaya *kharashka rahmidda iyo iibinta hantida la rahmey ee ay gashey Wasaaradda ka hor taariikhda aan ogeysiiska loo gudbin; iyo

b) ku waajibinaya canshuur-bixiyaha in uu kharashaadkaas siiyo Wasaaradda taariikhda lagu cayimey ogeysiiska.

**Qodobka 64aad: Gacan-ku-dhigidda Hantida La-rahmey**

1) Canshuur-bixiye waa in uusan la-tacaamulin ama ku doodin inuu la tacaamulayo hanti rahman marka Wasaaradda ay gacanta ku dhigto hantidaas. Wasaaradda waxaa ay gacanta ku dhigaysaa hanti iyada oo-

a) marka ay tahay hanti la taaban karo, marka hore u geynaysa ogeysiis waafaqsan faqradda 2aad ka dibna gacanta ku soo dhigaya hantida; iyo

b) marka ay tahay hanti aan la taaban karin oo rahan laga dhigey, iyada oo Canshuur-bixiyaha u geynaysa ogeysiis waafaqsan faqradda 2aad ka dibna ogeysiiskaa ka dhigaysa mid *dadweynuhu wada heli karaan.

2) Ogeysiis ay bixinayso Wasaaradda Maaliyadda ee gacanta ku dhigtay hanti rahman waa in ay cayintaa-

a) magaca canshuur-bixiyaha iyo lambarkiisa *LAC (haddii uu leeyahay);

b) hantida la rahmey, in Wasaaradda ay ku talojirto in ay iibiso hantidaa iyo habka iibinta iyo waqtiga iibinta ee la soo jeedinayo;

c) haddii ay tahay hanti la taaban karo oo rahman, qaabka iyo goobta ay Wasaaradda ay gacanta ugu dhigayso hantida; iyo

d) in Canshuur-bixiyuhu uusan la tacaamuli karin hantida rahman isaga oo aan oggolaansho qoraal ah ka helin Wasaaradda.

Ogeysiintu waxaa ay ku dhex jiri kartaa ama ay la socon kartaa ogeysiis abuuraya rahan sida uu dhigayo Qodobka 63(2).

3) Wasaaraddu waxa ay gacanta ku soo dhigi kartaa hantida la taaban karo ee lagu xusey ogeysiiska faqradda 2aad waxaana lagu maamulayaa xeerarkan soo socda:

a) Wasaaraddu waxa ay awoodda u adeegsan kartaa si toos ah iyo si dadban iyada oo loo marayo wakiil arrintaan loo igmadey kadib marka la war geliyo;

b) marka hantida ay gacanta ugu jirto qof aan ahayn canshuur-bixiyaha, Wasaaradda waa in ay *qofkaas gacanta ku haya hayntida ay siiso nuqul ogeysiis ah ka hor inta aysan la wareegin gacan-ku-haynta hantidaas;

c) marka ujeedadu tahay in lala wareegayso hantida, Wasaaraddu waxaa ay adeegsan kartaa awood macquul ah, waxa ay waqtiga ay doontoo geli kartaa dhismayaasha ama goobta lagu sharxay ogeysiiska waxaana ay weeydiisan kartaa in booliska gacan ka siiyo;

d) Waqtiga ay la wareegayso hantida, Wasaaraddu waa in ay canshuur-bixiyaha siisaa liiska hantida lala wareegay; iyo

e) haddii ay hantidu tahay mid guurto ah, Wasaaradda waxa ay hantida ku xareyn kartaa goob Wasaaradda ay u aragto in ay ku habboon tahay, iyada oo kharashka ku baxana uu bixinayo canshuur-bixiyaha.

Iyadoo laga duulayo ujeedoyinka kuxusan faqrad-hoosaadda b), marka *dadka hantida gacanta ku haya ay hal qof ka badan yihiin, in wargelinta la gaarsiiyo *mid ka mid ah

dadka hantida gacanta ku haya ayaa ku filan. Marka aan la heli karin *dadka hantida gacanta ku haya midkoodna, wargelintu waa in looga soo tagaa dhismayaasha ama goobta *la wareeggiddu ay ka dhacayso.

4) Marka laga reebo hantida loo iibiyey si waafaqsan Qodobka 65aad, Wasaaradda waa in ay gacan-ku-haynta hantida loo soo qabtey sida uu dhigayo Qodobkan ay gacan-ku-haynteeda u soo celiso-

a) islamarkiiba haddii hantida rahman loo sii daayo sida uu dhigayo Qodobka 66aad; ama

b) Si kastaba ha ahaatee, 60 maalmood gudahood marka uu gacanta ku dhigo.

Celinta hantida ay ka hadleyso faqrad-hoosaadda b) meesha kama saareyso rahmanaanta hantida, laakiin Wasaaradda mar labaad ma soo ceshan karto hantida mudo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo waqtiga ay celisy.

### Qodobka 65aad: Iibinta Hanti Rahman

1) Marka Wasaaraddu ay gacanta ku dhigto hanti rahman sida uu dhigayo Qodobka 64aad, Wasaaraddu waxa ay iibin kartaa hantidaas waxaana loo raacayaa xeerarkan soo socda:

a) Wasaaraddu waa in ay soo saartaa wargelin ku aaddan iibinta ka hor inta aysan iibin hantida rahman;

b) Wasaaraddu waxa ay sugaysaa muddooyinka soo socda ka hor inta aysan iibin hantida rahman:

i) haddii ay la xiriirto dhul ama dhismayaal, 30 maalmood ka dib marka la baahiyo wargelinta;

ii) haddii ay la xiriirto hanti doorsoomeysa oo guurta ah, hal maalin ka dib marka la baahiyo wargelinta; iyo

iii) haddii ay tahay hanti ka duwan kuwa lagu xusay faqradda (1) iyo (ii), 14 maalmood ka dib marka la baahiyo wargelinta;

c) Wasaaraddu waxa ay awoodeeda iibinta ku fulin kartaa si toos ah ama si dadban iyada oo adeegsanaysa wakiil la-ansaxiyey; iyo

d) looma baahna amar maxkamadeed.

e) Wasaaraddu waxa ay iibin kartaa hanti rahman iyada oo aan xannibaadahan jirin haddii Wasaaradda ay oggolaansho qoraal ah ka haysato canshuur-bixiyaha.

3) Marka Wasaaradda ay iibiso hanti rahman, lacagta lagu iibiyo waa in loo isticmaalaa bixinta-

a) marka ugu horeeysa, *kharashaadka ku baxay hantida rahman iyo iibinta hantida

b) marka labaad, qaddarka lacageed ee u waajibay qof kale oo rahan kale u haysta iyada oo la isugu xijinayo sida ay mudnaanta u kala leeyihiin;

c) marka saddexaad, canshuurta taagan iyo ganaaxyada ururey ee la xiriira canshuurtaas sida uu dhigayo Qodobka 80aad;

d) marka afaraad, canshuur kasta oo kale oo aan la bixin; iyo

e) baaqi kasta oo ka harey canshuur hore.

3) Wasaaraddu waxa ay bixineysa oo keliya qaddarka lacagta ah ee la xiriira kala mudnaan-siinta lagu sheegey faqradda 2(b) halkaas oo rahanka la dhigay ka-hor inta aan kharashka lagu dallicin rahanka sida uu dhigayo Qodobka 63aad -

a) haddii hantidu ay tahay hanti ma-guurto ah, rahanka waa in laga diiwaangeliyey Waaxda Dhulka ka hor ku soo-dalicidda kharashka rahanka sida uu dhigayo Qodobka 63aad; ama

b) haddii ay tahay hanti kale, Wasaaraddu waxa ay ogeysiisey rahanta ka hor intii aan la abuurin ku-soo-dalicidda rahanta Qodobka 63aad (oo ay ka mid tahay iyada oo loo marayo diiwaan guud) oo uuna ku qanacsan yahay in uu helayo deyn dhab ah.

4) Ka dib marka lacagtii ka soo xarootey iibka si waafaqsan faqradda 2aad, Wasaaraddu waa in ay Canshuur-bixiyaha siisaa qoraal faahfaahinaya qaabka lacagtii ka soo baxday iibka loo maamuley.

5) Haddii lacagta ka soo baxdey iibka aaney ku filnayn dhammaan aanay dabooli karin qaddarka lacagaha rahanka, Wasaaraddu waa in ay tallaabooyin cusub oo ay ku soo ururinayso lacagta dhiman si waafaqsan Qaybtan ama Qaybta III.

6) Qododkan ma hor-istaagayo ku dhaqmidda xuquuqaha Wasaaraddu ay u leedahay *rahmaad kale, haddii ay tahay hantidan ama mid kale.

**Qodobka 66aad: Fasaaxadda Hanti Rahaman**

1) Rahan loo sameeyey si waafaqsan Qodobka 63aad waa la fasaxayaa-

a) marka Wasaaraddu ay iibiso hantida si waafaqsan Qodobka 65aad;

b) Marka Canshuur-bixiyaha uu Wasaaraddu uu si buuxda u siiyo dhammaan lacagihii laga dhigey rahanka; ama

c) Marka ay Wasaaraddu u aragto in ay ku habboon tahay.

2) Toddoba maalmood gudahood marka la sii daayo rahanka ku xusan faqradda 1(b) ama (c), Wasaaraddu waa in ay Canshuur-bixiyaha u gaysaa qoraal ogeysiinaya sii deyntaa.

3) Toddoba maalmood gudahood marka la sii daayo rahan dhul ama dhismayaal ah, Wasaaraddu waa in ay fasaxidda kala shaqeysaa Waaxda Dhulka. Marka ay fasaxdo Wasaaraddu, Waaxda dhulku waa in ay rahmanaanta ka saartaa waraaqaha lahaanshaha dhulka ama dhismayaasha.

**Qodobka 67aad: Xanibidda Qof**

1) Marka qof uu ku guuleysan waayo in uu waqtigii loogu talogaley bixiyo Canshuur, Wasaaraddu waxa ay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha amraysaa iyadoo loo marayo habraaca sharciga ah in qofkaas laga hor-istaago in uu dalka ka baxo. Amarka Wasaaraddu waa in uu ahaadaa qoraal waana in uu ku socdaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha.

2) Marka la siiyo amarka ku xusan faqradda 1aad, Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha waa in ay qofkaa ka hor-istaagtaa in uu ka baxo dalka muddo toddoba maalmood oo ka bilaabanta taariikhda la soo gaarsiiyey. Haseyeeshee marka uu ku codsado Xeer-Ilaaliyaha Guud, Maxkamad awoodda u leh ayaa kordhin karta muddada.

3) Amarka ku xusan faqradda 1aad waxaa uu meesha ka baxayaa marka uu qofku bixiyo dhammaan Canshuuraha lagu leeyahay ama uu dhigo *rahan ay ku qanacdo Wasaaraddu.

**Qodobka 68aad: Xannibidda Hanti**

1) Marka ay Wasaaraddu u caddaato iyada oo sababo macquul ah haysata in aan la bixin Canshuur la xiriirta badeeco la iibiyey (badeeco la iibiyey waxaa ka mid ah soo-dejinta iyo dhoofinta).ama aan la bixin doonin, Wasaaraddu waxa ay-
   a. *xakameyn kartaa alaabada;
   b. *xakameyn kartaa oo ay baari kartaa dhismayaal, goob, *baabuur ama hanti kale oo Wasaaraddu ay rumaysan tahay in alaabada ay ku jiraan; iyo
   c. awood macquul ah u adeegsato ahdaafta faqrad-hoosaadyada a) iyo b).

2) Awoodaha lagu xusey faqradda 1aad waxaa lala adeegsan karaa awoodaha kale ee Wasaaraddu, oo ay ka mid yihiin kuwa ku xusan Qodobka 44aad (helidda macluumaadka) iyo 46aad (ogeysiis lagu dalbanayo macluumaad).

3) Islamarka la *xannibo hanti, dhismayaal, ama goob sida ay dhigeyso faqradda 1aad, Wasaaraddu waa in ay ogeysiis qoraal ah gaarsiisaa *cidda gacanta ku haysa hantida, dhismayaasha ama goobta. Haddii cidda gacanta ku haysa ay ka badan yihiin hal qof, waxa ku filan in ogeysiiska la gaarsiiyo *mid ka mid ah cidda gacanta ku haysa.

Marka aan la heli karin *cidda gacanta ku haysa midkoodna, ogeysiiska waa in looga soo tagaa dhismayaasha ama goobta *ay xannibiddu ka dhacayso. Ogeysiiskuna waa in uu-

a) aqoonsadaa uuna taxaa hantida, dhismayaasha ama goobta *la xannibayo;

b) sheegaa in hantida, dhismayaasha ama goobta *loo xannibey si waafaqsan Qodobkan iyo sababta *loo xannibey;

c) sheegaa shuruudaha lagu sii deynayo, oo ay ku jirto *rahanka loo baahan yahay; iyo

d) sheegaa shuruudaha lagu xaraashayo hanti kasta oo gacanta lagu dhigey.

4) Wasaaraddu waa ay sii wadi kartaa *xannibaadda hanti, dhismayaal ama goob si waafaqsan faqradda 1aad hadba middii yar labadaan muddo -

a) muddada lagama maarmaanka u ah in lagu sameeyo qiimeyn ka-hordhac ah ama mid wax-ka-beddel iyo in la adeegsado awoodaha ay bixinayaan Qodobbada 63, 64 iyo 65 (rahmashada, gacan-ku-dhigidda iyo iibinta hantida); ama

b) 14 maalmood.

5) Haddii muddada lagu xusay faqradda 4aad, qofna ku qancin waayo Wasaaradda in uu yahay milkiilaha alaabta, Wasaaraddu waxa ay alaabtaas ula dhaqmi kartaa in ay tahay hanti la rahmay. Wasaaraddu waxa ay intaa ka dib ay hantida u iibin kartaa si waafaqsan Qodobka 65aad.

## Qaybta III: Ka-soo-celinta Cid Saddexaad

### Qodobka 69aad: Maareeyeyaasha Hay'adaha (*Entities*)

1) Marka ay *hay'ad (*entity)* ay bixin weydo canshuur waqtigii loogu talogaley, Wasaaradda waxa ay *maareeyayaasha *hay'adda (*entity*) ay si wadajir ahaan iyo keli ahaanba ugu wajibin kartaa bixinta canshuurta. Wasaaraddu waa in ay ogeysiis qoraal ah oo la xiriira go'aanka gaarsiisaa *maareeyeyaasha. Haddii Wasaaraddu ay *maareeyeyaal mid ka badan ay u raacato canshuurta, dhammaan *maareeyeyaasha iyo *hay'adda (*entity*) ayaa si wadajir ah iyo keli ahaanba loogu raacanayaa canshuurta. Xeerkan wuu taaganyahay iyada oo aan loo eegin in *hay'adda ay kacday iyo in kale.

2) Faqradda 1aad looma adeegsan karo *maareeyaha haddii uu uu daryeel, dadaal iyo xirfad heer macquul ah uu ku bixiyo in ay *hay'addu bixiso canshuurta. Heer macquul ah waxaa loola jeedaa iyada oo laga cabbir qaadanayo sida qof madax-bannaan oo haya jago *maareeye oo u tallaabo-qaadaya si ilaa xad xigmad ku dhisan.

3) Faqradaha 1aad iyo 2aad waxaa sidoo kale lagu maamulayaa qof -

a) isu muujinaya in uu yahay *maareeyaha *hay'adda; ama

b) ahaa *maareeye waqti ka mid ah 6dii bilood ee ka horreeysay dhacdada ay ka dhalatey in *hay'adda canshuur lagu yeesho.

4) Xaddiga lacagta ay tahay in *maareeyeyaashu u bixiyaan si waafaqsan Qodobkan waa canshuur shakhsi ahaan loogu leeyahay *maareeyaha (eeg Qodobka 22(2)). Marka uu *maareeye bixiyo canshuur ka dhalatey faqradda 1aad, *maareeyaha waxaa lacagta uu bixiyey ka soo ceshan karaa *hay'adda iyada oo ah sida deyn uu ku leeyahay.

## Qodobka 70aad: Sii-maamuleyaal

1) Sii-maamule (Receiver) loo magacaabey hanti ku taalla Soomaaliya waa in uu dalbadaa kulan uu ku wargelinayo magacaabid una geeyaa Wasaaradda muddo 7 maalmood gudahood ah marka la magacaabo. Magacaabidda waxaa ka mid ah gacan-ku-dhigidda hantida taalla Soomaaliya sii-maamule ahaan. Wargelinta waa in ay ku qoran yihiin-

a) cinwaannada lagala xiriiri karo sii-maamulaha; iyo
b) faahfaahinta canshuur-bixiyaha hantida leh ee sii-maamulaha loo magacaabey in uu sii-maamulo, faahfaahintaas waxaa kamid ah lambarkiisa *LAC (haddii uu leeyahay).

2) 14 maalmood gudahood marka ay hesho wargelinta lagu sheegey faqradda 1aad, Wasaaraddu waa in ay wargelin siisaa sii-maamulaha. Wargelintaas waa in ay ahaataa qoraal waana in ay cayintaa qaddar lacageed oo ay Wasaaraddu u aragto in ay ku filan tahay canshuurta lagu leeyahay ama lagu lahaan doono canshuur-bixiyaha. Wasaaraddu waxa ay wargelin dheeraad ah u bixin kartaa si joogto ah.

3) Sii-maamulahu waa in uusan qaybin hantida uu u hayo si sii-maamule ahaan ah muddo 21 maalmood oo laga soo bilaabo marka loo magacaabay sida ay dhigeyso faqradda 1aad. Xeerkan ma qabanyo hadii sii-maamuluhu uu helo lacag ku filan qaybinta. Waqtigaas ka dib, sii-maamuluhu-

a) waa in uu iibiyaa in ku filan hantida uu u hayo si sii-maamule ahaan ah si meel loogu dhigo qaddarka lacageed ee lagu sheegey faqradda labaad ee wargelinta Wasaaradda ay ku sheegtey, (ka dib marka la bixiyo deyn kasta oo lahayd mudnaan); iyo

b) waxaa uu ku khasban yahay in uu Wasaaraadda siiyo qaddarka lacageed ee goonida loo dhigey (canshuurta lagu leeyahay canshuur-bixiyaha).

Xeerkan waxaa sidoo kale uu khuseeyaa wargelin kasta oo dheeri ah oo uu sii-maamulaha helo sida ay dhigeyso faqradda 2aad ilaa sii-maamuluhu uu ka dhammeeyo dhammaan hantida uu hayo ama canshuurta laga wada bixiyo.

4) Marka uu kharash ka bixiyo hantida uu hayo, sii-maamuluhu waa in uu mudnaan siiyaa bixinta canshuurta ku waajibtey alaabada iyo adeegyada iyo canshuurta taagan. Canshuurahaas waxa ay leeyihiin mudnaan ka badan deymaha kale ee Canshuur-bixiyaha (marka laga reebo deynta rahan ahaan loo dhigey). Bixinta alaabada ama adeegyada waxaa ka mid ah alaabada ama adeegyada la soo-dejiyey ama la dhoofiyey.

5) Ilaa xad inta uu sii-maamule ku fashilmayo in uu gooni u dhigo qaddarka lacageed ee ay waajibineyso faqradda 3aad, sii-maamulaha waxa waajib ku ah in uu bixiyo oo Wasaaradda siiyo lacagta ay ahayd in gooni loo dhigo (taas oo ah Canshuurta ku waajibtay Canshuur-bixiyaha).
To the extent that a receiver fails to set aside an amount as required by paragraph 3, the receiver is liable to pay to the Authority the amount that should have been set aside (on account of the taxpayer's tax liability).

6) Qaddarrada lacageed ee ay tahay in Wasaaraddu ay ka hesho sii-maamulaha sida ay dhigayaan faqradaha 3 iyo 5 waa Canshuur shaqsi ahaaneed oo lagu leeyahay sii-maamulaha (eeg Qodobka 22(2)). Amounts payable to the Authority by a receiver under paragraphs 3 and 5 are a personal tax liability of the receiver (see Article 20(2)).

7) Qodobkan dhexdiisa:

"Sii-maamule" waxaa loola jeedaa qof, hanti ku taalla Soomaaliya gudaheeda ka ah-

a. xaraashe, maamule ama amaano-haye u ah qof musalifey;
b. sii-maamule Maxkamad dibadeed magacowday ama ay maxkamaddu u magacowdey hanti ama *hay'ad (*entity*);
c. deyn-bixiye la wareegey hantidii deynta lagu iibsadey (*a mortgagee in possession*);
d. fuliyaha dardaaranka, maamulaha ama dhaxlaha/warasada hantida qof dhintey;
e. qof maareynaya arrimaha shakhsi aan wax qabsan karin; ama
f. qof la wareegey/dhaxley sharikad dib-u-habeyn lagu sameeyey.

"Canshuur-bixiye" waxaa loola jeedaa qof hantidiisu ay gacanta u gashey sii-maamule.

## Qodobka 71aad: Cid Saddexaad oo Qaameysan

1) Marka uu canshuur-bixiye uu canshuur ku bixin waayo waqtigii loogu talogaley, Wasaaraddu waxa ay wargelin qoraal ah u geyneysaa cida saddexaad oo u qaameysan canshuur-bixiyaha. Sida ugu dhaqsida badan ka dib marka ay gaarsiiso wargelinta, Wasaaraddu waa in ay canshuur-bixiyaha gaarsiisaa nuqulka wargelinta.

2) Ka dib marka uu helo wargelinta lagu xusey faqradda 1aad, cidda saddexaad ee u qaameysan waa in ay qaddarka lacagta ay siisaa Wasaaradda (midaas oo ah canshuurta lagu leeyahay cidda saddexaad). Qaddarka lacagta waa in la bixiyaa taariikhda lagu cayimey wargelinta. Qaddarka lacagta waa hadba midda ugu yar kuwan -

a) dhammaan canshuurta lagu leeyahay canshuur-bixiyaha;

b) lacagta ay cidda saddexaad ee qaameysan uu ku leeyahay canshuur-bixiyaha; ama

c) qaddarka lacagta lagu cayimey wargelinta.

3) Taariikhda lacag-bixinta ee lagu cayimey wargelinta waa in aaney ka horreyn midda dambeysa taariikhahan so socdo-

a) marka la gaaro taariikhda la bixin lahaa lacagta cidda saddexaad ee qaameysan oo la siin lahaa canshuur-bixiyaha ama cida mas'uul ka ah canshuur-bixiyaha ay ka reebi laheyd qadar canshuur ah oo lagu soo dalacay; ama

b) taariikhda cidda saddexaad ee qaameysan la soo gaarsiiyo wargelinta.

4) Ka dib marka uu helo wargelinta lagu xusey faqradda 1aad, cidda saddexaad ee qaameysan waa in aaney wax lacag ah siinin canshuur-bixiyaha ilaa wargelintu ay waqtigeedu dhacayso (eeg Qodobka 72(2)) ama Wasaaradda ay ka noqonayso wargelinta.

5) Qaddarka lacagta ee Wasaaraddu ay ka sugeyso cid sadddexaad oo qaameysan oo lagu sheegey faqradda 2aad waa canshuur shakhsi ahaan oo lagu leeyahay cid saddexaad oo qaameysan (eeg Qodobka 22(2)).

6) Lacagahan soo socda ayaa loo tixgelinayaa in lagu leeyahay canshuur-bixiye:

a) lacag uu hadda lagu leeyahay ama lagu yeelan doono canshuur-bixiyaha;

b) lacag ku jirta ama noqon doonta kuwo loo hayo ama geli doona xisaab uu leeyahay canshuur-bixiyaha;

c) lacag ku jirta ama noqon doonta mid gasha xisaab ay cid saddexaad u hayso in la siiyo canshuur-bixiyaha; iyo

d) lacag uu hayo qof wakiil u ah cida saddexaad si uu lacagta siiyo canshuur-bixiyaha.

7) Markii loo fiiriyo qodobkan:

"Lacag" waxaa ka mid ah deyn ahayd lacag ama lacag ahaan loo bixin karo.

"Cid saddexaad oo qaameysan" marka ay la xiriirto canshuur-bixiye, waxaa loola jeedaa qof uu lacag ku leeyahay canshuur-bixiye islamarkaana wakiil uga ahaa arimaha canshuuraha.

**Qodobka 72aad : U-hoggaansamidda Wargelinta**

1) Marka cid saddexaad ay bixiso lacagtii Wasaaraadda iyada oo la raacayo Qodobka 70aad (sii-maamulayaasha) ama 71aad (cid saddexaad oo qaameysan)-

a) cidda saddexaad waxaa loola dhaqmayaa in ay ku socoto oggolaansho ay bixiyeen canshuur-bixiyaha iyo dhammaan shakhsiyaadka kale ee ay khuseyso;

b) qaan kasta oo dad ku leedahay cidda saddexaad oo ay ka hooseysa lacag-bixin waa laga goynayaa qaddarta lacagta ah ee la bixiyey; iyo

c) cidda saddexaad waxaa magdhow laga siinyaa lacagta uga baxdey dacwooyinka madani ah ama ciqaabeed iyo dhammaan habraacyo garsoor iyo kuwo ka baxsan garsoor.

d) Qodobadan ayaa la raacayaa iyada oo aan loo eegin qodob kasta oo ka soo horjeedda oo ah sharci qoran, qandaraas ama heshiis.

2) Wargelin loo bixiyey si waafaqsan Qodobka 70aad ama 71aad waxaa ay shaqeynteedu ku egtahay marka canshuurta ama waajibaadyada lagu xusey dhexdeeda la bixiyo ama lagu qanco.

3) Marka cid saddexaad oo la gaarsiiyey wargelin waafaqsan Qodobka 70aad ama 71aad ay ugu hoggaansami weydo wargelinta in aaney haysan lacag ama hanti kale oo uu leeyahay ama uu dad ku leeyahay ama loo hayo canshuur-bixiyaha, waa in uu qofka soo wargeliyaa Wasaaradda. Wargelintu waa in ay ahaataa qoraal waana in-

a) lagu sharaxaa sababaha keeney in la bixin karin; iyo

c) loo soo gaarsiiyo Wasaaradda sida ugu dhaqsayaha badan ee macquulka ah ka dib marka cidda saddexaad ay ogaato in aaney bixin karin lacagaha, mar kasta, ka hor inta aan la gaarin waqtiga in lacagtaasi la bixiyo lagu cayimey wargelinta waafaqsan Qodobka 70aad ama 71aad.

4) Marka ay hesho wargelin waafaqsan faqradda 3aad, Wasaaradda waa in ay wargelin kale ay qoraal ku gaarsiisaa cidda saddexaad iyada oo ama-

a) aqbalaysa wargelinta waafaqsan faqradda 3aad ama lalaya ama wax ka beddelaya wargelinta waafaqsan Qodobka 70aad ama 71aad; ama

b) diidaya wargelintaas si waafaqsan faqradda 3aad.

5) Xareynta wargelin waafaqsan faqradda 3aad wax saameyn ah kuma laha sida shakhsi ahaan cidda saddexaad loogu leeyahay lacagaha loo bixinayo si waafqsan Qodobka 70aad ama 71aad (eeg Qodobka 22(2)). Ku lahaanshaha shakhsi ahaaneed waxaa ay baaba'aysaa ama beddelmeysaa haddii Wasaaradda ay laasho ama baabi'iso wargelinta si waafaqsan Qodobka 70aad iyo 71aad.

6) Qodobkan dhexdiisa, "cid saddexaad" waxaa loola jeedaa sii-maamule loo geeyey wargelin si waafaqsan Qodobka 70aad ama cid saddexaad oo qaameysan oo loogu geeyey wargelin si waafaqsan Qodobka 71aad.

### Qodobka 73aad: Wakiillada Dadka aan Degganeyn Dalka

1) Xaaladahan soo socda dhexdooda, Wasaaradda \ waxa ay qof gacanta ku haya hanti uu leeyahay qof aan degganeyn dalka fari kartaa in uu bixiyo canshuur isaga oo ka wakiil ah qofka aan dalka degganeyn. Qofkan waxaa loogu yeeraa "wakiilka" qof aan dalka degganeyn. Amarka Wasaaradda waa in isaga oo wargelin qoraal ah loogu geeyaa wakiilka. Xaaladaha laga hadlayo waa kuwan-

a) marka uu qofka aan dalka deggenyn canshuurta ku bixin waayo waqtigii la rabey; ama

b) marka Wasaaradda ay sababo macquul ah dartood aaminsan tahay in qofka aan dalka degganeyn canshuurta bixin doonin waqtigii la rabey.

2) Wakiilka hela wargelin waafaqsan faqradda 1aad waxaa ku waajib ah in uu bixiyo canshuur (isaga oo ka bixinaya canshuurta ku waajibtey qofka aan dalka degganeyn) taasoo kusaleeysan qiimaha ugu hooseeya ee suuqa ay ka joogto hantida iyo qaddarta canshuurta aan weli la bixin ee lagu leeyahay qofka aan dalka degganeyn.

3) Marka loo eego aodobkan -

a) qof aan dalka degganeyn oo kireysta diyaarad ama markab iyada oo kireysashada ka badan tahay 3 sano waxaa loo qaadanayaa in uu leeyahay diyaaradda ama marka muddadaas dhexdeeda;

b) kabtanka diyaaradda ama markabka waxaa loo qaadanayaa in uu gacanta ku hayo diyaaradda ama markabka; iyo

c) *amaano haye (*trustee*) waxaa loola dhaqmayaa sidii in uu yahay qofka gacanta ku haya dhammaan *hantida amaanada ah waxaana hantidaas loola dhaqmayaa in ay wada leeyihiin ka-faa'iideystayaasha *amaanada.

4) Wasaaraddu waxa ay ku waajibin kartaa shuraako deegaan ah ama qofka deegaanka ah ee ka tirsan shuraakada in uu bixiyo canshuurta lagu leeyahay ama lagu lahaan doono qofka shuraakada ka mid ah ee aan degaanka ahayn. Waajibintaasi waa in ay ahaataa wargelintaas qoraal ah oo loo geeyo shuraakada deegaanka ah ama qofka shuraakada ka mid ah ee deegaanka ah.

5) Shuraako deegaan ah iyo cid kasta oo ka mid ah dadka deegaanka ee ka mid ah shuraakada oo hela wargelin waafaqsan faqradda 4aad waxaa wadajir ahaan iyo keli ahaanba loogu leeyahay iyaga iyo qofka shuraakada ka tirsan ee aan degaanka ahayn in ay bixiyaan canshuurta qofka shuraakada ka tirsan ee aan degaanka ahayn. Lacagta ay bixinayaan waa in aaney ka badan qaddarka saamiga qofka shuraakada ka mid ah ee aan degaanka ahayn uu ka leeyahay hantida saafiga ah ee shuraakada.

6) Qaddarada lacagta uu wakiilka, shuraakada deegaanka ama qofka shuraakada ka mid ah ee deegaanka ay tahay in ay siiyaan Wasaaradda sida ay dhigayaan faqradda 2aad ama 5aad waa canshuurta shakhsiga ah ee lagu leeyahay wakiilka, shuraakada degaanka ama qofka deegaanka ah ee shuraakada ka mid ah (eeg Qodobka 22(2)).

7) Marka uu qof lacag siiyo Wasaaradda iyada oo laga ambaqaadayo wargelinta lagu sheegey faqradda 2aad ama 5aad-

a) qofka waxaa uu lacagtiisa ka soo ceshan karaa qofka aan deegaanka ahayn;

b) marka laga eego faqrad-hoosaadda a), qofku waxaa uu ka reeban karaa hantida (oo ay ka mid tahay lacagta) uu leeyahay qofka aan degaanka ahayn uu gacanta ku hayo ama soo gasho gacanta qofka qaddar aan ka badneyn lacagta uu bixiyey; iyo

c) cidna qofka uma raacan karto waxa uu hantida ka reebtay, ciddaasi ha ahaato qofka aan degaanka ahayn ama qof kale.

d) Waxaa ka reeban nidaamka ku xusan qodobkan shirkadaha saamilayda ah ee masuuliyadda xaddidan, oo canshuuraha lagu yeesho uga jawaabayo Hantidooda oo kaliya.

## MADAXA IX: CANSHUUR-DHIMID IYO CANSHUUR-CELIS

### Qodobka 74aad: Xadadka Canshuur yareynta

1) Marka ay qiimeynayaan, qaadayaan ama dib-u-soo-celinayaan Canshuur, Wasaaradda iyo Waaxda canshuuraha waa in aanay tixgelin *canshuur-dhimis kasta oo aan waafaqsaneyn waxyaabaha uu waajibinayo Qodobkan.

2) *Canshuur-dhimis kasta oo la isku dayo waa wax-kama-jiraan haddii uusan oggolaan ama ku salaysnayn sharcigan ama Shuruucda kale ee canshuuraha dalka ka jira ee uu ansaxiyey Baarlamaanka Federaalka.

3) Awood *Canshuur-dhimis kasta oo uu adeegsadey cid (Wasiir ama hay'ad dowladeed) oo noocyadan soo socda ah ma shaqeyneyso haddii aan loo marin habraaca faqradda 4aad. Noocyada awoodaha la adeegsan karo waa-

a) sameynta xeer-nidaamiyeyaal (sida loogu qeexay faqradda 7aad); iyo

b) adeegsiga hab kasta oo kale oo sharci dhigayo (haddii habkaas la sameeyey ka hor ama ka dib markii uu Qodobkan dhaqan galey) oo Canshuur-dhimis aan toos ahayn u sameyn karaan oo ku cad shuruuc jirta.

Faqraddan kama hadleyso awood Wasiir ama Hay'ad si cad loogu siiyey sharci dakhli haddii uusan sharcigaa dakhliga waajibineynin in loo hoggaansamo faqraddan.

4) Habraaca lagu sheegey faqradda 3aad waa sidan:

a) wasiirku waa in uu soo saaro amar waafaqsan faqradda 6aad;

b) awoodda *Canshuur-dhimista ee la adeegsanayo waa in ay waafaqsan tahay shuruudaha iyo arrimaha lagu cayimey amarka; iyo

c) in Wasiirku si gaar ah u xaqiijiyo waafaqsanaantaas isaga oo amar kale ku soo saarayo Faafinta Rasmiga ah.

5) Khubarada Waaxda Canshuuraha waa in ay, muddo kadib ba, Wasiirka u soo jeediyaan-

a) shuruudo ama arrimo lagu ogolaanayo *Canshuur-dhimis iyada oo la adeegsanayo awoodda lagu xusey faqradda 3aad; iyo

b) habraacyo ay tahay in la raaco marka la bixinayo *Canshuur-dhimista noocaas ah.

6) Wasiirku waxaa uu isaga oo amar ku soo saaraya Faafinta Rasmiga ah xaqiijin karaa shuruudaha, arrimaha iyo habraacyada lagu soo jeediyey faqradda 5aad, laakiin wax-ka-beddel kuma sameyn karo. Haddii Khubarada Waaxda Canshuuraha ay beddesho talo-soo-jeedinteeda ku xusan faqradda 5aad, Wasiirku waxaa uu beddeli karaa amarkii la faafiyey isaga oo faafinaya talo-soo-jeedinta lagu beddeley.

7) Qodobkan:

"Canshuur-dhimid" waxaa uu macnaheedu yahay ka-dhaafid, ka-khafiifin, ka-dib-dhimis ama ka-cafin Canshuur oo ah nooc Canshuur-dhaaf ah ama Canshuur kharash u reebasho.

"Xeer-nidaamiye" waxaa ka mid ah xeer-nidaamiye, amar, jihayn, oggolaansho, go'aan, aqbalaad, heshiis, tanaasul ama tasaruf ama *Ficil kale haddii la sameeyey isaga oo ah ama aan ahayn sharci ka hoos-baxay mid kale ama haddii uu wax-ka-beddel ka sameynayo ama sheeganayo ama uusan sheeganeynin in uu wax-ka-beddel ku sameynayo axkaam sharci ah (oo uu ka mid yahay jadwal la socda sharci).

**Qodobka 75aad: Ka-warbixinta Canshuur-Dhimista**

1) Wasaaraddu waa in ay soo gudbisaa warbixinno saddex-biloodle ah oo ku saabsan wadarta xaddiga *Canshuur-dhimista ay sameysey ama ay ku doodeen Canshuur-bixiyeyaasha. Warbixin kasta waa in ay *Canshuur-dhimista ku kala saaftaa tilmaamahan -

a) Canshuur-dhimista la sameeyey iyada oo loo hoggaansamayo Qodobka 72aad, iyada oo lagu kala sii saafayo tilmaamahan-

i) qodob kasta oo sharci ah oo Canshuur-dhimista loo cuskadey; iyo

ii) marka ay joogto xeer-nidaamiyeyaal, mid kasta oo ka mid ah shuruudaha ama arrimaha lagu cayimey amarka lagu xusey Qodobka 74(6);

b) Canshuur-dhimista la bixiyey laakiin aan waafaqsaneyn Qodobka 74aad, oo ay la socdaan sababaha loo cuskadey Canshuur-dhimista; iyo

c) Canshuur-dhimista la soo codsadey laakiin aan la oggolaan, oo ay la socdaan sababaha codsiyada loo diidey.

2) Sanad-maaliyadeed kasta oo Dalku leeyahay, Waaaxda Canshuuraha waa in ay diyaariyaan warbixin-

a) soo koobeysa warbixinnadii laga heley Wasaaradda intii lagu jirey sanadka ku xusan faqradda 1aad; iyo

b) bixineysa talooyin loo arkey in ay habboon yihiin oo la xiriira baaxadda iyo maamulidda *Canshuur-dhimista.

3) Warbixinta loo diyaariyey si waafaqsan faqradda 2aad-

a) waa in Wasiirka loogu gudbiyaa 3 bilood gudahooda ka dib dhammaadka sanad-maaliyadeedka ay la xiriirto; iyo

b) waana in lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ah (iyada oo ah qaabkii loogu direy Wasiirka) 6 bilood gudahood ka dib dhammaadka sanad-maaliyadeedka ay la xiriirto.

## Qodobka 76aad: Canshuur-ka-cafin

1) Wasiirka waxaa uu leeyahay awood xaddidan oo ay ku cafin karo Canshuurta ee lagu oggolaadey Qodobkan. Adeegsiga awoodaha ku jira Qodobkan waa in ay waafaqsanaataa Qodobka 74aad. Mana jiro qof kale oo awood u leh Canshuur-ka-cafin.

2) Wasiirka waxaa uu cafin karaa Canshuur ay bixinteedu taagneyd in ka badan 3 sano isaga oo u cuskanaya sababo la xiriira in aaney jirin rajo macquul ah oo laga leeyahay in Canshuurta la bixin doono.

3) Qof muteystey ganaax ayaa Wasaaradda ka codsan kara in laga cafiyo ganaaxa. Codsigu waa in uu ahaadaa qoraal. Marka ay hesho codsiga, Wasaaraddu waxa ay go'aansan kartaa in ay-

a) ka gaabsato in ay qiimeeyso ganaaxa;

b) kordhiso waqtiga lagu bixinayo ganaaxa;

c) ka cafiso ama ka dhaafto ganaax la qiimeeyey; ama

d) diiddo codsiga.

Go'aanka Wasaaraddu wuxu noqon karaa mid ku xirin ganaaxa gebi ahaan ama qayb ahaan. Go'aanka iyo shuruudaha la xiriira waa in ay waafaqsanaadaan sifooyinka), arrimaha iyo habraacyada lagu faafiyey Qodobka 74(6). Go'aan ayaa laga gaari karaa si waafaqsan faqrad-hoosaadda (c) iyada oo aan loo eegin in ganaaxa la bixiyey ama hawlo dacwad dembiyeeed la bilaabey ama la soo gabagabeeyey.

4) Qodobkan, "ganaax" waxaa soo hoosgelaya hanti ay la wareegi karto ama ay gacanta ku soo dhigtey Wasaaraddu iyada oo u cuskanaysa in hantidaasi ay tahay mid lala wareegi karo Canshuur baaqatay darteed.

## Qodobka 77aad: Codsi Soo-celin Canshuur La Bixiyey

1) Wixii loo gaaro taariikhda lagu cayimey faqradda 2aad, qofku wuxuu Wasaaradda ka codsan karaa in ay u soo celiso Canshuur uu bixiyey oo ka badan Canshuurtii lagu lahaa. Qofna ma codsan karo in Canshuur loo soo celiyo ilaa qofku ka soo baxo dhammaan wixii ay ku waajibiyeeen shuruucda Canshuurta, oo ay ka mid tahay *Canshuur-celinta. Codsigu waa in uu ahaadaa qoraal sharxaya sida Canshuurta dheeriga ah lagu xisaabiyey kuna lifaaqan tahay caddeynta ku habboon ee muujineysa xisaabinta.

2) Codsi Canshuur-soo-celin waa in lagu sameeyaa 4 sano gudahood ama tan u dambeysan arrimaha soo socda -

a) dhacdada keentey in la bixiyo Canshuur dheeri ah;

b) taariikhda *Canshuur-celinta uu xareeyey qofka ee la xiriirta bixinta lacagta; iyo

c) taariikhda lacagta la bixiyey.

3) Qofku waa in uusan habraaca codsiga ee ku xusan Qodobkan u adeegsan in uu kaga soo horjeesto *go'aan Canshuureed (oo ay ka mid tahay qiimeynta) sabatey in Canshuur qofka lagu yeesho. Keliya habraaca ka-hor-imaanshaha ee Madaxa VI ayaa loo adeegsan karaa ujeeddadaas.

## Qodobka 78aad: Go'aanka Laga Gaaro Codsiga

1) Wasaaraddu waa in ay tixgelisaa oo go'aan ka gaartaa codsi Canshuur-celin si waafaqsan Qodobka 77aad 30 maalmood gudahood marka uu soo gaaro codsiga. Go'aanka waa in uu noqdaa sida ay Wasaaraddu u aragto in uu ku habboon yahay, iyada oo ay ku xiran tahay shuruudaha . Go'aanka waxaa ka mid noqon kara:

a) marka Wasaaraddu ay u aragto in codsadaha uusan bixin Canshuur dheeri ah, in ay diido codsiga;

b) marka Wasaaraddu aysan ku qancin in codsaduhu bixiyey Canshuur dheeri ah-

i) in ay ka codsato macluumaadka dheeriga ah ee ay ugu baahan tahay in ay go'aan kama-dambeys ah ka qaadato codsiga; ama

ii) in ay u jeediso Canshuur-celin ku xiran in codsaduhu uu bixiyo *rahanka ay Wasaaraddu u aragto in uu ku habboon yahay; ama

c) marka ay Wasaaraddu ku qanacdo in codsaduhu bixiyey Canshuur-dheeri ah, in ay u celiso xaddiga ay ku qanacdo Wasaaraddu.

Wasaaraddu waa in ay wargelin qoraal ah oo ku saabsan go'aanka Canshuur-celinta ku gaarsiisaa codsadaha muddo 30 maalmood gudahood ah marka ay hesho codsiga Canshuur u-soo-celinta. Marka uu go'aanku yahay diidmo in Canshuur loo celiyo, Wasaaraddu waa in ay bixisaa sababaha diidmada.

2) Ka dib marka uu codsade bixiyo macluumaad ama diido soo-jeedinta ku xusan faqradda 1(b), Wasaaraddu waa in ay mar kale tixgelisaa codsiga Canshuur u-soo-celinta. Wasaaraddu waa in ay codsadaha siisaa wargelin ku aaddan go'aanka Wasaaraddu ay ka qaadatey muddo -

a) 30 maalmood gudaheeda oo ka bilaabata markii ay heshey codsiga Canshuur-celinta ee asalka ahaa; iyo sidoo kale

b) waqtiga u dhexeeya gaarsiinta Wasaaradda ee codsiga ama soo-jeedinta iyo macluumaad uu codsaduhu bixiyo ama uu diido soo-jeedinta, hadba waxa ay arrintu ku habboon tahay.

**Qodobka 79aad: Bixinta Canshuur-celinta**

1) Haddii Wasaaraddu ay go'aamiso in qofku uu bixiyo Canshuur dheeri ah, Wasaaraddu waa in ay-

a) lacagta dheeriga ah u adeegsataa in ay ka jarto Canshuurta ku waajibtey ee uusan qofku weli bixin; iyo

b) lacagta soo hartey ugu celiso 30 maalmood gudahooda marka go'aan ka gaarto.

Go'aanka Wasaaraddu wuxu uu ku saleysnaan karaa codsi Canshuur u-soo-celin, amar maxkamadeed ama caddeynta kale ee ay Wasaaraddu ku qancayso in loo baahan yahay in qof lacag loo celiyo.

2) Haddii Wasaaraddu ay oggolaato keliya qayb ka mid ah codsiga lacag u-soo-celinta ee qofka, Wasaaraddu waa in ay u celisaa qaddarka ay aqbashey. Go'aankan ayaa la raacayaa iyada oo aan loo eegin diidmo kasta oo uu soo gudbiyo qofku.

3) Marka uu qofku bixiyo ganaax ka dhashey in uu bixin waayey Canshuur, laakiin marka dambe la go'aansado in Canshuurta aan loo baahneyn in la bixiyo, waa in qofka loo celiyaa ganaaxii uu bixiyey. Go'aanka waxaa sababi kara *go'aan diidmo ah, ama amar maxkamdeed ama sababo kale.

4) Haddii Wasaaraddu ay qof u celiso Canshuur iyada oo aaney jirin wax Canshuur-celin ah oo loo baahnaa, Wasaaraddu lacagta dheeriga ah ee loo celiyey qofkaa waxa ay ku soo ceshan kartaa Canshuur ahaan. Wasaaraddu waa in ay Canshuur-bixiyaha siisaa wargelin qoraal ah oo ku aaddan go'aanka lacagta lagu soo celinayo.

## MADAXA X: GANAAXYADA IYO DEMBIYADA MADANIGA

### Qaybta I: Ganaaxyada Madaniga ah

#### Qodobka 80aad: Ganaaxa Madaniga ah ee Bixin La'aanta Canshuurta

1) Qofka bixin waaya Canshuur maalinta ay ahayd in la bixiyo Canshuurta ama ka hor waxaa uu mudanayaa ganaax lagu soo rogayo bil kasta ama qayb ka mid ah bishaas ee aan Canshuurta la bixin.

2) Ganaaxa lagu xusey faqradda 1aad ee hal bil waa 5 qaddar-lacageed (currency unit) ay khuseyso.. Xeerkan:

a) Canshuurta waxaa la bixinayaa:

i) marka ay tahay qiimeyn wax-ka-beddel lagu sameeyey, taariikhda ay ahayd in la bixiyo ee *qiimeyntii asalka ahayd;

ii) marka ay tahay *masuul ay ku waajibtey bixinta Canshuurta *hay'ad sida uu dhigayo qodobka 69aad, taariikhda ay ahayd in *hay'addu ay Canshuurta bixiso; iyo

iii) haddii kale, taariikhda lagu cayimey Qodobka 57aad (waqtiga la bixinayo Canshuurta); iyo

c) muddo kordhin kasta oo la sameeyo si waafaqsan Qodobka 40aad (Canshuur-celinta) ama 58aad (bixinta Canshuurta) ama hakinta sida uu dhigayo Qodobka 53(3) ama 56aad (go'aamada Canshuurta) ayaa la iska dhaafaya.

#### Qodobka 81aad: Ganaaxa Madaniga ah ee Hoos-u-dhig Canshuurta Dakhliga ee ay tahay in la Bixiyo

1) Qofka yareeya qiimaha Canshuurta loo bixinayo qayb-qayb ee hoos imaneysa Sharciga canshuurta Dakhliga wuxu mutaysanayaa ganaax. Qofka yareeyey qiimaha Canshuurta ay tahay in la bixiyo,iyada oo la adeegsanayo qofkaas qiyaastiisa ee xisaabinta lacagta kalkiiba la bixinayo ay ka yar tahay 80% qaddarka lacagta ee saxda ah,, ganaax gaar ah ayaa lagu soo rogayaa bil kasta ama qayb kasta oo ka mid ah bil laga bilaabo taariikhda ay ahayd in qaybta canshuurta ka mid ah la bixiyo qiimeyntaa sanadka ilaa laga gaaro maalinta ay tahay in la xareeyo *canshuur-celinta sanadkaas.

2) Ganaaxa ay tilmaameyso faqradda 1aad ee bishii waa 5 qaddar-lacageedka (currency unit) ay khuseyso. Qaddarka lacagta ah waxaa lagu kordhinayaa [1%] ilaa iyo inta qaddarka lacagta ku xigta ee faqrad-hoosaadka a) ay ka badan tahay qaddarka lacagta faqrad-hoosaadda b). Qaddarka lacagtu waa-

a) 80% wadarta qaddarka lacagta loo bixin lahaa qayb-qayb sanadka qiimeynta la sameeyey dhexdiisa ilaa laga gaaro bilowga bisha haddii qiyaasta qofka ay la mid tahay qaddarka lacagta ee saxda ah; iyo

b) qaddarka lacagta canshuurta dakhliga ee loo bixiyey qayb-qayb intii lagu jirey sanadka qiimeynta lagu sameeyey ilaa bilowga bisha.

3) Qodobkan dhexdiisa:

"Qaddarka lacagta ee saxda ah" waxaa loola jeedaa Canshuurta dakhliga ee qof ku waajibtey marka loo eego dakhliga qofka ee Canshuurta laga qaadayo sanadka qiimeynta la sameeyey si waafaqsan Sharci Canshuurta Dakhliga.

"Qiyaas" waxaa ka mid ah qiyaasta dib loogu noqdey.

## Qodobka 82aad: Ganaaxa Madaniga ah ee ka dhaleneysa Ilaalin La'aanta Dukumentiyada

1) Qofka aan ilaalin dukumentiyada uu waajibinayo sharciga dakhliga waxaa soo wajahaya ciqaabo/ganaax. Soo-saarid la'aanta dukumenti waafaqsan sharciga dakhliga, oo uu ka mid yahay qaan-sheeg, waxaa uu noqonayaa ilaalin la'aan dukumenti. Ciqaab/ganaax gaar ah ayaa lagu soo rogayaa bil kasta ama qayb kasta oo ka mid ah muddada soo-saarid-la'aantu ay jirto.

2) Ganaaxa ay tilmaameyso faqradda 1aad ee bishii waa 5 qaddar-lacageedka (currency unit) ay khuseyso. Qaddarkaa lacagta ah waa la sii kordhinayaa marka ilaalin la'aantu aaney lahayn qiil macquul ah. Marka ay sidaa jirto ciqaabta/ganaaxa waxaa la kordhinayaa 75% canshuurta loo nisbeynayo bishaas.

3) Wasaaradda waa in ay Canshuurta loo nisbeynayo bishaas u go'aamisaa si caddaalad ah oo macquul ah, taas oo ay ka mid tahay in ay canshuurta la qiimeeyey u kala qoondeeyso muddo ballaaran ama iyada oo tixraacaysa dhacdada waajibisay canshuuro muddadaas gudaheed.

## Qodobka 83aad: Ciqaabta/ganaaxa Madaniga ah ee Xareynta-la'aanta Canshuur-Celinta

1) Qofka aan xareyn *canshuur-celinta uu ku waajibinayo sharciga dakhliga waxaa uu muteysanayaa ciqaab/ganaax. Ciqaab/ganaax gaar ah ayaa lagu soo rogayaa bil kasta ama qayb kasta oo ka mid ah bil muddada uusan xareyn canshuur-celinta.

2) Ciqaabta/ganaaxa ay sheegeyso faqradda 1aad ee bil kasta waa 5 qaddar-lacageedka (currency unit) ay khuseyso. Qaddarka lacagta waxaa lagu kordhinayaa 2% qaddarka canshuurta lagu qiimeyn karo *canshuur-celinta oo laga reebo canshuurta uu bilowga bisha u bixiyey iyada oo ah qayb ka mid ah canshuurtaas.

3) Ciqaab/ganaax kala gaar ah ayaa lagu soo kala rogayaa xareyn la'aanta *canshuur-celin qiyaas ah ama qaddar lacageed oo ku-meelgaar ah iyo xareyn la'aanta *canshuur-celin ay ku jirto qaddarka lacagta kama-dambeysta ah.

**Qodobka 84aad: Ciqaabta/ganaaxa Madiniga ah ee Bayaan Been ama Marin-habaabin ah oo loo gudbiyo Sarkaal Dakhli**

1) Qofku waxaa uu muteysanayaa ciqaab/ganaax haddii qofka -

a) uu sarkaal dakhli siiyo bayaan ilaa xad been ah ama marin-habaabinaya sarkaalka inuu sameeyo qiimayn sax ah ; ama

b) bayaan uu siiyey sarkaal dakhli ka saaro arrin ama shey haddii aan lagu darin uu bayaanku noqonayo mid dadka marin-habaabinaya.

2) Ciqaabta/ganaaxa ku xusan faqradda 1aad waa-

a) haddii bayaanka lo sameeyo ama wax looga saaro si aanan macquul aheyn, 100% canshuurta ka dhimmanaatey ayu bixinayaa.

b) xaalad walbo oo taas ka duwan, 30% Canshuurta ka dhinnaatey ayu bixinayaa.

Canshuurta ka dhinnaatey waa canshuurtii waajibtey oo aan la wada-bixin oo ay Wasaaradda u aragto in ay ka dhalatey haddii saxnaan la'aanta bayaanka uu mari lahaa iyada oo aan la ogaan khaladka ku jira.

3) Haseyeeshee, ciqaabta/ganaaxa lagu xusey faqradda 2aad waa-

a) in 20% loogu kordhiyo wadarta mar kasta oo xigta oo qofka lagu qaado Qodobkan shantii sano ee ugu dambeeyey; iyo

b) laga dhimo 20% haddii qofku uu si khiyaar ah shaaca uga qaado bayaanka ka hor inta uusan ogaan sarkaal dakhli ama hantidhowrka canshuurta ee xigta ee qofka, hadba kan soo horreeya.

4) Bayaan waxaa la siiyey sarkaal dakli marka afka looga sheego, qoraal ama qaab kale lagu siiyo sarkaal dakhli oo ku guda jira gudashada waajibaadkiisa si waafaqsan sharciga dakhliga. Bayaan waxaa ka mid ah -

a) mid ku jira dukumenti ama macluumaad kasta oo uu in la xareeyo waajibinayo sharciga dakhliga;

b) mid ku jira dukumenti loo gudbiyey sarkaal dakhli oo aan ku saleysneyn sharciga dakhliga;

c) jawaab ku aaddan su'aalo uu sarkaal dakhli weydiiyey qof;

d) mid la siiyey qof kale iyada oo la ogsoon yahay ama si macquul ah loo filayo in bayaanka loo sii gudbin doono sarkaal dakhli; ama

e) mid ku jira qaan-sheeg ama dukumenti kale oo xusaya qaddar lacag canshuur ah oo in la diyaariyo uu waajibinayo sharci dakhli.

5) Qofka jebiya mid kasta oo ka mid ah qodobbadan soo socda waxaa loola dhaqmayaa in uu bayaan been ah ama marin-habaabin ah siiyey sarkaal dakhli:

a) Qodobka 7(2) ama (3) Sharciga canshuurta Wax-soo-saarka Gudaha / *the Excise Duty Law*; ama

b) Qodobka 7(4) (soo-sheegidda Ficiloyinka Canshuur cid loogu baajinayo), 24(1) (codsashada TIN), 24(6) ama 26(5) (matalidda qof leh TIN ama SHC), ama 29(2) (matalidda la-taliye Canshuureed ahaan) ee sharcigan.

6) Marka uu qof xareyn waayo canshuur-celin saddex jeer ama ka badan muddo saddex sano gudahood ah qofka waxaa loo arkayaa in uu bayaamo been ah ama marin-habaabinayo sarkaal dakhli.

7) Marka uu qof *canshuur-celin u xareeyo Wasaaradda taas oo uu ku sheegey in canshuurta ay tahay in uu bixiyo-

a) 30% ilaa 50% ay ka yar tahay canshuurta dhab ahaan ku waajibtey, qofka waxaa loola dhaqmayaa in uu bayaan been ah ama marin-habaabin ah siinayo sarkaal dakhli; ama

b) 50% ama ku dhowaad marka loo eego canshuurta dhab ahaan ku waajibtey, qofka waxaa loola dhaqmayaa sidii in uu bayaan been ama marin-habaabinaayo sarkaal dakhli isaga oo aan u haysan qiil macquul ah.

## Qodobka 85aad: Ciqaabta/ganaaxa Madaniga ah ee Bayaan Been ama Marin-habaabin ah oo la siiyo Cid Saddexaad

1) Qofka waxaa uu muteysanayaa ciqaab/ganaax haddii-

a) qofku uu ka qaato ama isku dayo in uu qof kale ka qaato qaddar canshuur ah ama qaddar lacag uu qofku ku tilmaamo in ay canshuur tahay, in uu sharci dakhli si khaas ah uu ugu oggolaanayo in uu qofka qaado qaddarkaas lacagta mooyaane; ama

b) qofku uu bayaan been ah ama marin-habaabin ah uu siiyo qof kale oo sababa in qofka kale uu -

i) ku darin canshuur qiimaha qofka markii hore la xusey looga iibiyey alaabo ama adeegyo; ama

ii) uusan ka reebin canshuurtii loogu talagaly in laga reebo lacag uu siinayo qofka kale sida uu dhigayo sharci dakhli.

2) Ciqaabta/ganaaxa faqradda 1aad waa-

a) marka qaadis, iskudayid ama bayaan loo sameeyo iyada oo aan qiil macquul ah loo haysan, 100% qaddarka lacagta canshuurta ayaa la ganaaxayaa; ama

b) xaalad kasta oo kale, 50% qaddarka lacagta canshuurta ayaa la ganaaxayaa.

Qaddarka canshuurta waa canshuurta la qaadey ama la isku dayey in la qaado, qiimaha aan la saarin ama canshuurta aan laga reebin ee lagu xusey faqradda 1aad.

3) Haseyeeshee, ciqaabta/ganaaxa lagu xusey faqradda 2aad waxaa 20% lagu kordhinayaa wadarta mar walbo oo lagu qaado Qodobkan mudo shan sano gudahood.

4) Dembiilaha waa in uu qofka kale ee lagu xusey faqradda 1aad u gudaa khasaare kasta (oo ay ka mid tahay canshuurta uu bixiyey) ee qofka kale ka soo gaara canshuur-qaadidda, iskudayga ama bayaanka.

5) Iyada oo la tixraacayo qodobkan, iskuday canshuur-qaadasho waxaa ka mid ah qaddar lacageed oo lagu muujiyey qaansheeg alaabo cid laga iibiyey ama adeegyo la bixiyey si kasta oo ay noqotaba -

a) qaan-sheeggu uu yahay qaan-sheeg canshuureed oo loo soo saarey si waafaqsan sharci dakhli;

b) qaddar lacag canshuur ah oo la saarey alaabada ama adeegga la bixinayo; ama

b) qofka soo saaraya qaansheegadku uu yahay qof canshuur ku waajibto.

**Qodobka 86aad: Ganaaxa Ku-gacansiinta iyo Ku-dhiirrigelinta**

1) Qofka isaga oo aan u haysan sabab macquul ah gacan ku siiya, ku-dhiirrigeliya, kula taliya ama ku qalqaaliya qof kale in uu galo dembi ah nooca lagu sheegey Qaybta III waxaa uu muteysanayaa ciqaab/ganaax. Muhiim ma aha in dembiga dhab ahaan la fuliyey iyo in kale.

2) Ganaaxa ka dhalanaya faqradda 1 waa100% Canshuurta baaqatey. Canshuurta baaqatey waa Canshuurta ay Wasaaraddu u aragto in la la hari lahaa haddii dembiga la geli lahaa oo aan la ogaan lahayn.

## Qaybta II: Qiimeynta Ganaaxa Madaniga ah

### Qodobka 87aad: Qiimeynta Ganaaxa Madaniga ah

1) Wasaaraddu waa in ay qiimeeysaa ganaaxa uu qof ku muteysanayo si waafaqsan Qaybta I. Qiimeynta loo sameeyo si waafaqsan Qodobkan waa *qiimeyn asal ah oo ka tarjumaya ujeeddada Qodobka 48aad.

2) Ganaaxa waafaqsan Madaxan (*this Part*) ee ka dhalanaya fashil ama caddayn waa kuwo is-biirsaday (*cumulative*) oo mid waliba goonidiisa loogu xisaabiyo Qodob kasta oo ku jira Madaxan, waxayna dheeri ka yihiin Canshuur kasta oo kale oo uu soo rogey sharci dakhli. Haseyeeshee, marka fashil ama caddayn uu keenayo ganaax ku saleysan sharcigan ama shuruucda kale ee dakhli, markaa Wasaaraddu waa in ay qofka u qiimeeysaa iyada oo adeegsanaysa sharcigan oo keliya ama shuruucda kale ee dakhliga. Wasaaraddu waxa ay xulan kartaa sharciga ay u adeegsanayso qiimeynta.

3) Marka qiimeyn loo sameynayo si waafaqsan faqradda 1aad, Wasaaraddu waa in ay wargelin qoraal ah oo ku saabsan qiimeynta gaarsiisaa qofka, kaas oo xusaya:

a) magaca qofka iyo lambarka *LAC ee qofka (haddii uu leeyahay);

b) qiimeynta ganaaxyada ee Wasaaradda;

c) qaabka loo xisaabiyey qiimeynta;

d) sababaha Wasaaraddu u samasay qiimeynta;

e) taariikhda ay tahay in ganaaxyada la bixiyo; iyo

f) waqtiga, goobta iyo qaabka looga hor-imaan karo qiimeynta.

Wargelin waxa la dhexgelin karaa wargelin kale oo qiimeyn oo waafaqsan sharci dakhli.

4) Qiimeynta ganaaxyada ee faqradda 1aad kama qaadeyso qof in lagu soo oogo dacwado fal-dembiyeed.

### Qodobka 88aad: Ganaaxyada Madaniga ah Waa Kuwo Shakhsi ah

Ganaaxyadu waa kuwo shakhsi ahaan ugu dhacaya qofka lagu soo rogo. Ganaaxyada tooska ah iyo kuwa dadban ee qof loogu soo rogo Canshuur laga rabey cid saddexaad daraaddeed waa in aan laga soo ceshan cidda saddexaad. Sharcigan waxaa uu si gaar ah u khuseeyaa ganaaxyada qof loogu soo rogo Canshuur ah nooca lagu xusey Faqradda 22(1)(c) (Canshuur ku xiran Canshuur lagu leeyahay cid saddexaad).

## Qaybta III: Fal-dembiyeedyo

### Qodobka 89aad: Wacyiga ku aaddan Fal-dembiyeed

Qof ma gelin dembi lagu sharxay Qaybtan haddii qofkaas falka ku kicin -

a) isaga oo ogsoon ama taxaddar la'aan daraaddeed; iyo

b) isaga oo aan u haysan sabab macquul ah.

### Qodobka 90aad: Fal-dembiyeed ka Dhashey U-hoggaansamid La'aanta Sharci Dakhli

Qofka u hoggaansami waaya qodob ka mid sharci dakhliga waxaa uu ku kacay fal-dembiyeed. Ciqaabtiisuna waa -

a) halka u-hoggaansamid la'aanta ay ka dhalatey ama, haddii aan la ogaan, ka dhalan lahayd in ay yaraato Canshuurta la bixinayo wax ka badan 50 *qaddar-lacageedka (currency unit) ay khuseyso, ganaax aan ka yareyn 10 ama aan ka badneyn 50 *tirada lacagta ay khuseyso, xabsi muddo aan ka badneyn 6 bilood ama ganaaxa iyo xabsiga oo la isugu daro; iyo

b) xaaladaha kale, ganaax aan ka yareyn 2 oo aan ka badneyn 10 *qaddarka-lacageedka ay khuseyso.

### Qodobka 91aad: Fal-dembiyeedka Bixin La'aanta Canshuurta

Qofka bixin waaya Canshuur maalintii ay ahayd in la bixiyo ama ka hor waxa uu galey dembi. Ciqaabtuntiisuna waa-

a) marka bixin la'aanta ay ka badan tahay 50 *qaddar-lacageedka ay khuseyo, ganaax aan ka yareyn 25 oo aan ka badneyn 100 *qaddar-lacageedka ay khuseyso, xabsi aan ka yareyn 3 bilood oo aan ka badneyna 1 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda; iyo

b) marka loo eegayo xaaladaha kale, ganaax aan ka yareyn 5 oo aan ka badneyn 25 *qaddar-lacageedka ay khuseyso, xabsi aan ka yareyn 1 bil oo aan ka badneyn 3 bilood ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda.

## Qodobka 92aad: Fal-dembiyeedka Bixinta Caddaymo Been ah ama Marin-habaabin

1) Qofku waxa uu galey fal-dembiyeed haddii -

a. uu sarkaal-dakhli siiyo caddaymo been ah ama marin-habaabin ah; ama

b. uu caddaymo siiyey sarkaal-dakhli kana reebo arrin ama shey haddii aan lagu darin caddaymntaasu noqonayso marin-habaabin ah.

2) Waxa loo arko in ay tahay caddayn la siiyey sarkaal-dakhli ama marka caddayntaasu loo arko in ay been tahay ama marin-habaabinayso waxaa go'aan looga gaarayaa si waafaqsan Qodobka 84aad.

3) Ciqaabta fal-dembiyeedka ay tilmaameyso faqradda 1aad waa-

a) haddii halista ka dhalanaysa weyn tahay, ganaax aan ka yareyn 25 oo aan ka badneyna 200 *qaddar-lacageedka ay khuseyso, xabsi aan ka yareyn 3 bilood oo aan ka badneyna 2 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda; ama

b) marka xaaladdu ka duwan tahay, ganaax aan ka yareyn 5 oo aan ka badneyn 50 *qaddar-lacageedka ay khuseyso, xabsi muddo aan ka yareyn 1 bil oo aanna ka badneyn 1 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda.

Kiisku wuxu leeyahay halis weyn, haddii khaladka ku jira bayaanka aan la ogaan lahayn, natiijadu ay ahaan lahayd in wadar ahaan Canshuurta meesha is-dhammeysa ay ka badan tahay 50 *qaddar-lacageedka ay khuseyso.

## Qodobka 93aad: Fal-dembiyeedka Is-hortaagidda Maamul Canshuureed

1) Dembi ayuu galayaa qofka is-hortaaga ama isku daya inuu is-hortaago maamullidda sharci dakhli. Ciqaabta ka dhalaneysana waa -

a) marka uu fal-dembiyeedku la xiriiro khayaanno ama xoog-sheegasho aan loo baahneyn, ganaax ah laba-laabka qaddarka lacagta la isku dayayo in lala dhuunto ama dib loo soo helo ama 200 *qaddar-lacageedka ay khuseyso, labada midda badan, xabsi aan ka yareyn 2 sano oo aan ka badneyn 4 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda; iyo

b) xaalad kasta oo kale, ganaax aan ka yareyn 10 oo aan ka badneyn 200 * qaddar-lacageedka ay khuseyso, xabsi muddo aan ka yareyn 2 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda.

2) Marka laga soo tago ciqaabta ku xusan faqradda 1aad, alaab kasta oo uu dembiilaha u adeegsado gelidda dembiga waa lala wareegayaa.

3) Qodobkan is-hortaagidda maamul sharci dakhli waxa ka mid ah, iyada oo aysan ku koobneyn-

a) in iyada oo sarkaal dakhli oo waajibaadkiisa u gudanaya sida uu dhigayo sharci dakhli ama qof caawinaya sarkaalkaa dakhli lagula kaco waxyaabahan-

   i) weeraridda, tacaddi-u-geysashada, faragelinta ama iska-hortaagidda sarkaalka ama kaaliyaha dakhli ama iskudayidda arrimahaas;

   ii) faragelinta hanti uu adeegsanayo sarkaal ama kaaliye dakhli ama iskudayiddeeda; ama

   iii) u-diididda soo-gelidda dhisme, goob, ama helidda dukumenti ama hanti kele sida uu ku waajibinayo Qodobka 44aad (helidda macluumaadka);

b) in loohoggaansami waayo wargelin waafaqsan Qodobka 46aad (wargelin lagu dalbanayo macluumaad) ama in uusan si run ah uga jawaabin marka lagu sameynayo baaris waafaqsan Qodobka 46aad ama la weydiinayo su'aalo waafaqsan Qodobka 99aad (awoodda baaritaanka iyo soo-qabashada);

c) in la sameeyo been-abuurid ama wax-ka-beddelid dukumenti ama calaamad ku taalla dukumenti iyada oo looga danleeyahay in qof si khaldan uu u aamino ama u qaado tallaabo ku saleysan in dukumentigu si sax ah u waajibyey ama lagu soo saarey sharci dakhli ama si sax ah loo shaabadeeyey;

d) in iyada oo looga dan leeyahay ka baxsadka waajib uu farayo sharci dakhli, iyada oo si ku talogal ah loola tacaamulayo ama loo adeegsanayo dukumenti ama hanti-

   i) si been cad ah ama marin-habaabin ah;

   ii) si ka dhigaysa dukumentiga ama hantida ka dhigaya mid been ah ama marin-habaabin ah; ama

   iii) si ka dhigaysa dukumentiga ama hantidaba ay ku jiraan ama muujinayaan macluumaad (marka la cabbiro) oo been ah ama marin-habaabinaya;

e) in uu ka-hor-imaanaya Qodobka 29 (mamnuucidda matalaadda iyo talo-siinta Canshuurta);

f) in la-baxsado canshuurta ama la isticmaalo ogaal ahaan ama in la qaado tallaabooyin looga danleeyahay la-baxsashada Canshuurta, oo ay ka mid yihiin-

i) aqbalidda ama la-tacaamulidda alaabo isaga oo og ama aaminsan in Canshuurtii laga rabey alaabada aan la bixin lana bixin doonin ama si been-abuur ah loo soo ceshan doono;

ii) isticmaalka hanti muteysatey in la soo qabto si la isugu dayo in uu ka hortago soo-qabashada, taas oo ay ka mid tahay hanti dacwadi ka taallo si waafaqsan Qodobka 63aad; ama

iii) Adeegsiga shaabad boollo ah oo horey loo isticmaaley;

g) In la is-hortaago soo-celinta Canshuur baaqatey, oo ay ka mid tahay soo-celinta ama soo badbaadinta hanti la soo qabtey si waafaqsan Qodobka 44aad (helidda maclumaadka), 64aad (gacan-ku-dhigidda hanti la rahmey), 68aad (xannibidda hanti) ama 99aad (awoodda baaritaanka, soo qabashada iyo xirista) ee xeerkan ama xeer dakhli oo kale;

h) In la farageliyo quful, sijilaato, calaamad, xirmo ama qaab amni kale oo loo adeegsado in lagu *xannibo hanti si waafaqsan Qodobka 68aad (xannibidda hanti) ama 99aad (awoodda baaritaanka iyo soo-qabashada);

i) in si ku talogal ah la iskaga leexiyo qaan in la bixiyo waajib saaran ama u soo-xiridda qof si waafaqsan sharci dakhli la isaga ilaaliyo-

i) is-dhalanrogid ama is-qarin; ama

ii) dhalanrogidda digniin-bixinta, qarinta ama sii-deynta qof kale; iyo

j) gelidda dembi ku xusan sharci dakhli iyada oo qofka horey loogu heley dembi ku xusan sharci dakhli ama dacwad loogu beddeley ganaax lacageed si waafaqsan Qodobka 97aad.

**Qodobka 94aad: Fal-dembiyeedyada ay ku kacaan Shakhsiyaadka Idman iyo Kuwa Aan Idmandyn**

1) Qof ay Idmatay ama loo idmay Waaxda Canshuuraha, oo uu ka mid yahay sarkaal dakhli, oo ku dhex jira waajib gudashadiisa si waafaqsan sharciga dakhliga waxaa uu galey dembi haddii qofkaas-

a) si toos ah ama si aan toos ahayn u weydiisto ama u qaato-

i) qaddar lacag ah ama abaalmarin (haddii ay lacag tahay iyo haddii kaleba) aan qofkaas sharci ahaan xaq u lahayn in uu qaato; ama

ii) ballanqaad ama rahan la xiriirta wax-siintaas ama abaalmarintaas; ama

b) oggolaado, fasaxo, qariyo, qorsheeyo ama ka raalli noqdo in fal ama shey Dowladda Soomaaliya lagu khayaameynayo ama khayaameyn kara (oo ay ka mid tahay bixinta canshuurta).

2) Qofku dembi ayuu galey haddii qofkaas-

a) qaado ama isku dayo in uu qaado qaddar lacag canshuur ah oo lagu bixinayo sharci dakhli ama qaddar lacageed oo uu qofku ku sheegayo in ay canshuur tahay, hadii uusan sharci dakhli uu si gaar ah ugu oggolaado qofka in uu qaddarkaa lacagta qaado; ama

b) isu ekeysiiyo qof uusan ahayn isaga oo uga dan leh in qof kale uu rumeysto in qofku yahay sarkaal dakhli (isaga oo ahayn), isaga oo sidaasna aaminsan in uu tallaabadaas qaaday.

Waxa ay noqonaysa iskuday canshuur-qaadis waxaa la sharxay iyada oo la tixgelinayo Qodobka 85(5).

3) Ciqaabta dembiyada ku xusan faqradda 1aad ama 2aad waa ganaax aan ka yareyn 50 *tirada lacaga ay khuseyso oo ah, xabsi muddadiisu aan ka yareyn 3 bilood oo aannan ka badneyn 5 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo isla socda.

4) Qofka ku xadgudba Qodobka 20aad (ilaalinta sirta) waxaa uu galey dembi. Ciqaabta dembigaasi waa ganaax aan ka badneyn 100 *tirada lacagta ay khuseyo, xabsi muddadiisu aan ka badneyn 1 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo isla socda.

## Qodobka 95aad: Maareeyeyaasha Hay'adda (*Entities*)

1) Marka ay *hay'ad (*entity*) gasho dembi uu dhigayo sharci dakhli, qof kasta oo *maareeye ka ah *hay'adda (*entity*) waqtigaa waxaa loola dhaqmayaa in uu sidoo kale galey isla dembigaas. Ciqaabta *maareeyaha waxaa ay la mid tahay tan *hay'adda (*entity*).

2) Faqradda 1aad lama adeegsanayo haddii *maareeyuhu uu sameeyey daryeel, dadaal iyo xirfad la aqbali karo oo uu kaga hortegayo in dembiga lagu kaco. Heer macquul ah waxaa lagu cabbirayaa iyada oo loo eegayo qof madax-bannaan oo haya jago *maareeye oo u tallaabo-qaadaya ilaa xad xigmad ku dhisan.

3) Marka qof *maareeye ka ah *hay'ad (*entity*) u galo dembi uu dhigayo sharci dakhli isaga oo adeegsanayo awooddiisa *maareeye ahaan, *hay'adda (*entity*) waxaa sidoo kale loola tacaamulayaa in ay isla dembigaa gashey. Ciqaabta *hay'adda waa ganaax la mid ah kan lagu ganaaxayo *maareeyaha dembiga galey.

## Qodobka 96aad: Fal-dembiyeedka, Ku-ganacsiinta iyo ku-dhiirrigelinta

Qofka gacan ku siiya, ku dhiirrigeliya, kula taliya ama ku-qalqaaliya qof kale in uu galo dembi uu dhigayo sharci dakhli ("dembiga dad lagu qalqaaliyey") waxaa uu galey dembi. muhiimna ma aha in dembiga qofka lagu qalqaaliyey dhab ahaan loo galay. Ciqaabta qofka koowaad waa-

a) marka dembiga qof lagu qalqaaliyay uu la xiriiro kiis halistiisu badantahay, ganaax aan ka yareyn 50 oo aan kana badneyn 200 *qaddar lacageedka ay khuseyso, xabsi muddadiisu ka yareyn 1 sano kana badneyn 2 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo la isu raaciyo;

b) marka dembiga qofka lagu qalqaaliyey uu noociisu yahay kan lagu xusey Qodobka 93(1)(a) (khayaanno ama xoog-sheegasho aan loo baahneyn), ganaax ah laba-laabka qaddar lacagta la doonayo in lala dhuunto ama la soo celiyey ama 200 *qaddarka lacagta ay khuseyso, labada tan badan, xabsi ugu yaraan 2 sano ah ugu badnaanna 4 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo la isu raaciyo;

c) marka dembiga qofka lagu qalqaaliyey uu la xiriiro in qof awood loo siiyey hawsha lagu qalqaaliyo in uu galo dembiga uu dhigayo Qodobka 94aad, ganaax aan ka yareyn 50 *qaddarka lacagta ay khuseyso, xabsi ugu yaraan ah 3 bilood oo ugu badnaanna ah 5 sano ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda; ama

(d) nooc kasta oo kale, ganaax aan ka yareyn 10 kana badneyn 50 *qaddarka nooca lacagta, xabsi ugu yaraan 6 bilood ah oo ugu badnaanna 1 sano ah ama ganaaxa iyo xabsiga oo wada socda.

Kiiskan waxaa uu la xiriiraa halis weyn marka, haddii khaladka ku jira caddeynta aan la ogaan lahayn, natiijadu ay ahaan lahayd in wadar ahaan canshuurta meesha is-dhimmeysa ay ka badan tahay 50 *qaddarka lacagta ay khuseyso.

**Qodobka 97aad: Baarista, gudbinta iyo isugeynta fal-dembiyeedyada**

1) Wasaaradda waa in ay baartaa arrimaha muujin kara in uu dhacay fal-dembiyeed la xiriira sharci dakhli. Wasaaradda waxa ay dhammaan awooddeeda sharci u adeegsan kartaa hadafkaas, kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwa uu tilmaamayo Qodobka 44aad (helidda macluumaad iyo hantida), 46aad (wargelinta lagu dalbanayo macluumaad) iyo 99aad (awoodda baarista iyo soo-qabashada).

2) Marka ay Wasaaradda ay hesho caddeyn tilmaameysa in uu dhacay dembi la xiriira sharci dakhli, Wasaaradda waa in ay Booliska ilaalinta canshuuraha ku wargelisaa si waafaqsan Qodobka 29aad ee Sharciga Baarista iyo Xakameynta Ku-xadgudbidda Shuruucda Maaliyadda (Sharci Lr. 12 ee soo baxay 1dii Agoosto 1966). Wargelintu waa in ay ahaataa qoraal caddeynaya nooca dembiga iyo qaddar lacageed ee uu la xiriiro. Wasaaraddu waa in ay Booliska ilaalinta canshuuraha siisaa macluumaadka la xiriira dembiga ee u baahan yahay.

3) Xeer Ilaaliyaha Guud ayay mas'uuliyaddiisu tahay dembi-ku-soo-oogidda dembiyada la xiriira shuruucda dakhliga. Haseyeeshee, marka uu qof qirto in uu galey dembi la xiriira sharci dakhli, Wasaaradda waxaa ay dacwad-ku-soo-oogidda dembiga ay ugu beddeli kartaa lacag uu bixiyo. Dembi-qirashadu waa in ay qoraal ahaataa. Wasaaradda waa in aysan lacag ugu beddelin dembi-

a) la xiriira-

i) hab-dhaqanka sarkaal dakhli ama sarkaal dowladeed oo ku shaqeynaya awood dowladeed; ama

ii) hab-dhaqanka lagu xusey Qodobka 94aad (shakhsiyaadka hawl loo ansaxiyey iyo kuwa aan loo ansaxin); ama

b) haddii uu Xeer-Ilaaliyaha Guud uu sidaa faro.

4) Wasaaradda waxaa ay dacwad-ku-oogis dembi ku beddeli kartaa lacag sida ay dhigeyso faqradda 3aad iyada oo qofka ku waajibeyso in uu bixiyo lacag iyo in uu keeno hanti kasta oo ay tahay in lala wareego oo la xiriirta dembiga. Amarka-

a) waa in uu qoraal ahaadaa waana in uu cayimaa-

i) dembiga dhacay;

ii) tirada lacagta ay tahay in la bixiyo (aan ka badneyn ganaaxa dembiga);

iii) hanti kasta oo lala wareegey; iyo

iv) taariikhda ay tahay in la bixiyo lacagta oo lana soo gacangeliyo hantida;

b) waa in ay ku lifaaqnaataa dembi-qirasho qoraal ah;

c) waa in la gaarsiiyaa shakhsiga galey dembiga;

d) in uu yahay kama-dambeys waana in dhinacyadu ay isla oggolaadaan in aan rafcaan laga qaadaneynin; iyo

e) waxaa loo dhaqangelin karaa sidii in uu yahay amar ka soo baxay Maxkamad Gobol oo la xiriira bixinta qaddar lacag ah iyo geynta hanti kasta oo lagu xusey amarka dhexdiisa.

4) Marka Wasaaraddu ay dacwad-ku-soo-oogis dembiile ugu beddesho lacag si waafaqsan Qodobkan, qofka ay khuseyso laguma soo oogayo ciqaab ama dembi-ku-oogis fal-dembiyeed oo la xiriira dembigaas.

5) Qodobka 98aad (habraacyo/dacwado badan) ayaa ku habboon ahdaafta Qodobkan.

## MADAXA XI: HABRAACYADA/DACWADAHA

### Qodobka 98aad: Habraacyo/Dacwado Badan

1) Habraac lagu doonayo in lagu helo Canshuur iyada oo la raacayo qodob ka mid ah sharci dakhli ma xaddidayo in habraacyo is-barbar-socda ama kala gaar ah oo lagu doonayo in lagu soo helo isla Canshuurtaas iyada oo la raacayo siyaabaha kale duwan ee sharcigaan ama u farayo sharci dakhli oo kale.

2) Habraac dembi loogu soo oogayo qof galey fal-dembiyeed ku jira qodob ka mid ah sharci dakhli ma xaddidayo dacwad-oogis isbarbar-socda ama kala gaar ah oo isla qofkaas loogu soo oogo fal-dembiyeed uu tilmaamay qodob kale oo sharcigaa ama qodob sharci dakhli oo kale ku jira.

3) Qof ayaa lagu heli karaa ama lagu ganaaxi karaa qodob fal-dembiyeedyo mid ka badan oo ku jira isla hal sharci dakhli ama shuruuc dakhli oo kala duwan oo la xiriira fal ama tallaabo-qaadid la'aan keliya. Haseyeeshee, waa in aan qof lagu helin dembi ama loo ganaaxin-

a) marar badan qodob keliya iyo habraac keliya; ama

b) wax ka badan hal qodob fal-dembiyeed oo la xiriira arrin keliya ama qeyb ka mid ah isla habraacaas.

4) Marka qodobbo laba ama ka badan oo tilmaamaya fal-dembiyeed oo ku jira hal sharci dakhli ama shuruuc dakhli oo kala duwan ay ku habboon yihiin hal fal ama dacwad ka saaris qof, garsooraha waxaa uu xulan karaa qodobka uu qofka ku xukumey ama ku ganaaxay. Marka uu garsooruhu go'aansado, qofka waa in aan lagu qaadin ama lagu ganaaxin qodob kale oo habraaca dacwad ka saaridda.

5) Habraaca waxa ku jira dhoor talaabo oo isku xiran ama dacwad ka saaris ah oo ujeeddo mid ah leh. Qayb ka mid ah habraaca waa hal tallabo oo keliya ama ka saaris ka mid ah habraacaas..

### Qodobka 99aad: Awoodda Baarista iyo Soo-qabashada

1) Sarkaal dakhli oo si gaar ah loogu oggolaadey hadafka waxaa uu ka codsan karaa sarkaal garsoor isaga oo ku dhaaranaya sababaha uu sarkaalka dakligu u aaminsan yahay in qof -

a) si ku talagal ah u galey fal-dembiyeed uu tilmaamey sharci dakhli;

b) baxsan doono ka hor inta aan qofka lagu soo oogin ama lagu qaadin maxkamadeyn fal-dembiyeed uu tilmaamey sharci dakhli; ama

c) baabi'in doono, wax u dhimayo ama si kale u baabi'inaayo caddeyn fal-dembiyeed uu tilmaamey sharci dakhli.

2) Haddii uu ku qanco in xaaladdu ay tahay mid halis adag gelineyso soo-qaadista Canshuurta ama maamulidda garsoorka, sarkaalka garsoorka waxaa uu bixin karaa amar qoraal ah oo uu sarkaal dakhli ku siinayo awoodahan soo socda. Sarkaalka dakhliga waa in ay la socdaan booliska marka uu awodahaas ku dhaqmo waxaana booliska ay soo xiri karaan qofka ku lug leh. Awooduhu waxa ay yihiin-

a) in uu galo dhismayaal ama goob iyo in uu *xannibo hantida ay tahay in si macquul ah u bixiso caddeyn tilmaameysa in la galey fal-dembiyeed uu tilmaamey sharci dakhli;

b) in u *xakameeyo baarista dhismayaal, goob, *baabuur ama hanti kale oo uu sarkaalka dakhligu aaminsan yahay isaga oo u haysta in ay ku jirtao caddeynta noocaas ahi

i

c) in uu su'aalo weydiiyo oo uu baaro ama sababo in su'aalo la weydiiyo ama la baaro qof sarkaalka dakhligu aaminsan yahay isaga oo u haysta sababo macquul ah in qofkaasi galey dembi uu tilmaamey sharci dakhli ama ay gacanta ugu jirto hantida lagu xusey faqrad-hoosaadda a); iyo

d) in isaga oo u adeegsanaya awood macquul ah ujeedooyinka kor xusan faqradaha kore, oo ay ka mid tahay in uu jebiyo dhismayayaasha, goobta ama hantida uu si macquul ah u aaminsan yahay in ay ku jirto caddeynta lagu xusey faqrad-hoosaadda a).

3) Ka dib marka uu *xakameeyo hanti lagu xusey faqradda 2aad, sarkaalka dakhliga waa in uu wargelin qoraal ah gaarsiiyaa *dadka gacanta ku haya hantida. Hadii *dadka hantida gacanta ku haya ay ka badanyihiin, hal qof wargelinta la gaarsiiyo *mid ka mid ah waa ku filantahay.. Marka aan la heli karin *dadka hantida gacanta ku haya midkoodna, sarkaalka dakhliga waa in uu wargelinta uga soo tagaa dhismayaasha ama goobta *xakameyntu ay ka dhacayso. Wargelinta waa in uu-

a) aqoonsadaa uuna taxaa hantida *la xakameeyey;

b) sheegaa in hantida *loo xakamayeey si waafaqsan Qodobkan iyo sababta *loo xakameeyey; iyo

c) u sheegaa shuruudaha lagu sii deynayo, oo ay ku jirto *rahanta loo baahan yahay, iyo shuruudaha lagu xaraashaayo hanti kasta oo gacanta lagu dhigey.

4) Qofka waxaa sida ay dhigeyso faqradda 2(c) uu baari karaa keliya qof ay isku jinsi yihiin.

5) Sarkaal dakhli waxaa uu adeegsan karaa awoodu uu siiyey sarkaal garsoor si waafaqsan Qodobkan iyada oo ay la socdaan awoodaha kale ee sarkaalka dakhliga, oo ay ka mid yihiin kuwa lagu siiyey Qodobka 44aad (helidda macluumaadka) iyo 44aad (wargelin lagu dalbanayo macluumaad).

6) Qodobkan dhexdiisa, sarkaal garsoor waxaa loola jeedaa garsoor Maxkamadda Sare ee Federaalka iyo Maxkamad Gobol.

**Qodobka 100aad: Goobta (Madasha)**

1) Habraacyada lagu soo celinayo Canshuur waa in laga bilaabaa, lagu dhegeystaa laguna dhammeeyaa maxkamadda awoodda u leh ee ugu dhow iyo isla degmada garsoorka ee uu-

a. qofka laga doonayo in lacag laga soo celiyo uu caadi ahaan deggan yahay; ama

b. halka uu ku yaallo xafiiska Wasaaradda ay saaran tahay mas'uuliyadda aasaasiga ah ee *arrimaha Canshuuraha ee qofkaas. Wasaaradda ayaa kala dooran karta labada goobood midka suuragalka ah.

2) Habraacyada dacwad-ku-soo-oogidda ee la xiriira fal-dembiyeed uu tilmaamayo sharci dakhli waa in laga bilaabaa, lagu dhegeystaa laguna dhammeeyaa maxkamadda awoodda u leh ee ugu dhow iyo isla degmada garsoorka ee uu-

a) qofka dacwadda lagu soo oogeyo fal-dembiyeedka ee u caadi ahaan deggan yahay; ama

b) halka uu ku yaallo xafiiska Wasaaradda ay saaran tahay mas'uuliyadda aasaasiga ah ee *arrimaha Canshuuraha ee qofkaas.

c) lagu hayo qofka inta laga gaarayo dacwad-ku-soo-oogidda; ama

d) uu fal-dembiyeedku ka dhacay.

Dacwad-oogaha ayaa kala dooran kara goobaha suuragalka ah.

**Qodobka 101aad: Sarkaal Dakhli waa uu Hor Imaan Kara Maxkamad**

Sarkaal dakhli ayaa isaga oo ka wakiil ah Wasaaradda hor-imaan kara maxkamad ay ka socoto dacwad Wasaaraddu daraf ka tahay oo la xariirta sharci dakhli. Sarkaalka Dakhliga waa in uu arrintan oggolaansho qoraal ah uga haystaa Wasaaradda. Xeerkan ayaa la raacayaa iyadoon wax loo dhimeynin sharci kale oo kasoo horjeeda

**Qodobka 102aad: Dukumentiyada Caddeyn ahaan Loo Aqbali Karo**

1) Dukumentiyadan ayaa caddeyn ahaan loogu aqbali karaa habraacyo (hawlo) maxkamadeyn oo la xiriira rafcaan hoos imaanaya Madaxa VI ama soo-celinta Canshuur hoos imaaneysa sharci dakhli iyada oo aan loo yeerin qofkii diyaariyey ama saxiixey dukumentiyada:

a) dukumenti la xiriira *arrimaha Canshuurta uu qof gacanta ku soo dhigey ama soo heley sarkaal dakhli asagoo gudanaayo waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan xeer dakhli;

b) caddeynta la xiriirta *arrimaha Canshuurta ee qof (oo uu ka mid yahay qofka bixiyey caddeynta) oo lagu bixiyey sarkaal dakhli hortiisa isaga oo ku dhex jira gudashada waaajibaadkiisa uu tilmaamayo sharci dakhli; iyo

c) nuqulka, turjumaadda ama qayb laga soo qaatey dokuemnt ama caddeynta lagu xusey faqrad-hoosaadda a) ama b).

2) Aqbaliddda ay tilmaameyso faqradda 1aad saameyn kuma yeelanayaan in qof lagu qalqaaliyey bixinta dukumentiga, nuqulka ama qaybta laga soo qaatey caddeynta taas oo lagu sababeynayo in uu qofka aaminsanaa in-

a) Wasaaradda laga yaabo (shuruudda waxay doonto ha ahaate) in ay xalliso bilaabidda ama dembi-ku-soo-oogista arrimaha; ama

b) go'aanka Wasaaradda ee la xiriira in ay xalliso billaabidda ama dacwad-ku-soo-oogista arrimaha waxaa saameyn ku yeelan doona sida uu qofku u qirto in uu ku kacay fal-dembiyeedka ama uu si buuxda u fududeeyo dembi-baarista.

3) Faqradaha 1 iyo 2 ayaa la raacayaa iyada oo waxba loo dhimeynin hadii ay jiraan shuruuc ka hor-imaanaysa. Tani ma xaddideyso caddeyn u qaadashada dukumentiga, nuqulka, qaybta laga soo qaatey caddeynta ee uu tilmaamayo sharci kale.

## Qodobka 103aad: Mas'uuliyadda Caddeynta

1) Mas'uuliyadda caddeyntu waxaa ay saaran tahay Canshuur-bixiyaha ama qofka sameynaya diidmda in uu u hoggaansamey sida ay qabaan shuruucda dakhliga. Tani waxa ay khusaysaa habraacyada racfaanka loo cuskanayo ee Madaxa VI, taas oo lagu soo celinayo Canshuur si waafaqsan sharci dakhli, ee la xiriira soo-rogidda ciqaab madani ah (ganaax) si waafaqsan sharci dakhli ama hirgelinta waajib si waafaqsan *rahan ay haysato Wasaaraddu..

2) Qodobka 52(4) waxa uu tilmaamayaa caddeyn kama-dambeys ah oo sheegeysa in *go'aan Canshuureed la gaarey iyo in ay tahay caddeyn hordhac ah oo sax ah. Intaa waxaa dheer, kuwan soo socda ayaa caddeyn hordhac ah oo sax ah oo waafaqsan habraacyada/hawsha lagu xusey faqradda 1aad ama la xiriira fal-dembiyeed uu tilmaamayo sharci dakhli:

a) arrimaha ay qoraal ku caddeeyso Wasaaraddu iyada oo adeegsanaysa awooddeeda rasmiga ah, oo ay ku jirto-

i) magaca iyo cinwaanka qofka iyo qaddarta lacagta iyo nooca Canshuurta laga rabo qofka;

ii) in qof uu bixin waayey in uu xareeyo dukumenti, diiwaangeliyo ama si kale uga soo baxo waajib uu saarey sharci dakhli;

iii) in qofku uu yahay sarkaal dakhli iyo in qabashada hawlo gaar ah loogu oggolaadey sharci dakhli iyo in hawlaha gaarka ah ee sarkaalka dakhliga loo qabtey si waafaqsan oggolaanshahaas;

iv) in dukumenti la daabacay uu yahay nuqul ama turjumaad sax ah ee dukumenti kale, oo ay ka mid yihiin dukumenti elektaroonig ah ama dukumenti sumado ka sameysan ama ku qoran Af-qalaad; iyo

v) qiimaha alaabada;

b) arrimaha ay qoraal ku xaqiiijiyaan saraakiisha dowladda Soomaaliya iyaga oo fulinaya wajibaadkooda rasmiga ah;

c) arrimaha uu qoraal ku xaqiiijiyo saraakaal dowladeed oo ajnebi ah isaga oo fulinaya waajibaadkiis rasmiga ah; iyo

d) waxyaabaha ka soo hara alaabo loo qabtey si waafaqsan sharci dakhli, caddayn waxyabaha ku jira 10% alaabtaasi.

**Qodobka 104aad: Go'aamada Canshuuraha iyo Fulintoodu Saameyn Laguma Yeelan Karo**

1) *Go'aan Canshuureed lama laalayo mana saameyneyso-

a) bilaabidda hawl/dacwad looga soo qaadayo Canshuur ama la xiriirta fal-dembiyeed uu dhigayo sharci dakhli; ama

b) iyada oo sabab looga dhigayo in Wasaaraddu ay lacag ugu beddesho dacwad ku qaadid fal-dembiyeed sida uu dhigayo Qodobka 97aad.

2) In qofku uu bixiyo *rahan/damaanad in loo hoggaansamayo sharci dakhli ma noqoneys difaac la isaga difaaco dacwad Canshuur baaqatey lagaga soo qaadayo ama mid fal-demibyeed uu tibaaxay sharci dakhli.

**Qodobka 105aad: Ka-dhaafidda Canshuuraha Mucaamalaadka**

Tallaabooyinka ay Wasaaraddu qaaddo ee hoos ku xusan waa laga dhaafayaa dhammaan wixii Canshuur ah:

a) aqbalidda *rahan loo dhigey waajib qof la saaray sida sharciga dakhligu qabo;

b) abuurista ama sii-deynta hanti rahan ah sida uu dhigayo Qodobka 63aad ama 66aad, waa sida ay u soo kala horreeyaan; iyo

c) gacan-ku-dhigista hantida sida uu dhigayo Qodobka 64aad.

## MADAXA XII: Shuruucda Dakhliga

### Qodobka 106aad Shuruucda Dakhliga waxa lagu soo saarayaa Heer Federaal

Dakhliyadan soo socda waxaa lagu soo saarayaa laguna xeerinayaa Sharci Federaal ah *iyadoo lala tashanayo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka* si waafaqsan nidaamka federaliga ah:

*1.* Cashuuraha soo-dejinta iyo dhoofinta *taas oo ay ku jiraan kuwa xuduudaha dalka*

2. Cashuuraha wax-soo-saarka (*Excise duties*)

3. Cashuuraha alaabada iyo adeegyada oo ay ka mid tahay cashuurta iibka

4. Cashuuraha isticmaalka milkiyad cid kale (*Royalties*), ujuurooyinka shatiyada, faa'iido wadaagga iyo dakhliyada kale ee lagu soo rogo kheyraadka dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda

5. Ujuurooyinka iyo cashuuraha lagu soo rogo war-isgaarsiinta, shirkadaha maaliyadda iyo iyo mucaamalaadka ganacsiga maaliyadeed

6. Cashuurta dakhliga oo ay ka mid yihiin cashuuraha qiime kororka hantida iyo shirkadaha

7.Cashuuraha lagu soo rogo mushaaraadka

8. Canshuurta Moorka (*Stamp duties*)

9. Cashuurta diiwaangelinta oo ay ka mid tahay cashuurta dhaxalka

10. Cashuurta waddo-marista

### Qodobka 107aad: Ururinta iyo Bixinta Dakhliga

Dakhli-ururinta lagu sheegey Qodobka 3aad iyo siinta dakhliyadaasi loo siinayo hay'adaha heerarkoodu kala duwan yihiin ee ka tirsan Jamhuuriyadda waa in uu go'aamiyaa sharciga lagu dhisayo Keydka Qaranka, *si waafaqsan qodobka 125 Dastuurka JFS*

## MADAXA XII: Nidaamka lacagta iyo fulinta sharci

### Qodobka 108aad: Nidaamka Qaddar-lacageedka (Currency Unit System)

Si loo dhiirrigeliyo cadaaladda nidaamka Canshuurta iyo si looga ilaaliyo saamaynta uu sicirbarchitecture ku yeelanayo, cadadka lacagta lagu xusay sharci dakhli waxa lagu

muujin karaa qaab qaddar-lacageed. Wasiirku waa in uu amar ku bixiyaa laguna soo saaraa Faafinta rasmiga ah kaas oo ku talinaya qiimaha asalka ah oo ah qaddar-lacageed. Wasiirku waa in uu wax ka beddel ku sameeyaa qiimaha lacagta ugu yaraan hal jeer sanadkii si ay uga muuqato is-beddellada ku yimid [Tirada Qiyaasta ah ee Qiimaha Alaabada ee uu soo saaro Xafiiska Istaatisikada Qaranka/*the Consumer Price Index published by the National Bureau of Statistics].*

### *Qodob 109: Awoodaha Sharci Fulineed*

*Iyadoo la tix-gelinaayo mabaadi'da guud ee Federaalka ee ku xusan qodobbada **52-aad**, **53-aad** iyo **50-aad** ee Dastuurka KMG,ee Dawladda Federaalka Somalia Wasaaradaha Maaliyadda Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalku waxay u xil-saaran yihiin masuulna ka yihiin;*

1. *Maamulka dakhli iyo Cashuureed ee deegaanadooda si waafaqsan shuruucda dakhliga iyo dastuurka dalka*
2. *Ka qayb-qaadashada iyo ka talo bixinta samaynta iyo waxkabeddelak shuruucda iyo xeer-nidaamiye yaasha dakhliga ee uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda DFS.*
3. *Ka qayb-qaadashada wax-ka-beddelka shuruucda iyo Xeerarka khuseeya Maamulka dakhliga ee Dalka .*

## MADAXA XIII: KALAGUUR

### Qodobka 110aad: Wax-ka-beddellada Is-Waafajinta ah

1) Qodobbada shuruucda ku xusan Jadwalka Sadddexaad waxaa loo joojiyey, loo ansaxiyey, loo beddeley ama wax looga beddeley sida u dhigayo Jadwalkaas si ay u waafaqaan soo bixidda sharcigan.

2) Xeer-nidaamiyeyaasha lagu soo saarey qoddobada lagu xusey faqradda 1aad ee dhaqangalka ah marka uu bilaabanayo sharci waa sii jiri doonaan. Waxa ay u sii jiri doonaan sidii in ay ka hoos baxeen sharcigan ilaa ay wax-ka-beddel ku sameynayaan ama ay ka joojinayaan xeer-nidaamiyeyaal ka hoos baxay sharcigan. Xeer-nidaamiyeyaashu ma sii jirayaan intiiba aaney la jaanqaadi karin sharcigan. Xeer-nidaamiyeyaasha waxaa ka mid ah xeerarka, go'aamada, amarrada iyo wargelinta.

**Qodobka 111aad: Kala-guurka**

1) Iyada oo ku xiran Qodobkan, qodobada lagu xusay Jadwalka Saddexaad (sharcigii ka horreeyey) ayaa sii shaqeynaya iyaga oo aan waxba laga beddelin si loogu maamulo muddooyinka ka horreeyey iyo dhacdooyinka dhacay ka hor taariikhda uu sharcigan bilaabanayo.

2) Magacaabista la sameeyey iyada oo la cuskanayo sharcigii hore ee jira taaariikhda uu sharcigan bilaabanayo ayaa loo arkayaa in ay yihiin magacaabis lagu sameeyey sharcigan.

3) Foomamka maran iyo dukumentiyada kale ee lagu adeegsanayey sharcigii hore ayaa sii ahaan kara kuwo lagu adeegsado sharcigan. Marka ay foomamkaas iyo dukumentiyadaas ay xusayaan qodobada iyo oraahda ku jirey sharcigii hore waxaa loo qaadanayaa in ay xusayaan qodobada iyo oraahaha la xiriira ee sharcigan ku jira.

4) Dacwadihii bilowdey ka hor taariikhda dhaqangalka ayaa sii socon doona waxana loo sii socodsiinayaa sidii in sharcigan uusan dhaqangelin.

5) Canshuuraha waajibey ka hor taariikhda dhaqangalka ayaa lagu raadin karaa dacwado cusub oo sharcigan ka hoos baxa. Tani waxaa ay imaaneysaa iyada oo aan wax loo dhimin tallaabo kasta ee ku aaddan soo xareynta Canshuurta ee horey loo qaadey.

6) Marka ay xaaladdu waajibineyso, tixraac sharcigan uu tixraacayo "sharcigan" ama qodob ka mid ah "sharcigan" waxa ka mid ah tixraacidda sharcigii ka horreeyey ama qodob u dhigma oo ka mid ah sharcigii ka horreeyey, waa sida ay u soo kala horreeyaan.

7) Wasiirku waxu xeer nidaamiye ku soo saarayaa cadeynayaa in hab ku dhaqanka mamulkaan fulintiisa sii wadayaan waaxyaha Dakhliga ee Wasaaradda ilaa iyo inta laga gaarayo aasaaska Hay'adda Dakhliga Soomaaliyeed.

**Qodobka 112aad: Dhaqangalka**

Sharcigaan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanku Madaxweynuhu saxeexo muddo ku siman 15 maalmood faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro, laga bilaabo taariikhda uu Baarlamaanku ansixiyey.

**JADWALKA KOOWAAD**

--------

*(Hoos taga Qodobbada 21 iyo 23)*

---------

**MUCAAMALAADKA LOOGU BAAHAN YAHAY *LAC IYO *SHC**

**Qaybta I**

***LAC ayaa loogu baahan yahay**

| **Waax** | **HADAFKA MUCAAMALAADKA** |
| --- | --- |
| Waaxda Dakhliga | Diiwaangelin la xiriirta Canshuur<br>Codsi Canshuur-dhaaf ama tixgelin gaar ah oo Canshuureed<br>Shahaaddada Canshuur-bixinta |
| Hay'adaha Maaliyadeed | Furidda xisaabo cusub |
| Dhammaan Wasaaradaha, Waaxaha iyo Hay'adaha Dowladda, hadii ay yihiin heer Federaal ama Dowlad-goboleed | Mar kasta oo dowladdu lacag siineyso ganacsade/iibiye ama urur/hay'ad |
| Hay'ad kasta oo liiskan lagu daro iyada oo la adeegsanayo xeer-nidaamiyeyaal | Mucaamalaad/wax-is-dhaafsi kasta oo liiskan lagu daro iyada oo la adeegsanayo xeer-nidaamiyeyaal |

**Qaybta II**

***SHC ayaa Loogu Baahan Yahay**

| **WAAXDA** | **HADAFKA MUCAAMALAADKA** |
| --- | --- |
| Waaxda Dakhliga | Codsi shati<br>Soo-dhoofinta badeecooyin ganacsi;<br>Marinta kastamka iyo sii gudbinta |
| Dhammaan Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'ada Dowladda, hadii ay yihiin heer Federaal ama Dowlad-goboleed | Diiwaangelinta lahaanshaha dhulka ama mucaamalaad kale oo la xiriira dhul<br>Codsi ku aaddan amaah laga qaato dowladda |

| | |
|---|---|
| | Diiwaangelinta baabuur<br>Codsi shati ganacsi<br>Codsi oggolaansho qorsheyaal dhismo<br>Codsi diiwaangelin sharikad ama magac ganacsi<br>Codsi shati kale<br>Xaqiijinta u-magacaabista ama u-doorashada xafiis dowladeed/dadweyne<br>Xaqiijinta u-magacaabista guddoomiye ama xubin ka mid ah hay'ad dowladeed ama jago kasta oo kale oo la mid ah<br>Qandaraas dowladeed oo qiimahiisu ka sarreeyo heerka ugu hooseeya ee loo dhigey, oo uu ka mid yahay qandaraas lagu bixinayo alaabo ama adeegyo |
| Guddiga Doorashooyinka Federaalka ama Dowlad-gobleedka | Codsi u-tartamidda doorasho Xubin Baarlamaan |
| Hay'ad kasta oo liiskan lagu daro iyada oo la adeegsanayo xeer-nidaamiyeyaal | Mucaamalaad/wax-is-dhaafsi kasta oo liiskan lagu daro iyada oo la adeegsanayo xeer-nidaamiyeyaal |

**JADWALKA LABAAD**

--------
*(Hoos taga Qodobka 105aad)*
---------

**CANSHUUR-CELINTA IYO QIIMEYNTA**

**Canshuur-celinta**

1. Sharcigan dhexdiisa, kuwaan soo socda ayaa ah Canshuur-celin:

a) marka ay la xiriirta Canshuurta dakhliga-

i) Canshuur-celinta dakhliga oo loo xareeyey si waafaqsan Qodobka 25aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga; iyo

ii) Canshuur-celinta dakhliga ee uu shaqaalaha u soo xareeyeen si waafaqsan Qodobka 35aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga;

b) marka ay la xiriirto Canshuurta wax-soo-saarka gudaha, Canshuur-celin loo xareeyey si waafaqsan Qodobka 9aad ee Sharciga Wax-soo-saarka Gudaha;

c) marka ay la xiriirto Canshuurta iibka, casheer-celin loo soo xareeyey ama qaansheegashooyin shaabadeyn loo keeney xafiiska Wasaaradda sida uu dhigayo Sharciga Canshuurta Iibka;

d) Canshuur-celinta la soo xareeyey oo la xiriirta lacagaha bixintoodu u waajibiyey Sharci Batroolka (Sharci Lr. !! ee soo baxay !! 2018);

e) marka ay timaaddo Canshuurta shaabadda, shaac-ka-qaadis loo soo xareeyey si loo bixiyo Canshuur aasaasi ahaan hoos tagta Qodobka 5aad ee Sharciga Canshuurta Shaabadda;

f) marka ay timaaddo Canshuurta soo-dejinta iyo dhoofinta, foomka shaac-uga-qaadista kastamka ee loo soo xareeyey si waafaqsan Sharciga Kastamka iyo wixii kale ee macluumaad ah ee lagu bixiyey Qodobka 15aad ee Wareegtada Axkaamta Hordhaca ah ee Kastamada; iyo

g) dukumenti kasta oo ay xeer-nidaamiyeyaal ugu talogaleen Jadwalkan.

**Qiimeynta**

2. 1) Sharcigan dhexdiisa, qiimeynta waxaa soo hoos geleya-

a) is-qiimeyn loo sameeyey si waafaqsan faqradda 3aad ee Jadwalkan;

b) marka ay timaaddo Canshuurta shaabadda, qiimeyn qiyaas ah oo la xiriirta qaddarka Canshuurta ay tahay in la bixiyo si waafaqsan Qodobka 5aad ee Sharciga Canshuurta Shaabadda;

c) marka ay timaaddo Canshuurta soo-dejinta iyo dhoofinta, qiimeyn lagu sameeyo Canshuurta ee lagu muujiyey oggolaanshaha kastamka si waafaqsan Sharciga Kastamada, oo ay ka mid yihiin:

i) qaddar lacag ah oo uu dalbado sarkaal dakhli si waafaqsan Qodobka 14aad ee Sharciga Kastamada;

ii) qaddar lacag loo qiimeeyey si waafaqsan Qodobka 20aad ee Sharciga Kastamada;

iii) qiimeyn dib loo dhigey si waafaqsan Qodobka 16aad ee Wareegtada Axkaamta Hordhaca ah ee Kastamada;

iv) Canshuurta shaabadda ee lagu qiimeeyey dukumentiyo ay Wasaaraddu u soo saartey si waafaqsan Qodobka 22aad ee Wareegtada Axkaamta Hordhaca ah ee Kastamada;

v) qiimeyn lagu sameeyey lacag bakhaar oo ugu waajibtey si waafaqsan Qodobka 23aad ee Wareegtada Axkaamta Hordhaca ah ee Kastamada;

vi) qiimeynta kharashka kirada dekadda (*wharfage*) ee Wareegtada Axkaamta Hordhaca ah ee Kastamada;

vii) qiimeyn lagu sameeyo Canshuurta wax-soo-saarka gudaha ee la saaro soo-dejinta sida uu dhigayo Qodobka 2aad ee Sharciga Canshuurta Wax-soo-saarka Gudaha; iyo

viii) qiimeyn lagu sameeyo Canshuurta iibka ee la saaro soo-dejinta sida uu dhigayo Qodobka 6aad ee Sharciga Canshuurta Iibka;

d) marka ay joogto Canshuurta waddooyinka, qiimeyn loo sameeyo sida uu dhigayo Qodobka 9aad ama 10aad ee Sharciga Canshuurta Waddooyinka;

e) marka ay joogto sharcigan, qiimeyn la sameeyey oo waafaqsan Qodobka 46aad (soo-xareyn la'aanta Canshuur-celinta), 47aad (qiimeyn ka-hortag ah), 48aad (qiimeyn wax-ka-beddel yar lagu sameeyey) ama 85aad (qiimeynta ciqaabaha/ganaaxa); iyo

f) dukumenti ama geeddi-socod kasta oo kale oo lagu sameeyey xeer-nidaamiyeyaal oo loogu talogaley Jadwalkan.

2) Wasaaradda Maaliyadda waxaa ay dhammaan awoodaha lagu siiyey sharcigan u adeegsan kartaa qiimeyn (oo ay ka mid tahay *is-qiimeyn), oo ay ku jiraan awoodaha lagu siiyey Madaxa V ee sharcigan.

**Is-qiimeyn**

3. 1) Marka uu qof *Canshuur-celin u soo xareeyo si waafaqsan axkaamta lagu xusey faqradaha 1(a) ilaa (d), is-qiimeyn ayaa loo arkayaa in la sameeyey maalinta ay tahay in la soo xareeyo *Canshuur-celinta. Qiimeyntu waa qaddar lacag la mid ah qaddarka Canshuurta saafiga ah (haddii ay jirto) ee lagu muujiyey *Canshuur-celinta.

2) Marka uu qof codsado shaabado si wafaqsan Sharciga Canshuurta Shaabadda ama Sharciga Canshuurta Iibka, is-qiimeyn ayaa loo arkayaa in la sameeyey maalinta codsiga. Qiimeyntu waa qaddar lacag la mid ah shaabadaha la soo codsadey.

3) Xeer-nidaamiyeyaal ayaa tilmaami doona Canshuur-celinta kale ee ay ka dhalan karto is-qiimeyn.

"Canshuur-celinta dakhli ee loo xareeyo si waafaqsan Qodobka 25aad ama 35aad waxaa ka dhalaneysa is-qiimeyn sida ay dhigayaan axkaamta Jadwalka Labaad ee Sharciga Maamulka Dakhliga."

a) sharciga lagu xusey faqradda a).

4. Iyada oo aan la xaddideynin sida guud ee ay u hadleyso faqradda 3aad, sharcigan-

a) laguma saleynayo xadgudubyada maamul ee shuruucda dakhliga maaddaama lagu maamulayo Sharciga Maamulka Dakhliga, haddii ay la xiriiraan ciqaabo, ka-horimaasho, rafcaanno ama wax kale; laakiin

b) waxaa lagu saleynayaa dembiyada maaliyadeed ee ay ka galaan shuruucda lagu xusey Madaxa II ee Jadwalka Sharciga (Wasaardda Maaliyadda)

Qodobka 10aad, jumlad dheeri ah ugu dar dhammaadka Qodobka sidan soo socota:

"Xeerkan waxaa uu ku xiran yahay Qodobka 96aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga oo xeer gaar ah ku maamulaya dembiyada hoos yimaada shuruucda dakhliga."

Qodobka 11aad, jumlad dheeri ah ugu dar dhammaadka Qodobka sidan soo socota:

"Xeerkan waxaa uu ku xiran yahay Qodobka 96aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga oo xeer gaar ah ku maamulaya dembiyada hoos yimaada shuruucda dakhliga."

Qodobka 15aad, jumlad dheeri ah ugu dar dhammaadka Qodobka sidan soo socota:

"Xeerkan ma khuseeyo dembiyada la xiriira shuruucda dakhliga ee lagu maamulo Sharciga Maamula Dakhliga."

Qodobka 19aad, faqrad kale ku dar dhammaadka Qodobka sidan soo socota:

"5. Xeerkan ma khuseeyo dembiyada la xiriira shuruucda dakhliga ee lagu maamulo Sharciga Maamulka Dakhliga."

Qodobka 20aad, ugu dar faqrad kale dhammaadka Qodobka sidan soo socota:

"4. Xeerkan ma khuseeyo dembiyada la xiriirta shuruucda dakhliga ee lagu maamulo Sharciga Maamula Dakhliga."

Qodobka 25aad, ugu dar jumlad dheeri ah dhammaadka Qodobka sidan soo socota:

"Haseyeeshee, Wasaaradda Maaliyadda oo keliya waa in ay mas'uul ka ahaataa xaqiijinta xadgudubyada maamul ee lagu sameeyo shuruucda dakhliga ee lagu maamulo Sharciga Maamulidda Dakhliga."